**MUXUU INAGA BARYAA KITAABKA QUDDUUSKA WAXYAALAHA KU SAABSAN SADDEX MIDNIMADA ILAAH**

**Taxanaha Buuggan.**

**Hordhac**

1. Ilaahow, Ilaah cajiib ah ayaa tahay!
2. Ilaah waa mid.
3. Aabbuhu waa Ilaah.
4. Rabbi Ciise Masiix oo ah Madiga, waana Ilaah.
5. Ruuxa Qudduuska ahu waa Ilaah.
6. Saddex Shaqsiyadiisa ayuu isku muujiyey Ilaah.

**HORDHACA:-**

Ilaah inta aan xusuusto intii aan awoodo ayaan wax akhrinayey. Haddii aan si kale u idhaahdo, ma xusuusto barasho oo keliya. Waxaan waxa barasho ka bilaabto xurufta alif-beetada. Buuggaas aan waxaan ka bartay macluumaadka ku jiray ma ahan mid la soo koobi karo waayo waxa uu aasaas u ahaa wax akhrintaydii mustaqbalka. iminka in badan baan ka xusuusto.

Xitaa buuggan yari waa sidaas oo kale oo waa aasaaska, waxaana filayaa in aad in badan akhrin dootid. Ma aha mid ku siinaya waxa aad doonaysid in aad ogaatid oo dhan. Ku talo galkiisu waxaa weeye in uu kuu noqdo af - bilow. Waxa uu wax kaa barayaa waxa Saddexmidnimada Ilaah aasaaska u ah. Waxa uu wax kaa barayaa waxyaabaha kuuga adag ee aadan ka fahmin waxa ay tahay Saddexmidnimada Ilaah mowduuca ah.

Waa in aynu noqolsheenna aad ugu dadaalno ‘Oo aynu ogaanno, oo aynu ka fikirno inaan Rabbiga Ilaaha ah ogaanno’ (Hossheeca 6:3)!

**Ilaahow, Ilaah cajiib ah ayaa tahay!**

Buuggan waxa uu ina tusaaleenayaa in aan Ilaah wax ka fahanno. Tani ma ahan wax si qiyaas ah oo keliya lagu soo saari karo ama cabbiraad. Waa mid ay rag iyo dumarba ka siman yihiin. Aadana waxaa ku jira wax uu isagu ku abuuray. Waa wax uu isagu qalbigiisa ka og yahay in ay aadanuhu helayaan, marka ay qaynuunkiisa addeecaan. Aadanaha ( Dadka) haddana weli dareen ayaa kaga jira in qaynuunkan uu sax yahay ama uu qalad yahay. Ma jiro qaynuun ama sharci la dareemi karo haddii uusan jidhin mid qaynuunka bixiya ( Waa Ilaahiye). Waxaa jirta samo naga sarreysa iyo abuuris ku dhex jirta toos noo taabsiinaysa Ilaah awooddiisa daa’imiska ah iyo Ilaahnimadiisa. Marka qof yidhaahdo ‘Ilaah ma jiro,’ waxa uu si toos ah u ogeyn ama jaahil uga yahay runta cad ee ay tahay in uu ogaado. Haddaba waxa aan wax badan Ilaah ka ogaan karnaa marka aan u soo noqonno xagga Kitaabka Qudduuska ama Baybalka. Kitaabka dhexdiisa waxaa Ilaah sooyaalka aadanaha ugu muujiyay dhammaan wixii aan Isaga ku garan lahayn iyo waxa uu naga doonayo. Dhammaan buugaagta uu

Kitaabka Qudduuska ahu ka kooban yahay waxa ay ka hadlayaan kan uu asal ahaan yahay Ilaahay. Dhammaan qoraayaashii Kitaabka Qudduuska waxaa iyaga oo Ruuxa Qudduuska ahu hoggaaminayo wax ka yidhaahdeen waxa dhabtaa ah ee Ilaah qorsheeyay. Ereyada ay qoreen waxa ay ahaayeen kuwo uu Isagu ku talo galay. Tani waxa ay u dhacday mid aan ku iman ku talo gal iyaga xaggooda ah ama ay shaqsi ahaan leeyihiin. Kitaabka Qudduuska ahu ma aha hadal ama ereyo aadane ee waa Ereygii Ilaah oo ku ahaaday Ruuxa Qudduuska. Tan macnaheedu waxaa weeye in inta aannu meel iska fadhiisanno aynaan la yaabin sifaha iyo tilmaamaha Ilaah. Waa in aynaan iska malayn. Isaga qudhiisa ay middan inoogu sheegay Kitaabka Qudduusaka.

**RUUXA:-**

Waxa uu inoo sheegay in uu yahay Ruuxa (Yooxanaa 4:24). Isagu ma lahan jidh sida keenna oo kale ah. Isaga lama arki karo----cidina Isaga maysan arag mana arki karto (1 Timoteyos 6:15-16). Isaga laguma dareemi karo cabbir ama qiyaas. Waa run inaan mararka qaar kitaabka ka akhrinno, sida indhihiisa, dhegihiisa, afkiisa iyo wixii la mid ah. Tani waxaa weeye oo qudha qaabkii uu maankeenna daciifka ah ama waxmagaradka ah uu ku fahmi lahaa inuu arko dhammaan waxa ay samaynayno, oo uu baryada dadkiisa maqlo oo uu muujiyo in la garto. Ilaah taswiir ahaan looma muujin karo waana uu naga mamnuucay in taas samayno (Bilowgii 20:4).

Arrintu si kastaba ha ahaatee haddana waa in aynu si taxaddar le u xusuusannaa in uu yahay Ruuxa shaqsi ah. Haddii aan si kale u dhahno, waa in aynaan ku fakarin in Ilaah yahay *Sheey* oo ay ku sifaynno, balse aan ogaanno in Ilaah shaqsi. Magacyo ayuu leeyahay, magaca ugu weynna waa ‘Jehova’ ama Yahweh oo Af Cibraani ah kaasoo tarjumada kitaabbada ku ah ‘Sayid.’ Rag iyo dumarba waa uu la hadlaa oo xidhiidh ayuu la leeyahay, oo mid ayaaba ‘saaxiibkiis’ (Baxniintii 33:11; Yacquub 2:23). Bogga ugu horreeya ee Baybalka waxaan ka akhrin karnaa Isaga oo hadlaya oo waxaa ku arkaynaa ilaa bogga ugu dambeeya ee kitaabka. Waxaan kitaabka ka baran karnaa in ay macquul tahay in Ilaah la garto. Tani macquul nooma noqonayso haddii aynaan nafteenna ku qasbin inay garato runta iyo xaqiiqada jirta ee ku saabsan Ilaah.

**WEYNAHA:**

Maaddaama Ilaah Ruux yahay ma aha mid meel ku kooban, mana jiro wax Isaga lala simaa (Ishacyaah 40:18).
Ilaah meel kasta jooge (1 Boqorrada 8:27; Sabuurrada 139:7-10). “Anigu sow kama buuxo cirka iyo dhulkaba?” ayaa Rabbigu leeyahay’ (Yeremyaah 23:24). Isagu mar qudha ayuu meel kasta wada joogaa, oo meel uu ka maqan yahay ma ay jirto. Waa in aynaan ku fakarin in ay jirto meel yar oo caalamka ka mid ah oo uu Ilaah ka maqan yahay. Meel kasta ayaa Ilaah ku dhan yahay. Waxa uu meel kasta ku joogaa weynaantiisa iyo amaantiisa oo uu ku dhan yahay. Waa mid uu si dhab meel kasta ugu joogo. Bal tan ka warrama? Dareenka maskaxdeennu ma qaadan kartaa? Waxa muuqdaa ma ay fahmi ka karto iskaba daa waxa aan muuqanine.

**Waxa aan samayn karno ayaa waxa ay tahay in aan rumaynno wixii Ilaah noo caddeeyay ee Isaga ku saabsan oo aan sujuud iyo caabudis u lahaanno.**

Isagu mar kasta waa daa'im (Ishacyaah 40:28; Xabaqquuq 1:12). 'Weligeed iyo weligeedba adigu waxaad tahay Ilaah' (Sabuurrada 90:2) Isagu waa kan keliya ee aan dhimanayn (1 Timoteyos 6:16). Waxa uu ku jiraa meelaha qarsoon, sannadihiisuna weligood ma dhammaadaan (Ishacyaah 57:15; Cibraaniyada 1:11-12). Tan qudheeda ayaa ah wax fahankeenna ka weyn. Wax walba Isaga ayey ka soo bilowdeen laakiin Isagu bilow ma laha. Isaga waa jiraa, weligiisna wuu jiray, oo weligiis ayuu jiri doonaa. Tan ayaa looga qiyaas qaadan karaa marka dadka qaar ay leeyihiin 'duni aan dhammaad lahayn' marka kaniisadaha qaar qaar ay ka hadlayaa. Isaga xaggiisa isbeddel kama jiro: ma jirin mana jiri doonaan waayo Isagu mar walba waa kiisii (Malaakii 3:6; Yacquub 1:17). Wax kasta Isagu ayey ku tiirsan yihiin, laakiin isaga jiritaankiisu cidna kuma tiirsana kumana tiirsanaan doonaan, isla Isaga uun mooyaane. Ilaah wax kasta Isaga ayaa isku ah. Waa sababta uu mid ka mid ah magacyadiisu u yahay 'Ilaaha nool' (Muujintii 7:2) waa middan sababta Muuse uu ugu yidhi 'ANIGU WAXAAN AHAY KAAN AHAY' (Baxniintii 3:14).
Haddii aan xagga aqoonta ka hadalno, Isagu wax kasta waa uu yaqaan (Sabuurrada 139:2-5; 1 Yooxanaa 3:20). 'Waxgarashadiisuna waa mid aan la koobi karayn.' (Sabuurrada 147:5). Innagu wax ayaan barannaa balse aqoonteennu waa mid xaddidan. Xagga Ilaah wax ka soo koobma ma laha. Isaga mar qudha ayuu wax kasta oo jira garanayaa. Isaga fahankiisu wax xad ah ma laha. Waa wax aynaan qiyaasi karin sida ay tani u dhacayso. Balse Ilaah wax ku adagi jiraan ma jiro wax uusan si buuxda u garanayna majiraan. Ilaah wax uu jaahil ka yahay ma jiraan waana taa sababta aan loo khiyaani karin.
Waa sababta uu wax walba oo uu doorto uu u sameeyo (sabuurrada 135:6; Daanyeel 4:35). 'wax alla wixii uu doonayo wuu sameeyaa' (Sabuurrada 115:3). Wax kasta oo ka farxiya doonistiisa ayuu ku sameeyaa. Isagu waa Qudduus oo marna kama tago waxa daahirka ah ee saxda ah. Si kasta ayuu kaamil u yahay oo taas in uu beddelo kama tago. Wixii is beddela ayaan kaamil ahayn, wixii is beddelaana buuxnaantoodii ayaa lunta. Way dhacdaa in uu beddelo qaabka uu ula dhaqmo aadanaha taa'se waxa ay ku timaaddaa doonista aadanaha. Ilaah haddii uu doorto in uu wax sameeyo waa ay dhacaan (Ishacyaah 46:10) Maxaa yeelay waa Ilaah oo keliya, kan wax walba abuuraha u ah, o ayan jirin cid iska caabbiyi karta (Rooma 1:19, Daanyeel 4:35). Waxa walba oo koonka ku jira, xataa kuwa ugu yar Isaga ujeedkiisa ayey ku joogaan. Waxa uu u keenay in ay maraan wixii uu qorshaystay ee uu go'aansaday (Efesos 1:11).

**Ilaah aan Wax la Mid ahi Aanay Jidhin**

Illaa iyo hadda wixii aan soo akhrinaynay waxa ay inoo sheegayaan kan Ilaah qudhiisu yahay. Tani inuguma fillaysiinayso in aan nidhaahno waa Ruuxa shakhsi ah, oo meel walba jooga, daa'im ah, wax walba cilmi u leh oo awood oo dhan ay isaga u sugnaatay. Ilaah sifihiisu muxuu yahay? Waa Ilaah caynkee ah?

Isagu waa ***Qudduus***. “Warkii aannu ka maqalnay oo aan idiinka warramayno wuxuu yahay, in Ilaah nuur yahay, oo Isaga aan gudcur ku jirin innaba.”(1 Yooxanaa 1:5). Dabeecadihiisu waa kuwo kaamil ah. Isagu waa daahir oo idil ahaanba waa ujeeddooyinkiisu lagama helo shar iyo caddaaladdarro, xataa fikirradiisa, hadalkiisa iyo ficilladiisa. Haddaba aad ayey u adag tahay in si kooban loo wada sharraxo waxa qudduusnimadu ay tahay. Buurtiisa samaawiga ahi ee Isaga carshigiisa ku wareegsan gebi ahaanba waa ka xor wasakh oo dhan, haddana ma eegi karaan Ilaah karaamadiisa, oo waxa uu midba midka kale si la yaab leh ugu sheegaa in uu yidhaahdo, ‘Quduus, Quduus, Quduus waxaa ah Rabbiga ciidammada’ (Ishacyaah 6:3) ma aha wax la yaab leh in Ilaah lagu muujiyay in uu yahay mid ‘Qudduusnimo amaan ku leh’ (Baxniintii 15:11)! Waa middan tan wax walba ka soocaysa , oo uusan ula mid noqon karin waxa uu abuuray oo dhan (Sabuurrada 99:3; Ishacyaah 40:25). Sidee baa qof u xeelayn karaan Ilaah noocan ah (Sabuurrada 24:3)? Indhihiisu waa ka ifitiin badan yihiin wax walba, xumaanna uma dul qaato (Xabaquuq 1:13).

Isagu waa ***Xaq***. ‘Ilaah jidadkiisa oo dhan waa ku xaq’ (Sabuurrada 145”:17), oo Isaga agtiisa xumaani kama timaaddo (Sefaniyaah 3:5). Maammulka uu abuurtiisa ku hayo waxaa aasaas u ah labada ee xaqnimada iyo caddaaladda (Sabuurrada 97:2). Isagu had iyo goorba xaqnimo ayuu sameeyaa xukun kasta oo uu bixiyaa waa mid xaq ah, oo cidina kuma eedayn karto xukunka uu sameeyo maaddaama uu yahay xaakin aan is rogrogin (Bilowgii 18:25; Sabuurrada 51:4). Alla sideebay raaxo u leedahay, Isaga oo qudha ayaa ah Isaga, kan xukumi doona adduunka! Xukuka ugu dambeeyaa waxa uu noqon doonaa mid loo siman yahay. Wax qalad ahu ma dhici doonaan. Midna Isaga kama heli doono wax siyaado ah ama wax naaqus ah oo aan ka ahayn wixii uu mutaystay (Sabuurrada 96:13).

Isagu waa mid ***Jacayl*** *ah.* ‘Ilaah waa jacayl’ (1 Yooxanaa 4:8, 16) Isagu waa ‘Kolkaasaa Rabbigu hortiisa maray oo naadiyey isagoo leh, Waxaan ahay Rabbiga, Rabbiga, oo ah Ilaah raxmad iyo roonaan badan, oo cadho u gaabiya, oo naxariis iyo run badan, ’(Baxniintii 34:6); Ilaah ‘naxariis u jacayl badan’ oo ‘naxariistiisu sarrayso’ (Sabuurrada 51:1); ‘carada u gaabiya oo naxariistiisu badan tahay’ (Yoo’eel 2:13; Yoonis 4:2); ‘kaasoo naxariista ku farxa’ (Miikaah 7:18) Maxay arrin cajiib ah tahay! Ilaaha Qudduska ah ee ay aanu xukunkiisu is beddelin, waa jacayl! Caddaaladdisu waa sax ku ah ciqaabtayda, taana waxaa iga qaaday markii Kii iin dembiga lahayni uu beddelkaygii u dhintay (1 Butros 3:18). Jacaykiisa ayaa qorsheeyay badbaadadayda, waana taas sababta uu badbaadadiyaha u soo diray in uu dhinto (1 Yooxanaa 4:10). Jacaylka iyo caddaaladdu isma qilaafaan. Labadaba Ilaah ayaa laga helaa, oo waxaa labadaba lagu helaa wixii uu iskutallaabta noogu dul sameeyay.

Isagu *waa* ***Wanaagsan yahay***. ‘Ilaah cid walba waa u wanaagsan yahay’ (Sabuurrada 145:9). ‘Waad wanaagsan tahay, oo wanaag baad samaysaa’ (Sabuurrada 119:68). Dabeecad ahaan rag iyo dumarba waxa ay door bidaan in ay Ilaah maanka ku hayn, oo ay jidkooda ku socdaan. Waxa ay ka soo hor jeestaan qaabkii uu ugu talo galay in uu noloshooda ku maammulo, oo waxa ay qaataan ujeed kale oo ah wax ay caabudaan oo ay iyagu samaysteen. Haddana Ilaah maalin walba iyaga waa uu u wanaagsan yahay, xaqiiq, daka caynkan ah, oo Isaga cadaywgiisa ah. ‘Isagu maragfur la'aan iskama sii dayn, laakiin wanaag buu sameeyey, oo wuxuu samada idinka siiyey roob iyo xilliyo barwaaqo ah, Isagoo qalbiyadiinna ka

dherginaya cunto iyo farxad. ' (Falimaha Rasuulladada 14:17). Goosashada abuurka ama midhaha, baadka xooluhu cunaan, iyo wax waloo wanaagsan oo uu koonkani ku raaxaysto, Isaga ayey ka yimaaddeen (Sabuurrada 84:12; 104:24-31; Yacquub 1:17). Haddaba caddaynta ugu weyn ee wanaaggiisa waxaa laga arkaa sida uu ula macaamilo kuwa fikirkooda nacaybka leh aawadii Isaga uga tegay, oo iyaga oo dambaabay u soo laabta iyaga oo dembi xambaarsan. 'Sayidow, waad wanaagsan tahay, oo waxaad diyaar u tahay inaad dembidhaafto, Waanad u naxariis badan tahay kuwa ku barya oo dhan' (Sabuurrada 86:5).

Waa ***Xikmad badane***. 'Ammaan waxaa leh magaca Ilaah weligiis iyo weligiis; waayo, isagaa leh xigmad iyo xoogba' (Daanyeel 2:20). Marka aan aragno quruxda iyo isku habboonaanta abuuritaankiisa, iyo qarsoonaanta hab dhiska makhluuqaadkiisa ugu yaryar, waxa aan ku qasbannahay in aan nidhaahno, 'Rabbiyow, shuqulladaadu tiro badanaa! Kulligoodna xigmad baad ku samaysay, Dhulka waxaa ka buuxa hodantinimadaada' (Sabuurrada 104:24). Xirfadaha ay aadanuhu horumariyaan, iyo aqoonta iyo fahanka aannu haysanno jinsi ahaan, iyo qaabka ay u dhacaanba waxa ay keenaan in ujeedka Ilaah meel maro—oo waxan oo dhan waxa au ku yimaadeen xikmadda Ilaah (Ishacyaah 28:23-29; 31:2; Daanyeel 2:21). Xikmaddiisa iyo fahankiisu waa kuwo aan la gaadhi karin, oo gebi ahaanba ka fog awooddeenna in aan baadhno oo aan fahanno. 'Mool dheeraa hodantinimada iyo xigmadda iyo aqoonta Ilaah! Xukummadiisa lama baadhi karo, jidadkiisana lama raadin karo! "Waayo, bal yaa soo ogaaday maanka Rabbiga? Bal yaase lataliyihiisii noqday?" "Yaase awil wax siiyey oo loo abaalgudi doonaa?" "Waayo, wax waluba Isagay ka yimaadeen oo ku yimaadeen oo u yimaadeen aawadiis. Ammaanta isagaa leh weligiis. Aamiin.' (Rooma 11:33-36).

**Waa mid *aan la sii koobi karin*.**

Sidaas daraaddeed, waan aragnaa in wixii Ilaah uu Isaga qudhiisu isaga kaaya sheegay ay nagu filan yihiin. Balse waa wax aad layaab ugu ah in maskaxda aadanuhu ay aad u dhuuxdo. Nagama daaddagayso, in aragtiyadiisa iyo waddooyinkiisu ay ka sarreeyaan kuwayaga (Ishacyaah 55:8-9). Waan aragnaa waxa ay runtu tahay, balse ma sharrixi karno sida ay sidaas ku noqotay. Maskaxdayadu waa mid aad u xadaysan. Ilaah uun baa isfahmi kara. Miyey rag iyo dumarkba sharrixi karaan sida ay macquulka u tahay in Ilaah jiro, jidh la'aan? Miyaan caddayn karnaa sida uu Ilaah meel walba u joogo hal mar oo qudha? Miyaannu runtii fahmi karnaa fikirka in uusan bilow lahayn, oo marnaba isbeddelayn? Miyaanay maskaxdeenna cullaab ku noqonayn haddii aan isku dayno in aan ka fakarno in uu wax walba yaqaan? sidee buu u sameeyaa wax walba oo uu ku farxo Isaga oo aan waxba dan ah a lahayn? Side buu dhammaan hal mar u wada yeelan karaa Qudduusnimo, Xaqnimo,Jacayl, Wanaag iyo xikmad?

**Ma ay jirto su'aal ku saabsan Ilaah oo ah ereyga 'sidee baa looga jawaabi karaa? Maskaxdeenna daciifka ah aad ayey yartahay. Maskaxdeenna daciifka ah aad ayey taas sabool uga tahay.** Laakiin su'aasha ah ereyga 'maxaa' si cad oo waadax ah ayaa looga jawaabi karaa, maxaa yeelay jawaabahaas Ilaah Qorniinka (Kitaabka Qudduuska) ayuu inoogu dhex muujiyey. Waxaan awood u leenahay in aan si qoto dheer uga baaran degno,

markaas ayaan awood u yeelanaynaa in aan sheegno wixii Ilaah yiri. Waxaan awood u yeelanaynaa in aan sheegno waxa ay runtu tahay. Laakiin ma awoodi in aan qeexno sida ay saas ku noqotay. Waxaa naga tiro badanaya waxa aan baranayno. Mar kasta oo aan tixraac ku samayno, waxaa inoo soo baxaysa in waxa aan baranay een akhrinay ayan nagu filnayn, in aan caabudayaal dhawrsan noqonno mooyaane.

Runta saddexmidnimada, ee aan doonayno in aan tisqaad ku samayno, waa mucjisada ugu weyn mara aannu ka hadlaynno Ilaah. Ma fahmi sida Ilaah, oo ah mid, uu saddex ku yahay. Laakiin tan kuma heli karno maaddada ah 'Sidee bay tani ku dhici kartaa?' haddiise aan ku nimadno tan ah 'Muxuu Ilaah yidhi?' waxaan ku farxaynaa in uu noo sheegay wax badan oo Isaga ku saabsan, si aan aan u rumaysanno xikmaddiisa kaamilka ah ee gunaanadka u ah in intaa wax ka sii badan aanan naloo muujin. Waxaa is-hoosaysiin naloogu yeelay in aynaa meel kasta iska gelin, illaa meeshii uu noo oggolaaday mooyaane. Innagu Ilaah lama mid nihin. Waxaannu nahay abuur, ama makhluuq.  Marna soo shaac bixin wax uusan noo muujin. Marna ma fahmi karno illaa wixii uu noo caddeeyay mooyaane. Balse, meesha sababta awooddeeda ku jirta, Halkaas ayaa iimanku ku gacan sarreeyaa jacaylkana lagu tixgeliyaa.

**2. Ilaah waa Mid oo waa Ilaah oo Keliya**

'Ilaahyo immisaa ayaa jira?'

'Mid' ayaa ku jawaabay wiilka yari.

'Sideed taas ku garan kartaa?'

'waayo qol waxaa iska leh hal qof, Isagu waa ka buuxiya samada iyo dhulka.'

Ma jiro run tan ka weyn oo qorniinka dhexdiisa nalagu baray oo aan middan ka ahayn. Ilaah mar walba ayuu jiraa.
Haddii aysan sidaas ahayn, dabcan waxa ay noqonaysaa in aynu nidhaano waxaa jira ilaahyo ka badan mid. Waxaa jira shey uu Qorniinku mar walba diido. Gebi ahaanba wax ilaahyo kale la dhahaahi maba jiraan. Aadanunu sida ay u badan yihiin ma rumaysna in tani ay sidan tahay, oo ay soo ahayd, oo ay hadda tahay, oo ay jiraan ilaahyo been oo aan tiro lahayn. Laakiin midkoodna ilaah run ah ma ahan. Midkoodna Ilaaha nool ma ahan. Way jirtaa in ereyga 'ilaah' loo isticmaalo magalaa'igaha mararka qaar (Sabuurrada 97:7). Tan sababteedu waxaa weeye uumis ruuxi ah oo darajo aad u sarraysa leh. Magacan waxaa sidoo kale loo soo isticmaalay hoggaamiyeyaasha iyo xaakinnada (Sabuurada 82:1,6), maaddaama ay awood dadka kale ka sarraysa leeyihiin. Shayddaanka ah sharfaha waxaa loogu yeeraa 'ilaaha wakhtigan' (2 Korintos 4:4) sababtuna waxaa weeyaan isagu waxa uu sharka ku maamulaa kuwa uu sida khaladka ah u go'doonsaday. Laakiin kuwani waa qiyaaso loo adeegsaday ereyga 'ilaah'. Qorniinku waxa uu sii xoojinayaa in uu jiro hal Ilaah oo run ah, oo ah halka Ilaah ee nool.

Sababtaas ayey ahayd tan wiilsha yaryary ee Yuhuudda loo barayey in ay ku subciyaan ereyada Sharciga Ku Noqoshadiisa 6:4: 'Maqal, Israa'iilow, Rabbiga Ilaaheenna ahu waa Rabbi keliya!' Tani waxa ay ahayd rumaysadka iimaanka Yuhuudda, Axdigii Hore. Waxa uu ahaa mid ay Yuhuuddu uun isku koobtay. Waxa uu garanayey 'in Rabbigu yahay Ilaah, oo Isaga mooyaane mid kale ma jiro.' (Sharciga Ku Noqoshadiisa 4:35).
Yuhuuddu waxa ay aad uga fikiraan waqtigii macbadka ammaanta leh ee Sulaynaam la sameeyay. Bqorku markii uu waqti dheer baryo Ilaah ula taagnaa ayaa boqoku dadkii soo leexiyey oo uu dareenkiisa qalbiyanka ah u sheegay; 'Rabbiga Ilaaheenna ahu ha inoola jiro, siduu ula jiray awowayaasheen oo kale; oo yuusan inaga tegin, oo ina dayrin…si ay dadka dunida jooga oo dhammu u ogaadaan in Rabbigu Ilaah yahay oo aan mid kale jirin' (1 Boqorrada 8:57,60). Taasi waxa ay si kaamil ah u cadddaysay waxa mid kasta oo Yuhuudi ahu dareemayay. Waxa uu doonayey in uu duni jaahil ah ugu marqaati furo in uusan Ilaah kale jidhin Rabbiga mooyaane.

Waxa ay tahay in dib loo eego maalmihii nebigii weynaa ee Ishacyaah, iyo ereyadii uu Ilaah Isaga kula hadlay 'Rabbiga ah Boqorka iyo Bixiyaha reer binu Israa'iil oo ah Rabbiga ciidammadu wuxuu leeyahay, Anigu waxaan ahay kan ugu horreeyey iyo kan ugu dambeeya, oo aniga mooyaane Ilaah kale ma jiro' (Ishacyaah 44:6). Ilaaha ku hadlay ereyadaas waxa uu qirayaa inuu yahay Ilaaha reer binu Israa'iil. Yuhuuddu waxa ay arkeen hawshiisa weyn ee uu runta ku hayo ee ah in uusan jidhin Ilaah kelae Yahweh mooyaane.  Side jacayl weyn u leedahay in la akhriyo marka Ilaah leeyahay, 'Waxaan ahay Rabbiga, oo mid kale ma jiro, aniga mooyaane Ilaah kale ma jiro. Anigaa guntiga kuu xidhay in kastoo aadan i aqoon … Anigaa Rabbiga ah, mid kalena ma jiro' Ishacyaah 45:5-6).
Ciise masiix qudhiisa ayaa ku dhawaaqay in la in ogaado oo la jeclaado qorniinnnada Axdigii Hore, oo weliba si adag loo xajisto runta ku jirta.weyaanta iyo in anay jidhin wax lala simo Ilaah waxa ay ahaayeen wax had iyo ku weyn carrabkiisa (Markos 12:29,32), oo waxaa si cad inoo sii baray rasuulladiisii uu noo soo diray ()1 Korintos 8:4-6; Efesos 4:6; Yacquub 2:19). Waa caddaynta ugu weyn ee Qorniinka ku qirta.

**Ilaah waa Mid**

Axdigii Hore waxaa lagu qoray afka Cibraaniyada, oo marka ay Yuhuuddu akhrinayaa Sharciga Ku Noqoshadiisa 6:4, luuqaddaas ayuu ugu talo galay – si la mid ah sida uu maantadan sameeyo. Nasiib darro, luuqadda Ingiriisigu hal jumlo oo keliya kuma soo koobi karto macnaha Sharciga Ku Noqoshadiisa 6:4. Macnaheedu waa uu ka weyn yahay oo keliya 'Rabbiga Ilaaheenna ahu waa mid!' oo sahlanaan loogu qaadan karo oo qudha in uu san jirin Ilaah kale Rabbiga mooyaane. Isagu waa mid *qudha*. Waxaa kaloo loo tarjumi karaa, 'Ilaaha Rabbigeenna ahu, waa Rabbi qudha.' Isagu mid qudha iskama aha. Laakiin kan midka qudha ahu waa mid.
Maxaan halkan ka dhihi karnaa? Lous Berkhof waxa uu qorayaa in 'Ilaah mid ku yahay.' Laakiin maxaa *taa* loola jeedaa?  Waxaa loola jeeda in aanad Ilaah marna qurub qurub u kala qaadi karin. Laakiin uu Ilaah isku dhan yahay! Ilah ma'aha sida cayaaraha isku aad-aaddiska ah ee ay carruurtu ku cayaaraan, ama sidii aadane oo kale, kuwaas oo unugyo badan ka kooban. Adigu iskuma dar-dari kartid qudduusnaanta, daa'imiska, iyo isbeddelis la;aanta

kama dhigi kartid Ilaah. Isagu qaybo kama koobna. Isagu waa mid aan la kala qaybin karin. Waa mid qudha. Waa daa'im. Isagu waa mid aan dhammanba la beddeli karin. Dhammaantiis waa mid ay awoodi u dhan tahay. Isagu waa mid gebi ahaanta qudduus ah. Marna kama qaadi kartin qudduusnaatiisa oo lama tegi kartid. Oo haddii aabad awood u yeelatid, aadanahow maabad dayseen, mabase ku dhacdid waayo Isagu waa qudduus.

Waa sababtan marka ay culimada ku xeel dheer cilmiga barashada Ilaah ay u yidhaahdaan in uu yahay ahaade aan la ahaysiin karin ereyga 'ahaade'. Ilaah ma ah mid walxo ka booban ama loo nisbayn karo. Booggeennan qaybihiisa dambe ayaan ku arki doonnaa wax ku saabsan Aabbaha, Wiilka iyo Ruuxa Qudduuska ah oo ah ahaanshiyo hal ahaansho isku ah. Kama wadno in aan dhahayno in uu yahay sidii tibxo la is raacinayo. Waxa aan ka wadnaa in uu yahay ahaanshooyin cayiman oo isla halkii ahaansho isku ah. **Ilaah waa ahaade ah Aabbaha. Ilaah waa ahaade ah Wiilka, Ilaah waa aheade ah Ruuxa Qudduuska ah, oo isla ahaanshooyinku waa isla ahaanshaha ah Ilaah.** Dhammaan waa isla hal ahaade. Welise ogoow Ilaah lama kala qaadi karo. Si kale haddii aan u nidhaahno si aan u adkaynno arrintan. Ilaaha Aabbaha ahu waa Yahweh. Wiilku waa Yahweh. Ruuxa Qudduuska ahu waa Yahweh. Ha ahaatee, waa in aynaan marnaba ku fikirin in ay jiraan saddex Yahweh. Waa in aynaan hor dhicin weynaanta iyo awoodda Ilaah maaddaama uu yahay wax walba kare oo uu yahay Yahweh ah mid qudha.

**Ilaah Mid ka Badan Midna ah**

Sidii ay horraantiiba ahayd, waa in aan ogaannaa in Yahweh ahaa mid hal ka badan. Ogsoonow waxa aan sheegaynno. Ilaah mooyee Ilaah kale ma jiro. Taas waan soo aragnay. Welise waxaa jira mid hal ka badan oo *ah* Ilaah. Waxaa jira Ilaah qudha. Oo maaddaama uu yahay ahaade, waa ahaanshooyin hal ahaansho isku ah.

Tan dabcan waxa aad ku akhrin kartaa, cutubka ugu horreeya ee Kitaabka Qudduuska ama Baybalka. Bilowgii 1:26-27, haddii aan akhrinana waxa qoran. 'Ilaahna wuxuu yidhi, *Aan* nin inoo eg ka samayno *araggeenna*, oo iyagu ha xukumeen kalluunka badda, iyo haadda hawada, iyo xoolaha, iyo dhulka oo dhan, iyo waxa dhulka gurguurta oo dhan. … Oo Ilaah nin buu ka abuuray *araggiisa*, Ilaah araggiisa ayuu ka abuuray isaga; lab iyo dhaddig ayuu abuuray. ' Ereyada aan u qoray qaabka jiiftada aha waxa ay tusinayaan mid ahaanshaha Ilaah, kuwaasoo haddana ka hadlaya wax mid ka badan. Dhowr bog kadibna waxa aan ka akhrin karnaa, 'Oo Rabbiga Ilaah ahuna wuxuu yidhi,"Ninku wuxuu noqday sidii mid *innaga* mid ah…"' (Bilowgii 3:22); cutubka 11:5-7 na waxa aan ka akhrin karnaa 'Rabbiguna wuxuu u soo degay… Oo Rabbigu wuxuu yidhi… Ina keena, *aynu* degnee…' Aayadhan oo dhan hal Ilaah oo qudha ayaannu ku dhex arkaynaa. Haddana sidii jamac/wadar oo kale ayuu u hadlayaa! Waxaa haddaba jira mid hal ka badan oo ah Ilaah. Waa taas sababta qarniyo badan kaddib Ishacyaah u maqlay Yahweh oo leh, '*Yaan diraa*? Yaase *noo* tegaya?' (Ishacyaah 6:8).

Si la mid ah sida qoraalladan Axdigii Hore aysan caadiga u ahayn marka laga hadlayo malaa'igta Rabbiga ayaan waxaa dareemaynaa in ahaanshooyinkan aan soo aragnay ay yihiin Ilaah qudhiisa. Waa taas midda uu uga duwan tahay Ilaah. Ereyga 'malag' macnihiisu waxaa weeye 'farriin wade' ama 'mid la diray', oo weedha 'malaa'igta Rabbiga' micnaheedu waxaa weeye 'kii uu Yahweh diray'. (Bilowgii 16:7-13) waxaa ku diwaan gashan sidii 'malaa'igtii Rabbigu' ay ugu amartay in ay dib u noqoto Haagaar oo ka caratay Ibraahim iyo Saarah.

Taas ayaa noo caddaynaysa in uu ahaa Rabbiga kan la hadlayey iyada oo meeshii ay kula kulantay waxa ay u bixisay ‘ceelka Midka nool ee i arka’. Kan Isaga soo diray waa Ilaah qudhiisa oo Isa soo diray! Ibraahim qudhiisa waxaa soo booqatay malaa’igtii Rabbiga sida ku xusan (Bilowgii 18). Booqduhu waxa uu lahaa sidii suurad qofeed (aayadda. 2) waxaase caddayntu tahay in uu ahaa Rabbiga qudhiisa, (aayadaha. 13-14). Ibraahim middan waa uu aqbalay oo waa uu baryey (aayadaha. 23-33).
Markani ma uusan ahayn waqtigii ugu dambeeyay ee uu Ibraahim la kulmi lahaa malaa’igtii Rabbiga. Waxa ay ahayd malaa’igtii Rabbiga, tii ka joojisay in uu wiilkiisa Isxaaq gawraco (Biloowgii 22:11, 15). Ibraahim waxa uu meeshaa u bxiyey ‘Rabbiga ayaa lagu arki doonaa’ (aayadda. 14), oo waxa uu tan ku qirayaa sida xagga samada looga soo booqday. Malaa’igtu ballanqaad ayey siisay ku bilaabmaya ‘Rabbigu wuxuu yihdhi, nafsaddayda ku dhaartay… ’ (aayadda. 16). Kan Rabbigu soo diray ayaa ah Rabbiga qudhiisa!
Waxaa jira tixraacyo badan oo ku jira Axdiga Hore oo ku saabsan Malagga, waa wax bayaan ah in farriimiyaha imaanayey uu *yahay* Ilaah naf ahaantiisa. Waa ‘malaa’igtii Rabbiga tan Muuse kala hadlaysa kaynta aan gubanayn, ee ku leh, ‘Anigu waxaan ahay Ilaahii aabbahaa’ Baxniintii 3:6), oo Isaga oo la sii hadlaya ku yihdi ‘ANIGU WAXAAN AHAY KAAN AHAY’ (aayadda. 14). Malaggu waa Rabbiga kan yacquub hoggaamiyey ee madax furtay (Bilowgii 48:15-16), oo waa Isaga kii dadka reer binu Israa’iil hor kacayey markii ay Masar ka soo baxeen (Baxniintii13:21; 14:19). Waa Maa’igta Rabbiga tan labo jeer ka dhex muuqata kitaabka Xaakinnada, oo ismuujitaasu ay tahay Ilaah qudhiisa (Xaakinnadii 6:11-12,14,16; 13:3.9.22). haddaba, side baa Ilaah qudhiisu isu soo diraa!?

Wax sii sheegiddii Ishacyaah waxa ay muujinaysaa sidaas oo kale. Waxa uu dadka reer binu Israa’iil u sheegay in Rabbiga Ilaaha ahu uu siinayo calaamo, ah in wiil uu ka dhalam doonay gabadh bikrad ah. Magaciisuna noqon doonay Cimaamuweel, oo macnaheedu yahay ‘Ilaah baa nala jira’ (Ishacyaah 7:14). Kan Ilaah soo diri doonay waxa uu ahaan doonay ‘Ilaaha Qaaddirka ah’ (Ishacyaah 9:6). Sidee baa Ilaah u soo diri doonay Ilaah haddii Isaga oo ah ahaadaha uusan Isaga oo ah Ilaah ahaanshooyin u ahayn? Waa in aynaan illaawin aayadihii aan soo sheegnay eek u jiray kitaabka Ishacyaah. Isla kitaabku waxa uu nagu adkaynayaa in uusan jidhin Ilaah kale Ilaah oo keliya mooyaane oo ah kan ay reer binu Israa’iil caabudayeen. Hal Ilaah oo ku sifoobay ahaanshooyin dhowr ah.

Waa taas waxa uu Axdiga Hore inoogu sheegayo in uu Isagu isa subkid Isag subko (Sabuurrada 45:6-7); Ilaah iyo Ruuxiisu waxa ay soo dirayeen mid isla iyaga ah (Ishacyaah 48:16-17); oo Yahweh waxa uu sare kiciyey Boqor la ballan qaaday oo isla Yahweh ah (Yeremyaah 23:5-6)! Haddana waxaa mar iyo marba na soo wajahaysa runta weyn ee ah in Ilaaha halka ahu uu hal ka badan yahay, taasuna waa weynaantiisa.
Tan kama wadno in caqiidada Saddexmidnimada gebi ahaanba lagu dhex muujiyey Axdigii Hore, mana aha in aynu ka wadno in ay ka wada maqan tahay. Rumaystayaashii Axdigii Hore waa ay garanayeen in Ilaaha qaaddirka ahu uu naf ahaantiisa saddex ahaansho u leeyahay. Oo Isaga ayaa isu sheegay inuu saddexmidnimo leeyahay Isaga oo hal Ilaah ah. Marka uu wadaadku doonayo inuu barakadeeyo dadka reer binu Israa’iil, oo uu rabo inuu magaca Ilaah dushooda saaro, Miyuusa magaca Yahweh saddex jeer ku dhawaaqi jidhin. (Tirintii 6:22-27)? Oo miyuusan Ishacyaah sheegin in Seraafiim-tu ay saddex jeer Ilaah ku

tilmaantay in uu yahay qudduus (Ishacyaah 6:3)? Tani waxa ay hordhac u ahayd wixii uu Axdiga Cusubi si kaamil ah inoogu sheegi lahaa. **Ilaahii Axdigii Hore dhexdiisa sida tartiibta leh isugu kayo barayey ayaa kama dambaystii Wiilkiisii dunida u soo diray, oo markii dambana Ruuxiisa Qudduuska ah kula shubay rumaystayaasha qalbiyadooda.** Caqiidada Saddexmidnimada ma aha mid lagu qeexay qoraallo jumlado ah oo is daba joog ah, ama meeleeye. Waxa ay ahayd shaqada Ilaah ee badbaadada, taasoo uu markii dambe uu si cad u bayaaniyey. Rumaystaha Masiixiga ah marka uu Axdigii Hore akhriyo, waa uu kaga fahan badan yahay marka loo eego akhristayaashii asalka ahaa. Qoraallada ka hadlaya in Ilaah hal yahay ku sifoobay saddex ahaansho waa kuwo aad muhiim ugu ah fahanka kan Ilaah yahay. Marka qofku akhriyo kuma wareerayo balse toos ayuu u fahmayaa marka uu aayadahaas akhriyo. Qofku lama yaabayo marka uu Ilaah oo wada hadal isla leh, ama uu arko in Ilaah Isaga qudhiisu uu dunida Isu soo diri doonay. Weli haddana waxa uusan qofku aad u dhuuxi karin ayaa ah in Ilaah yahay Mid Saddex ah, haddana Saddex Mid ah. Haddana eeg waa uu og yahay in ay saas tahay. Rumaystayaasha Axdigii Hore wax baa u yara baxsanaa, balse sida dhabta ah runtan uma aysan taaban. Waxa iyaga mugdiga ku ahaa waa waxa hadda innaga inoo iftiimaya.

**3. Aabbuhu waa Ilaah**
Iminka waxaan bilaabaynaa cutubka 3aad, balse waxaan ku qasbanahay in aan wax ka idhaahno cutubka 4aad. Cutubka 4aad, waxa aan ku arki doonnaa in Rabbi Ciise Masiix uu yahay Ilaah. Haddana markii xertiisa barayey sida loo tukado, ma uusan barin in ay *Isaga* u tukadaan. Waxa uu ku yidhi 'Haddaba sidatan u tukada, Aabbahayaga…' (Matayos 6:9). Ma ahan in baryada Ilaah lagu aaddiyo Ciise Masiix, balse kan kaga toosan oo ah—Aabbaha! Waxaa jira mid hal Ilaah ah, oo aan ahayn Ciise Masiix, oo uu u ahaaday magaca 'Aabbaha'. Balse annaga oo aan aad u sii dhex galayn Qorniinku had iyo goor isku si uma adeegsado magaca 'Aabbaha'.

**Kan Dhamaan Aabbaha inoo ah**
Mararka qaar 'Aabbaha' waxaa loo adeegsadaa Ilaaha Aabbaha ah, oo aan ahayn Wiilka iyo Ruuxa Qudduuska ah. Isaga oo sadex ahaanshii mid ku ah.
Tan aan tusaale ka bixinno. Marka uu rasuul Bawlos uu Masiixiyiinta reer Korintos wax u qorayey waxa uu xusuusniayey dhammaan sanamyada ku wareegsani ay ilaahyo run ah ahayn. Waxa kuwa caabudayaa ay ku fakarayaan ma ahan middan, laakiin waa xaqiiqo meesha taal. Sanamku uma taagna mana geli karo booska Ilaah iyo jiritaankiisa. Waxaa jira hal Ilaah oo qudha oo jiritaankuu run yahay, waana midka ay masiixiyiintu caabudaan. Haddaba waxa uu u qoray 'innagu waxaynu leennahay Ilaah keliya oo Aabbaha ah' (1 Korintos 8:6). Halkan ereyga 'Aabbaha' waxa uu la mid yahay ama la siman yahay ereyga 'hal Ilaah'. Bawlos waxa uu qeexayaa in uusan jirin, hal Ilaah oo qudha mooyaane, oo ah Ilaaha Aabbaha ah. Sidoo kale ereyga 'Aabbe ' waxa uu ku dhex adeegsaday Efesos 4:6, halkaasoo uu ku leeyahay 'Ilaah keliya oo kulli Aabbe u ah'.

Qoraaga kitaabka Cibraaniyada sidaas si la mid ayuu ku qorayaa cutubka 12aad aayadda 9aad. Halkaas waxa uu ku sheegayaa in Ilaah uu Masiixiyiinta ula dhaqmo sidii carruurtiisa oo kale, waana sababta uu masiixiyiinta u geliyo mararka qaar nolol aan farxad gelin si uu dabeecadahooda wanaag ugu hor mariyo. Dabeecadahani ma aha kuwo dib loo hagaajinayo ama la saxayo balse waa kuwo ay tahay in sida ay yihiin loo food saaro oo lagu aqbalo. Ma aha kuwo hoos inooga dhigaya heerka darajo een Ilaah u ahayno balse waa kuwo sare noo qaadaya. 'Waxaannu lahayn aabbayaal xagga jidhka ah oo na sixi jiray, oo waan xushmayn jirnay. Haddaba intee in ka badan ayuu naga doonayaa in aan u ahaanno Aabbaha ruuxda iyo nafta?' mar kale magaca 'Aabbaha' waxa uu sife u yahay Ilaah, balse ma aha mid ka baxsan ahaanshihiisa. Xaqiiq tani waa sida uu Yacquub u adeegsaday marka uu qoray 'Hadiyad kasta oo wanaagsan iyo hibo kasta oo kaamil ah kor bay ka timaadaa iyadoo ka soo degaysa xagga Aabbaha nuurarka' (Yacquub 1:17).

**Aabbaha Reer Binu Isrsaa'iil**
Magaca 'Aabbe' waxaa sidoo kale loo adeegsaday in lagu qeexo xaqiiqada ah in dadkii reer binu Israa'iil ee Axdigii Hore uu Ilaah u ahaa hoggaamiyahooda iyo Madaxooda. 'Rabbigu… Isagu sow ma aha Aabbihiinnii idin soo iibsaday?' (Sharciga Ku Noqoshadiisa 32:6). 'Aabbe' waxa uu u taagan yahay ereyga ama magaca Ilaah, isaga oo aan ka baxsanayn ahaanshihiisa saddex ahaansho. Ishacyaah waxa uu ku ducaystay 'Rabbiyow, waxaad tahay aabbahayaga; Bixiyahayaga…; Laakiinse haatan, Rabbiyow, waxaad tahay Aabbahayaga. Annagu waxaannu nahay dhoobadii, oo adiguna dheryasameeyahayaga baad tahay, oo annana kulligayo shuqulkii gacantaada baannu nahay' (Ishacyaah 63:16; 64:8).

Axdigii Hore dhexdiisadadka reer binu Israa'iil dhammaantood Ilaah kalsooni kuma wada qabin. Haddaba waqtigii Yeremyaah, waxaa iyaga Ilaah ku yidhi Isaga oo nebiga u soo marinaya, 'Haatan sow iguma qayshaan, Aabbahayow, adigu waxaad tahay saaxiibkii yaraantaydii?' (Yeremyaah 3:4). Wixii intaas ka dambeeyay mid kasta oo reer binu Israa;iil ah waxa uu Ilaah ku sheegi jiray in uu yahay quruunta Aabbahood hase ahaatee tan si ficil ahaan ah uma uusan fulin jirin. Cisada Ilaah ka mudan yahay ma aysan siin jirin, iyaguna sidii walaalo oo kale iskulama macaamili jirin.  Xilligan canaantu waxa ay ahayd: 'haddaba haddii aan aabbe ahay, meeday murwaddaydii?... Miyaynan kulligeen isku aabbe ahayn? Sow isku Ilaah inama uumin? Bal maxaa ninkeen kastaaba walaalkiis u khiyaaneeyaa….?' (Malaakii 1:6; 2:10).

**Aabbaha Rumaystayaasha**
Haddaba markii uu Sayid Ciise Masiix yimid, Yuhuuddu waxa ay isticmaalayeen magaca 'Aabbe' oo u taagan ereyga 'Ilaah'. Waxa ay is barayeen in iyaga oo qudha uu Ilaah yahay aabbahood. Tani waxa ay ahayd fikradda Ciise masiix iyo xertiisu ay doonayeen in ay iyaga ka saxaan. Ma aha in aadanaha oo dhan ay wada noqonayaan carruurta Ilaah, ama Yuhuudda, tani waxa ay fursad u tahay dadka isku qaas yeela ee tawbad keena ee rumaysta Injiilka. Waxa ay iyagu ku raaxaysanayaan xidhiidhka ku dhow ee ay Ilaah la yeelanayaan iyo daryeelkiisa gaarka ah. Dadkani ma aha Yuhuudda, ee waa dadka reer binu Israa'iil ee Ilaah qaatay, kuwa uu ugu yeedhay in uu u yahay 'Aabbaha'.

Ciise Masiix xertiisa oo qudha ayey ahaayeen kuwii uu ku magacaabay isaga oo dhaha 'Aabbihiinna jannada ku jira' (Matayos 5:45). Waa iyaga oo qudha kuwa uu ku yidhi, 'Aabbahaaga… Aabbihiin… Aabbihiinna jannada ku jira' (Matayos 6:6, 8, 14). 'inaynu innagu nahay carruurta Ilaah' waxaa loo qoray oo keliya kuwa Ilaah hortiisa ku qumman xagga iimaanka rumaysadkoosa Sayid Ciise Masiix. In ay qoyska carruurta Ilaah noqdaan, oo iyaga Aabbe u noqdo, ayaa ah ahmiyaddooda ugu sarraysa. Oo uu kooda oo qudha ahaado. Tan cid iyaga la wadaagaysa ma laha. Iyaga oo qudha ayaa si gaar ah ugu raaxaysanaya,iyaga oo odhanaya, 'Bal ogaada siduu yahay jacaylka Aabbuhu ina siiyey, taasoo ah in laynoogu yeedho carruurta Ilaah'. (1 Yooxanaa 3:1).

**Aabbaha Sayid Ciise Masiix**
Markan Sayid Ciise Masiix waa Ilaah, tanna si kooban yaannu u arki doonnaa. Balse in kasta oo ay Masiixiyiintu u arkaan Ilaah in uu yahay Aabbahood, ma aha Ciise Masiix kan Aabbaha ahu. Ilaaha Aabbaha ahu waa ka gooni Isaga. Aabbaha rumaystayaashu waa Aabbaha Ciise Masiix, in kastoo qaabku kala duwan yahay. Carruurta Masiixiyiinta ahu waa kuwo la korsad ah, balse Ciise Masiix waa Wiilka daa'imiska ah. Maxaya ahayd sababtii uu Ciise ugu yidhi Maryan 'Waxaan kor ugu tegayaa Aabbahay oo ah Aabbihiin?' (Yooxanaa 20:17). Sababtee ayuu u dhihi waayay, 'Waxaan u tegayaa *Aabbaheen?*' Waxa uu hadalku na tusayaa in Ilaah kulligeen Aabbe inoo wada yahay. Laakiin tixraacu waxa uu inoo sheegayaa in uusan Aabbe inoogu ahayn si la mid ah sida uu Masiixa Aabbe ugu yahay.

Injiilka Yooxanaa ayaannu ku arkaynaa in Aabbuhu yahay Ilaah, Sayid Ciise Masiix na uu yahay Ilaah, oo ay sidaas yihiin sinnaana aysan u kala duwanayn. Marka ahaanshaha Ilaah laga hadlayo, midi Aabbe ayuu kuwa kale u yahay, midna waa wiilka kuwo kale. Bilowga Injiilka Yooxanaa ayaan waxaan ka akhrin karnaa, 'Ereyguna jidh buu noqday, oo waa ina dhex joogay, oo waxaannu aragnay ammaantiisii, taas oo ahayd ammaantii u ekayd tan Wiilka keliya ee Aabbaha, ee nimco iyo run ka buuxa' (Yooxanaa 1:14). Tani waxa ay inoo sheegaysaa in Ereyga, oo ah Ciise Masiix, ay qaab kala suuraysan leeyihiin, midi jidh ahaan buu ku muuqday midina kuma uusan muuqan. Haddana ammaanta Masiixu waa ammaanta Aabbaha, oo sidaas haddana waxa ay isku yihiin hal Ilaah. **Masiixu waa muujinta runta ah ee Aabbaha—taasoo uu Yooxanaa middan ula jeedo marka uu Isaga ku qeexayo inuu yahay 'Ereyga'.**

Dabcan aan akhrinno 'Ninna ma arkin Ilaah marnaba, Wiilka keliya oo laabta Aabbaha ku jira mooyaane, kaasaa inoo sheegay' (Yooxanaa 1:18). Ha yeeshee waxa aan og nahay in ay jiraan dad arkay Ilaah sidii aan cutubkeenni hore ku soo aragnay! Waxa ay aayaddu ka hadlayso ayaa waxa ay tahay in uusan jirin qof arkin Aabbaha. Haddii ay jirto cid Ilaah aragtay waxaa arkay Sayid Ciise Masiix, Isagu waa kii lahaa 'malaa'igtii Rabbiga'. Wiilku waa ka duwan yahay Aabbaha, waana taas tan loo qeexay in uu fadhiyo 'midigta Aabbaha'.

Haddaba in Isaga la arkaa waxa ay ka dhigan tahay iyada oo la arkay Ilaah, maaddaama oo uu si cad u qeexayo ahaanshaha Ilaah. Wadartoodu waa Ilaah. Balse midina ma aha midka kale. Isku ahaantooduna waa Ilaaha runta ah ee nool. Yeynaan u malayn in aan wax seegnay, haddii aan arki waynay Ilaaha Aabbaha ah. Ciise ayaa dunida dhexdeedea kaga dhawaaqay si bayaan ah 'Aniga iyo Aabbuhu mid baannu nahay' (Yooxanaa 10:30); 'Kii i arkaana, wuxuu arkaa kan i soo diray' (Yooxanaa 12:45); 'Kii i arkay wuxuu arkay Aabbaha. Sidee baad u leedahay, Aabbaha na tus?' (Yooxanaa 14:9).

Markii uu Ciise ku dhawaaqay in uu xidhiidh ku dhow la leeyahay Ilaaha Aabbaha ah, Yuhuuddii waxa ay durbadiiba bilaabeen in ay tahay inla dilo Isaga (Yooxanaa 5:17-31). Ma jirto cid ka murantay in Aabbuhu yahay Ilaah. Weligeed wax su'aal ah lagama keenin. Laakiin hadalka Ciise waxa uu si toos ah u tilaamayaa in uu yahay mid sinnaansho la wadaaga Ilaah. Iyagu waxa ay garanayeen oo qudha in uu jiray hal Ilaah, oo uu Aabbuhu uu ahaa Ilaahaas. Sida Axdigii Hore inoo carrabbaabayo een soo aragnay, iyagu ma qaadan

kadhin in Ilaah ahaansho kale la iman karo in uu yahay Aabbaha mooyaane. Waxa ay u qateen in uu tan ula jeedo in uu ka wado in uu yahay Ilaah kale oo dheeraad ah. Iyaga tani waxa ay u ahayd meel kadhac, tanina waxa ay kuu caddaynaysaa sidii ay u doonayeen in ay dilaan Isaga. Waxa ay tan ku xidheen in Isaga qudhiisu uu sheeganayo Ilaaha Aabbaha ah oo uu qaab Ilaahnimo kale isu tilmaamayo (Yooxanaa 8: 53-59). Tan labaad ayey ku qaldameen sida aan imminka arki doonno. Laakiin tii koowaad ku ayaan xumayn.

**4. Sayid Ciise Masiix, oo ah Wiilka, ahna Ilaah**

Qorniinka waxaa ka buuxa caddayno badan oo qeexaya in Ciise Masiix yahay Ilaah. Waa wax run ah oo ay tahay in aysan cidina ka murmin karin.

**Hore ayuu u jiray**

Dhamaan rag iyo dumar wixii dunidan soo maray, Ciise Masiix oo qudha ayaa laga sheegay in aysan noloshiisu bilaaban markii uu dhashay. Waqtigaas ka hor ayuu sii jiray. Isagu bilowgii ayuu jiray, oo wax walba Isaga ayaa lagu abuuray (Yooxanaa 1:1-3); (Kolosay 1:15-18). Waxa uu ahaa mid qani ah intii uusan saboolka noqon (2 Korintos 8:9). ‘Aabbaha ayaan ka imid oo dunida imid’ (Yooxanaa 16:28). Isaga qudhiisa ayaa qiray in uu yahay kan samada ka yimid oo yidhi, ‘Aabbaha ayaan ka imid oo dunida imid’ (Yooxanaa 3:13), oo kuwii maqlayey ayuu weddiiyay wixii ay jeclaan lahaayeen haddii ay arkaan Isaga ‘Wiilka Aadanaha oo kor ugu baxaya meeshuu markii hore joogi jiray’ (Yooxanaa 6:62).

Waxa uu si cad inoogu muujinayey in aan fahanno in uu yahay Ilaah, oo sidii suurad aadane inoogu yimid. Muxuu kaloo ula jeeday markii uu ku ducaysanayey Isaga oo xertiisii la jooga ‘Aabbow, adiga qudhaadu igu ammaan ammaantaan kula lahaa intaan dunidu jirin’ (Yooxanaa 17:5)? In uu Ilaah yahay waxa ay Yuhuuddu qireen markii ay bilaabeen in ay dhagxiyaan, kolkii uu yidh ‘Intaan Ibraahim jirin anaa ah’ (Yooxanaa 8:58). Haddii uu yidhi ‘Intaan Ibraahim jirin anaa ah’ ma aysan ahayn wax xun. Isagu waxa uu yidhi ayaa ah, ‘anaa ah’. Ahaantiisu ma ahan mid xadaysan, ee waxaa weeye, mid u ahaan jirtay Ibraahim hortii, jirta, jiri doonta. Miyuusan Ilaah qudhiisu isu tilaamin ‘Waan ahay’? Maxaa kaloo Ciise Masiix odhan lahaa, haddii uusan middan odhan si uu u caddeeyo sifihiisa Ilaahnimo? Yuhuuddu taas waa ay ka soo hor jeesteen, balse waxa ay u qaateen arrin gef ah oo dhagxan ayey la boodeen.

**Magacyada iyo Derajada**

Intii uu ciise bilaabin adeeggiisii caamka ahaa, waxa dhacay wacdigii lasii sheegay ee Yooxaanaa Baabtiisaha. Waxa uu sheegay in ay timid oofintii wax sii sheegiddii Ishacyaah 40:3: ‘mid qaylinaya codkiis oo leh, Jidkii Rabbiga cidlada dhexdiisa ka hagaajiya, oo lamadegaanka dhexdiisa jid weyn Ilaahayaga aawadiis uga toosiya.’
Dhulkaa bariga waxaa xilligaas laga yiqiin in qofka muhiimka ah inta uusan wadada soo madhin ka hor jidka loo sii xaadho oo wax uu ku turnturroodo laga ilaaliyo, iyada oo darajadiisa iyo sharaftiisa la dhawrayo! Yooxanaa Baabtiisuhu waxa uu sheegay in midka isaga ka daba imanaya ee soosocdaa uu yahay Yahweh qudhiisa. Waa Ilaah (Yooxnaa 1:23). Middan hoosta ayuu ka xarriiqay isaga oo leh ‘Kan iga daba imanayaa waa iga horreeyey,

waayo, hortay buu jiray' (Yooxanaa 1:15). Markii Ciise Yimid Webi Urdun waxa uu toos u caddeeyay in uu yahay kii uu ka hadlayey in uu imanayo (Yooxanaa 1:29-30). Ciise waa Yahweh-gii la sii ballan qaaday! Ciise waa Ilaah! Welise darajada uu Yooxanaa siiyey midka la sii ballan qaaday waxa uu ahaa 'Wanka Ilaah', iyo 'wiilka Ilaah' (Yooxanaa 1:29, 34). Wiilka Ilaah waa Ilaah. Laakiin Wiilku ma aha Aabbaha, saa markii Yooxanaa Ciise baabtiisayey cid ayaa samada ka ciyey, kaasoo leh, 'Adigu waxaad tahay Wiilkayga aan jeclahay; ee waan kugu faraxsanahay' (Luukos 3:22).

Yuhuuddu aad ayey u fahansanaayeen in magaca 'wiilka Ilaah' uu ahaa magac uu Ilaah leeyahay. Markii Ciise xukunka u istaagay intii aan la qodbin ka hor, wadaadkii sare ayaa weyddiiyay: 'Ilaaha nool ayaan kugu dhaarinayaa ee noo sheeg inaad tahay Masiixa oo ah Wiilka Ilaah, iyo in kale' (Matayos 26:63). Ciise waa u qiray in tani ay run tahay. Matayos ayaa inoo sheegaya waxa tan sii raaca: 'Markaasaa wadaadkii sare dharkiisii jeexjeexay isagoo leh, Wuu caytamay. Maxaynu markhaatiyaal weli ugu baahan nahay?

Bal eega, haddeer waad maqasheen caytanka' (Matayos 26:65). Waxaa ka dhaadhacday in Ciise ku hadlayao wax caytan ah, maxaa yeelay waxa uu u qaatay in magaca Wiilka Ilaah uu yahay mid sida tan aadanaha oo kale ah. Dabcan tani caytan maysan ahayn balse waxa ay ahayd wax run ah. Wadaadka sare iyo shirka Yuhuudduba maysan rumaysan. Xertu waa ay rumaysteen! Magaciisa wataa ammaanta runta ayaa qalbigooda ku dhegay oo ka iftiimay muddo labo illaa saddex sano ka hor ah intii aan waq ayaa qalbigooda ku dhegay oo ka iftiimay muddo labo illaa saddex sano ka hor ah intii aan waqtiga laba soo gaadhin. Butros isga oo xerta oo dhan u haldaya ayaa waxa uu yidhi, 'Waxaad tahay Masiixa ah Wiilka Ilaaha nool' (Mataos 16:16); 'Adigaa haya erayadii nolosha weligeed ahe. Annaguna waa rumaysannay, waana ognahay inaad tahay Kan Quduuska ah ee Ilaah' (Yooxanaa 6:68-69). Sidoo kale markii Bawlos uu Masiixa rumaystay, 'markiiba sunagogyada dhexdooda ayuu dadka kaga dhex wacdiyey Ciise inuu yahay Wiilka Ilaah' (falimaha Rasuullada 9:20). Waxa uu aad ugu farxay oo uu ku dhawaaqay in uu yahay 'Ilaah wiilkiisa' (Rooma 8:3).

Yooxanaa sidaas oo kale ayuu u sheegay. Waxa uu inoo sheegayaa in ammaanta uu arkay Ciise noloshiisa ay ahayd ammaanta Ilaah Wiilkiisa keliya (Yooxanaa 1:14). Isagu Ilaah ayuu la jiray bilowgii (Yooxanaa 1:1-2). Isagu waa 'Ereygii'la jirayIlaah bilowgii (Yooxanaa 1:12).

Isagu Ilaah lama uusan jirin oo qudha bilowgiiye 'Ereygu waxa uu ahaa Ilaah' (Yooxanaa 1:1). Yooxanaa waxa uu si adag noogu caddaynayaa Ilaahnimada Masiixa. Ammaanta Yahweh ee uu Ishacyaah sii sheegay 700 oo sanno Ciise Ka hor ayaa waxa ay tahay mid aanay cid kale muujin karin oo aanay muujin Masiixa mooyaane (Ishacyaah 6; Yooxanaa 12:39-41). Waxa Yooxanaa uu u qoray injiilkan ayaa waxa ay tahay in uu ina tusiyo 'inuu Ciise yahay Masiixa, Wiilka Ilaah' (Yooxanaa 20:31).

Wiilka Ilaah waa Ilaah qudhiisa. Ereyga 'Rabbi' oo Isaga mar walba loo soo qaato ayaa inoo muujinaya kan uu yahay. Markii Axdigii Hore lagu tarjumay Giriigga, ereyga *Kyrios* ayuu ahaa kii lagu tarjumay magaca 'Yahweh'. Axdiga Cusub waxaa lagu qoray afka Giriigga. Magaca *kyrios ee* loo adeegsaday Yahweh waa kan loo isticmaalay ee lagu tarjumay 'Yahweh' oo ah af Ingiriisi ahaan 'Lord' ama af Soomaali ahaan 'Rabbi'. Ereyga loo isticmaalay Yahweh waa kan loo isticmaalay ee lagu magacaabay Ciise Masiix! Marka layaab nagu noqon mayso haddii aan Ciise masiix ku tilmaanno in uu yahay Ilaah. Qoraaga kitaabka Cibraaniyada waxa uu tilmaamayaa in 'Carshigaagu, Ilaahow, waa weligiis iyo weligiis' '(Sabuurrada 45:6-7; Cibraaniyada 1:8). Tani waa qayb ka mid ah qoraallada ay adeegsadeen qoraayaasha Axdiga Cusub ee tilmaamaya in Ciise ku sifoobay in uu yahay Yahweh. Haddii aan middan aad ugu dhabbo galnana waxaa noo soo baxaysa in Masiixu yahay 'Ilaah': Tirintii 21:5-6 iyo 1 Korintos 10:9; 'Ilaahayow … adigu isku si uun baad tahay had iyo goorba, Oo sannadahaaguna ma idlaan doonaan' (Sabuurrada 102:24-27;

Cibraaniyada 1:10-12); 'Boqorka ah Rabbiga ciidammada' (Ishacyaah 6:1-10; Yooxanaa 12:39-41); 'Rabbiga ciidammada' (Ishacyaah 8:13-14; Rooma 9:33); 'Ilaaha Qaaddirka ah' (Ishacyaah 9:1-6; Matayos 4:14-16); iyo 'Rabbiga' (Malaakii 3:1; Matayos 11:10).
Waa isla xididkaase Bawlos kama uusan xishoon in uu Ciise ugu yeedho 'kan wax walba ka sarreeya' (Rooma 9:5). Iyo tan kale oo ah 'ammaanta Ilaaheenna weyn oo ah Badbaadiyeheenna' (Tiitos 2:14). Tan waxaa u sii raaca caddaynta Ilaanimadiisa, 'sida nimcada Ilaaheenna iyo Rabbi Ciise Masiix ay tahay' (1 Tesaloniika 2:12). Kaniisadd uu noo sheegayaa waa mid 'dhiiggiisa ku dhisantay' (Falimaha Rasuullada 20:28). Waxa uu illaa iyo intaa u socoanayaa in uu cadeeyo in ahaanshaha Ilaah uu ku dhex kaamilan yahay Rabbi Ciise Masiix. Waa halkan meesha xoogga ereygii Giriigga ahaa een soo sheegnay aad xoog ugu arkaysid sida ku xusan Kolosay 2:9, 'isagoo ah madaxa taaliye kasta iyo amar kasta.' Cid kasta oo maanta ka shakiyi lahayd iyo tii kaleba waa wax ay rasuulladii inoo sheegeen oo ay tahay in aan qaadanno! **Wiilku ma aha Aabbaha, balse Wiilku waa Ilaah. Waxa mid la mid ah sida Aabbuhu Ilaah u yahay.**
Nin ku doodaya Ilaanimada Masiixa ayaa mar waxa uu yidhi, 'Haddii ay run ahayd, hadal qeexan oo dac ayaa ku sheegi lahaa.' Saaxiibkiis ayaa ku jawaabay, 'haddii aad adigu rumayn lahayd oo aad raaci lahayd, ereyo caynkee ah ayaad ku muujin lahayd?' 'Waxaan odhan lahaa' ayaa ninkii doodayey ku jawaabay. 'Ciise Masiix waa Ilaaha *RUNTA* ah.' Saaxiibkiis ayaa ufu jawaabay 'Waxa aad haleeshay dulucda runta ah ee Qorniinka.' Yooxanaa waxa uu leeyahay isaga oo ka hadlaya Wiilka, 'Kanu waa Ilaaha runta ah iyo nolosha weligeed ah' (1 Yooxanaa 5:20).

**Tilmaamaha Ilaah:-**
Markii Ciise la arkay waxaa isla markii loogu yeedhay in uu yahay Ilaah, oo nagama yaabinayso haddii aan aragno in dabeecadaha Ilaah leeyahay uu Isaguna yeeshay. Tusaale ahaan, Ishacyaah 44:6 waxa aan arkaynaa Yahweh oo odhanaya, 'Anigu waxaan ahay kan ugu horreeyey iyo kan ugu dambeeya.' Haddana Muujintii dhexdiieda waxa uu Ciise Masiix odhanayaa, 'Anigu waxaan ahay Alfa iyo Oomeega, kan ugu horreeyey iyo kan ugu dambeeya, bilowgii iyo dhammaadka' (Muujintii 22:13). Yahweh waa daa'im; Ciise waa daa'im. Si toos ah ayuu Ciise u yahay Yahweh; isagu waa Ilaah.
Sidaas oo kale waxa aan og nahay in Ilaah yahay mid aan la beddeli karin (Malaakii 3:6) sidaas oo ay tahay rumaystaha waxaa raaxo u ah in uu og yahay Wiilka Ilaah uu yahay 'Ciise Masiix … isku mid shalay iyo maanta iyo weligiiba' (Cibraaniyada 13:8). Ilaah meel kasta ayuu joogaa, oo sidii aan soo aragnay haddii aan u dhaqaano in aan adduunka oo dhan Injiilka ku faafinno, waxaa qalbiyadeenna a buuxamaya sidii uu Ciise Masiix nagu yidhi oo ahayd 'had iyo goor ayaan idinla joogaa' (Matayos 28:20). Xaadirnimadiisa uu meel kasta ku joogo waxaa daliil u ah ballankiisii ahaa, haddii labo ay magaciisa daraaddiis isugu timaaddo uu halkaas joogayo (Matayos 18:20). Ilaah waa kana wood oo dhan isagu iska leh, haddana waxaa Ciise leeyahay, 'xoogga uu isagu ku awoodo inuu wax kastaba isaga hoosaysiiyo' (Filiboy 3:21). Ilaah waa kan wax walba aqoonta u leh, Ciisena waa sidaas oo kale. Isagu waa kan akhriya waxa ku jira qalbiyada dadka (Yooxanaa 2:24-25). Isagu Bilowgii ayuu sii ogaa in la gacan gelin doonay, (Yooxanaa 6:70-71; 13:10-11). Waxa uu si faahfaahsan u sii sheegay dhimashadiisa iyo sare kiciddiisa (Matayos 16:21), iyo sidoo kale Butros dafiraaddiisii iyo dib u soo noqoshadiisii (Luukos 22:31-34). Isagu waxa uu garanayaa waxa kaniisadaha ka dhex socda (Muujintii 2:2). Laakiin mucjisada ku jirtaa shaqsiyaddiisa ma aha mid la garan karo, 'ninna Wiilka garan maayo Aabbaha maahee' (Matayos 11:27). 'Ayaa dembiyo cafiyi kara Ilaah keliya maahee?' Ciise si awood leh ayuu ninkii cuuryaanka ahaa ugu yidhi, 'Wiilkow, dembiyadaadu waa cafiyan yihiin' (Markos 2:7, 5); oo waxaan isku baraarujinaynaa 'sida Rabbiguba idiin cafiyey, idinkuna sidaas oo kale yeela' (Kolosay 3:13). Yaa qudduus ah oo aan Ilaah ka ahayn? Butros oo tan aad u garanaya ayaa Masiixa u soo qaatay sabuurrada 16 oo sheegay

inuu yahay ‘Mid Qudduus ah’ (Falimaha Rasuullada 2:27). Hadalkanu sidan ayuu noogu sii socon doonaa. Ishacyaah 45:23 waxa uu noogu sheegayaa ‘Jilib waluba anuu ii sujuudi doonaa, carrab walubana waa igu dhaaran doonaa.’ Axdiga Cusubna Ilaah waxa uu noo caddaynayaa in ‘in jilib kastoo ay magaca Ciise u wada sujuudaan … iyo in carrab kastaaba qirto in Ciise Masiix yahay Rabbiga’ (Filiboy 2:10-11). **Waxaan mar kale , iyo mar kale arkaynaa middan. Wixii uu Yahweh run ku yahay Ciisena waa ku run. Ciise waa Yahweh! Wixii Ilaah qudha u gaar ahaaday, masiixana waa u gaar. Masiixu waa Ilaah!** Waa in aynaan taa sinnaba uga shakin.

**Shaqooyinka Rabbaaniga ah:-**

Kumaa abuuray dunida? Eeg wixii Ciise Masiix laga diwaangeliyay, ‘Wax walba waxaa laga sameeyey xaggiisa, oo wixii la sameeyey lama samayn isaga la'aantiis …dunidana waxaa laga sameeyey xaggiisa ..’; ‘wax kastaba isagaa uumay … Wax walba isagaa uumay oo loo uumay’ (Yooxanaa 1:3, 10; Kolosay 1:16-17). Wa`ayo kan koonka isku haya, ee muummula? Qorniinku waxa uu odhanayaa, ‘wax kastaaba isagay isku haystaan.’ Oo Isagu ‘wax walba wuxuu ku hayaa erayga xooggiisa’. Waxa uu xertiisii si cad oo qeexan ugu sheegay ‘Amar oo dhan ayaa samada iyo dhulka laygu siiyey’
(Kolosay 1:17; Cibraaniyada 1:3; Matayos 28:18).
Yaan Ilaah ka ahayn oo wax nool soo sare kicin kara, oo adduunka xukumi kar? Waxaa kitaabku si toos ah uga sheegayaa Ciise Masiix, ‘…markii kuwa xabaalaha ku jiraa dhammaantood ay codkiisa maqli doonaan—kuwa wanaagga falay ilaa sarakicidda nolosha, kuwa sharka falayna ilaa sarakicidda xukunka’ (Yooxanaa 5:28-29). `Dhammaanteen waa in layna wada muujiyo kursiga xukumaadda ee Masiix hortiisa’ (2 Korintos 5:10). Rabbi Ciise Masiix waxa uu rissaladiisa ku caddeeyay masaalkiisii ku saabsanaa idaha iyo riyaha. Adhi jirrada barigu adhiga way wada daaqsan jireen, balse marka waqtiga galbashadu timaaddo waa ay kala soocan jireen. Masiixu waxa uu sheegay inuu ammaantiisa la iman doono, oo quruumaha oo dhan hortiisa ku soo ururin doono: ‘oo wuxuu u kala sooci doonaa mid mid sida adhijirku u kala sooco idaha iyo riyaha’ (Matayos 25:32). Yaan Ilaah ka ahayn oo middan samayn kara?

Kumaa bixin kara nolosha weligeed Ilaah mooyaane? Ciise waxa uu dadkiisa ugu bishaareeyay oo uu yidhi, ‘waxaan iyaga siiyaa nolosha weligeed ah’ (Yooxanaa 10:28). Yaa Ruuxa Qudduuska ah soo diri kara oo aan Ilaah ka ahayn? Ciise waxa uu ballan qaaday ‘aan idiin soo diri doonaa’ (Yooxanaa 16:7). Yaa dadka qudduus ka dhigi kara oo aan Ilaah ka ahayn? Rasuul Bawlos waxa uu qoray, ‘siduu Masiixuba u jeclaaday kiniisadda oo uu nafsaddiisii u bixiyey iyada aawadeed, inuu quduus ka dhigo oo ku nadiifiyo … ’ (Efesos 5:25-26). Waxaa jira waxyaalo Ilaah oo qudha uu samayn karo; oo aan arkayn in Ciise Masiix qudhiisuna sameeyay. Sidaas daraadee waa in Isagau qudhiisu yahay Iaah.
Ciise ereyadiisii iyo ficilladiisii waxa ay inoo soo koobayaan kan uu yahay. Axdiga Hore waxa aan ku arkaynaa in nebiyadii caddeeyeen iyaga oo odhanaya, ‘sidaas ayaa Rabbigu, leeyahay’ Markii uu Ciise Masiix yimid sidaas oo kale ayaa farriintiisu amar weyn u xambaarsanayd. Kuwa Isaga maqlaa waa ay daandaami jireen (Matayos 7:28-29; Yooxanaa 7:32, 45-46). Waxaa iyaga lagu eedeeyay xigashada wax baridda qoraayaasha Yuhuudda. Ciise marna uma hadlin sidooda oo kale; ama sidii nebiyadii oo kale. Amarkiisa ayuu ku hadlayey Isaga oo odhanaya, ‘waxaan idinku leeyahay’ (Matayos 5:18, 10, 22, iwm.). Tani waxa ay caddayn u tahay astaanka Ilaahiyanka ah. Sidii Ilaah oo kale ayuu u hadlay.

Sidaas oo kale ayuu jinniyadii ula hadlay, wayna soo baxeen (Markos 1:21-27). Ereygiisa oo qudha ayaa lagama maarmaan u ahaa – kana awood badnaa ficilladii ay saaxiriinta Yuhuuddu soo bandhigayeen! Dabayshii iyo baddii ayuu la hadlay, oo waa ay addeeceen (Markos 4:41). Waxa uu la hadlay kuwii indhaha la’aa oo wax bay arkeen; oo kuwii dhegaha la’aa wax bay maqleen (Matayos 9:27-32; Markos 7:34-35). Hadalkiisa waxaa

ku socday kuwii cuuryaannada ahaa, oo cudurradii ayaa ku boqgsooday oo kuwii dhintay ayaa ku sare kacay (Yooxanaa 5:8-9; Luukos 17:11-19; Markos 5:41-42). Qaab Ilaahnimo ayuu u hadlay, oo kuwii Isaga mucjisooyinkiisii arkay waxa ay dareemeen xaadirnimada Ilaah (Luukos 5:25-26; 7:16; 9:43). Mucjisooyinkiisu waxa ay kuu sheegayaan kan uu yahay, waana sida uu Yooxanaa ku sheegay dhammaadka Injiilka uu qoray 'Haddaba waxaa Ciise ku sameeyey xertii hortooda calaamooyin kale oo badan oo aan ku qorrayn kitaabkan; Laakiin waxyaalahan waxaa loo qoray inaad rumaysataan inuu Ciise yahay Masiixa, Wiilka Ilaah, iyo inaad nolosha ku lahaatataan magiciisa idinkoo rumaysanaya' (Yooxanaa 20:30-31).

**Caabudaadda Ilaah**

Haddii Ciise Ilaanimo ku sifoobay, dabcan ma noqonayso wax qalad ah in Isaga la caabudo. Qorniinka ayaa noo sheegaya in aysan ahayn oo qudha in la iska caabudo, balse ay tahay tahay in si dhab ah loo caabudo Isaga oo ah Masiixa. Rabbi Ciise masiix daraaddiis weeye tii loo amray oo loo yidhi, 'alaa'igaha Ilaah oo dhammu isaga ha caabudeen' (Cibraaniyada 1:6). Sidaasna waa ay yeeleen oo waxaa Isaga samada ku soo dhaweeyay malaa'igo fara badan, 'oo waxay cod weyn ku lahaayeen, Istaahil waxaa ah Wankii la gowracay inuu helo xoog, iyo maal, iyo xigmad, iyo itaal, iyo ciso, iyo ammaan, iyo mahad' (Muujintii 5:12). Taas waxaa raaci doona dadkiisa dunida maanta ku nool oo iyaguna si cajaa'iba leh u odhan doona, 'Kan ina jecel oo dembiyadeenna dhiiggiisa inagaga furay … oo boqortooyo inaga dhigay inaynu wadaaddo u ahaanno Ilaaha ah Aabbihiis, isaga ammaanu ha u ahaato iyo dowladnimo weligiis iyo weligiisba. Aamiin' (Muujintii 1:5-6).

Waa run Masiixiyiinta caabudaad ayaa Masiixu ku leeyahay waana kuwa 'meel kasta jooga oo ku barya magaca Rabbigeenna Ciise Masiix' (1 Korintos 1:2). Tan waxa ay u sameeyaan in ay doonistiisa tahay in 'in dadka oo dhammu Wiilka maamuuso siday Aabbaha u maamuusaan. Kii aan Wiilka maamuusi, ma maamuuso Aabbaha' (Yooxanaa 5:23). Waa taas sababta uu istafaanos Ciise Masiix u baryey markii uu sii dhimanayey, (Falimaha Rasuullada 7:59-60). Waa middaas sababta marka ay dadku qaadanayaan iimaanka rumaysadka Masiixiyadda loogu baabtiisu ama loogu maquuriyo magaca, Aabbaha, Wiilka {oo ah Ciise Masiix} iyo Ruuxa Qudduuska ah, (Marayos 28:19). Waa middaas tan uu rasuul Bawlos inoogu sheegayo in ducada Cashada Rabbiga ay ugu jirto in la dhaho, nimcada Rabbi Ciise Masiix, iyo Jacaylka Ilaah, iyo wehelnimada Ruuxa Qudduuska ah (2 Korintos 13:14). Rabbi Ciise Masiix waa Ilaah, si la mid ah labada ahaansho ee kale ee Ilaah leeyahay.

Tan waxa aan ka arki karnaa qisada 'shakigii Toomas' ee laga dhex heli karo afarta kitaab ee Injiilka sida ay ugu dhex xusan yihiin. Maalintii uu rabbigeenna Ciise Masiix dhimashada ka sarekacay, waxa uu u yimid xertiisii oo naxsan oo qol hoosta ka xidhay, oo halkaas isku urursaday. Balse Toomas lama uusan joogin oo kama uusan r
Maysan kolkii uu mar dambe u yimid ee ay u sheegeen, ee ay ku yidhaahdeen 'Rabbiga ayaannu aragnay.' Dooddiisu waxa ay ahayd; 'Haddaanan gacmihiisa ku arkin calaamadii musmaarrada, oo aanan fartayda gelin nabarkii musmaarrada, oo aanan gacantayda gelin dhinaciisa, rumaysanba maayo' (Yooxaqnaa 20:25).

Yooxanaa waxa uu inoo sheegayaa dhacdadii taas raacsanayd oo ah. 'Oo siddeed maalmood dabadeed xertiisii gudaha ayay mar labaad wada joogeen, oo Toomasna waa la joogay. Markaasaa Ciise yimid, albaabbadii oo xidhan, oo intuu isdhex taagay ayuu ku yidhi, Nabadi ha idinla jirto. Markaasuu Toomas ku yidhi, Fartaada keen oo arag gacmahayga, oo gacantaadana keen oo geli dhinacayga, oo ha rumaysad la'aanin laakiin rumayso. Toomas ayaa u jawaabay oo ku yidhi, Rabbigay iyo Ilaahayow!' (Yooxanaa 20:26-28).

Ciise ma uusan diidin wixii uu Toomas bushimihiisa iyo carrabkiisa kaga dhawaaqay. Ma uusan sheegin in ay gef tahay in Isaga lacaabudo. Gebi ahaanba si caddaan ah ayuu u aqbalay. Waxa uu Toomas ugu jawaabay oo uu ku yidhi, 'Waad i aragtay, taas aawadeed

ayaad rumaysatay. Waxaa barakaysan kuwa aan i arag ee rumaystay' (Yooxanaa 20:29). Waxa uu bayaan u qiray in rumaystahu yahay ka qira Ilaahnimadiisa ee dhaha, 'Rabbigay iyo Ilaahayow' waana kaas kan sida dhabta ah u rumaysan Ciise Masiix. Isagu waa aasaaska iimaankooda. Waxa ay ku badbaadeen waa Isaga rumaysadkiisa (Falimaha Rasuullada 16:31). Waxa ay garnayaan in uu yahay 'Ilaaheenna weyn oo ah Badbaadiyeheenna Ciise Masiix' (Tiitos 2:13).

Iyaga adayg kuma aha in kan ay darajaynayaan uu yidhi, 'Aabbuhu waa iga weyn yahay' (Yooxanaa 14:28). Arrintu waxaa weeye in Ciise yahay Aabbaha oo jidh aadane soo qaatay, Isaga oo dul u yeeshay inuu is hoosaysiiyo isaga oo ay awood oo dhami u sugnaatay. Isagu jidh aadane ayuu soo qaatay, oo sidii aadane oo kale ugu yimid aadanaha. Isagu si run ah ayuu Ilaah u ahaa. Saddexmidnimadu waa tiirka ugu adag xagga ka hadalka ahaanshaha Ilaah. Waa mid aan la soo koobi karin haddii si walba looga faalloodo. **Tan waxaa kaa kaafiyaya in Ilaahnimada Ciise Masiix ayan waxna u dhimayn soo qaadashada jidh aadane**. Waxaan haddana dhihi karnaa; 'buuxnaanta Ilaahnimada oo dhammu waa ku jirtaa isagoo jidh leh' (Kolosay 2:9).

Haddaba, halkee ayaannu imminka maraynaa? Waxaan soo aragnay in uusan Ilaah jidhin Ilaah keliya mooyaane. Waxaan soo aragnay in Aabbuhu yahay Ilaah. Waxaan soo aragnay in Ciise Masiix oo ah Wiilka uu yahay Ilaah. Waxaan soo aragnay in haddana uu labadan qaab ku sifoobay Ilaah. Aabbuhu ma aha Wiilka, Wiilkuna ma aha Aabbaha. Haddana waxa aan og nahay in middani aysan ahayn in ay jiraan labo ilaah. Balse waxaa jira labo ahaansho oo ah Ilaah. Haddana ereyga '*Saddexmidnimo*' ma aha mid mid labo ahaansho sifaynaya. Waa erey saddex ahaansho sifaynaya, oo ka yimid luuqadda Laatiinka oo ah *Tirinatas*, marka laga eego taariikhda Tertullian kii reer Carthage ee dhammadkii qarnigii labaad. Tani waxa ay ku ahaatay iyada oo Kitaabka Qudduuska ah laga ilaalinayo oo bidcada iyo kuwa doonayey in ay qallooociyaan waxa uu kitaabku ka sheegayo sifooyinka Ilaah ee saddexmidnimada. Theophilus kii reer Atioch waxa uu isticmaalay ereyga Giriigga ah ee *trias* isaga oo tan ka duulaya 180 sanno, Ciise Dabadii, halka Tertullian uu ka adeegsaday ereyga laat isaga oo tan ka duulaya 180 sanno, Ciise Dabadii, halka Tertullian uu ka adeegsaday ereyga laatiinka ah ee sida tooska ah u qeexaya '*Saddexmidnimada*'. Kitaabku saddexdan sife midba sidiisa ayuu u sheegay in saddexduba ay yihiin sife uu Ilaah midba si ahaant. Kitaabku saddexdan sife midba sidiisa ayuu u sheegay in saddexduba ay yihiin sife uu Ilaah midba si ahaantiisa isugu muujiyey, waxa ay masiixiyiintu ereygan si guud ahaaneed u adeegsaden 220 sanno Ciise Dabadii. Saddexmidnimadu waxaa weeye in Ciise Aabbuhu yahay Ilaah, Ciise Masiix, oo ah Wiilkana uu yahay Ilaah, Ruuxa Qudduuska ahna uu yahay Ilaah.

## 5.
## Ruuxa Qudduuska ahu waa Ilaah

Waxaa jira dad badan oo aa naqbalsanayn shaqsiyadda Ruuxa Qudduuska ah. Magaca 'Wiilka'ee lagu tilmaamay Sayid Ciise Masiix waxa uu sheegayaa shaqsiyad, laakiin lama mid aha tan 'Ruuxa Qudduuska ah' iyo 'Ruuxa Ilaah'. Wiilka Ilaah waxa uu dhexdeenna ku yimid sidii aadane oo kale. Laakiin Ruuxa Qudduuska ahu marna inooguma muuqan sidii suurad aadane oo kale. Waxa aan ku tilmaami karnaa oo qudha in uu yahay awood Ilaah oo inoo timid. Waxaana jira tuducyo badan oo Qorniinka ka mid ah oo tan inoo caddaynaya; tusaale ahaan kuwa hadlaya inuu yahay dabayn, neef iyo awood xoog badan (Yexesqeel 37:1-14 oo tusaale fiican inoo ah). Hase yeeshee marka aan Qorniinka oo dhan aahn. Hase yeeshee marka aan Qorniinka oo dhan guud ahaan eegno waxa aan ka dhex arkaynaa shaqsiyadda Ruuxa Qudduuska ah, oo ah Ilaaha ah Aabbaha iyo Wiilka, haddana ah ahaansho ka duwan labadaba.

Waxa aan arkaynaa shaqadiisa shaqsi ahaaneed. Haddii aad u dhabba gashid Yooxanaa cutubyada 14-16, waxa aad ku arki doontaa Ciise oo ka hadlaya isaga ku jiristiisa (14:17); wax bariddiisa, iyo inuu xusuus ahaan wax isugu keenayo (14:26); caddaynayana (15:26); xukumaya (16:8); hagaya, maqlaya, hadlaya, tusaya oo ammaanaya (16:13-14) Awood qudhihi middan ma samayn karto. Meelo kale oo Axdiga Cusub ka mid ah waxa aan arkaynaa Isga 'waa Ruuxa Qudduuska ah e' oo wax barwaya (Luukos 12:12; 1 Korintos 2:13); marqaati furaya (Falimaha Rasuullada 5:32); oo hadlaya (Falimaha Rasuullada 8:29; 28:25; Cibraaniyada 2:7); oo dadka adeegga ugu yeedhaya (Falimaha Rasuullada 13:2); oo dadka diraya (Falimaha Rasuullada 13:5); oo ficillada qaarkood xarrimaya (Falimaha Rasuullada 16:6-7); oo kuwa dhintay sare kicinaya (Rooma 8:11); oo dhexdhexaadiye ah (Rooma 8:26); barakaynaya (Rooma 15:16); oo muujinaya, raadinaya, oo aqoonsiinaya (1 Korintos 2:10-11) oo qabanaya waxa sifaha shaqsigu qabanayo.

Ma aha oo keliya inuu qabanayo ficillada uu shaqsigu qabto. Balse waxa uu leeyahay dabeecadda wax qabashada shaqsiga. Waxaa la caddeeyay in uu leeyahay aragti (Yooxanaa 14:26; 15:26; Rooma 8:16); iyo doonis (1 Korintos 12:11) ); iyo sidoo kale nuglaansho (Ishacyaah 63:10; Efesos 4:30). Miyuusan Bawlos uga hadleen 'jacaylka Ruuxa Qudduuska ah' si kale oo ah awood Ilaah oo dadka ka dhex shaqayanaysa oo qudha haddii uu san ahayn shaqsiyad ahaansho Ilaah oo qaas ah (Rooma 15:30)? Miyaan la sheegin in Ilaah og yahay maanka Ruuxa Qudduuska ah haddii uusan ahayn ahaansho Ilaah oo gooni ah (Rooma 8:27)? Oo sidee bay aadanuhu been ugu sheegi karaan Isaga (Falimaha Rasuullada 5:3)? oo u tijaabin karaan (Falimaha Rasuullada 5:9), Oo u hor joogsan karaan (Falimaha Rasuullada 7:51), Oo been bay u sheegaan (Falimaha Rasuullada), oo uu calool xumayn karaan (Efesos 4:30), oo u aflagaaddayn karaan (Cibraaniyada 10:29), oo wax gef ah uga sheegi karaan (Matayos 12:31) oo ugu haddana ugu qayshan karaa (Yexesqeel 37:9), haddii uusan ahaansho shaqsi ahaaneed lahayn?

Miyey rasuulladu odhan lahaayeen, 'buuxnaanta Ilaahnimada oo dhammu waa ku jirtaa isagoo jidh leh…' (Falimaha Rasuullada 15:28), haddii uu iska ahaan lahaa awood keliya? Side ayaa qofka marka uu rumaysadka qaadanayo loogu baabtiisaa 'magaca Aabbaha iyo Wiilka iyo Ruuxa Qudduuska ah' (Matayos 28:19), haddii labada ahaansho oo keliya ay shaqsi yihiin, oo Ruuxu uusan shaqsi ahayn? Oo miyuu Ciise Sheegi lahaa in uu 'xoogga Ruuxa meel kula noqonayo (Luukos 4:14), haddii ereyga 'Ruuxa' oo awood oo qudha iska

yahay?  Aayaddu waxa ay tilmaamaysaa in Ruuxa iyo xoogga ku jiraa ay kala duwan yihiin.. Isagu xoog waa uu leeyahay balse xoog ma aha. Aayado kalena oo fara bandanna sidaas oo kale ayey inoo sheegayaan (sida Falimaha Rasuullada 10:38; Rooma 15:13; iyo 1 Korintos 2:4) kuwaasoo micne la'aan ku tilmaamaya in ereyga Ruuxa lagu tilmaamo in uu yahay 'xoog ama awood'.

Axdiga Cusub waxaa lagu qoray luuqadda Giriigga, ereyga 'Ruuxa' Giriigga waxa uu ku noqonayaa *Peuma.* Naxwaha Giriiggu kuma tilmaamayo lab ama dheddig midna. Haddana nisbe ahaan waxa uu ku yahay. Lab ahaan marka ahaantiisa laga hadlayo. Ciise Masiix waxa uu ku sifeeyay oo uu Kitaabka dhexdiisa inuugu sheegay in uu yahay magac u yaalka 'isaga' sida ku jirta Yooxanaa 16:7, 8, 13-14 iwm., haddii aan si kale u dhanana waxa uu naxwaha ku noqonayaa magac u yaalka 'isaga' si la mid ah sida magac u yaalka ah isaga, waana sida uu Ciise noogu sheegay in Ruuxa Qudduuska ahu leeyahay ahaansho shaqsi ahaaneed, oo uusan sheey ahayn.  Sidoo kale waxa uu Ruuxa Qudduuska ah ugu yeedhay magaca ah 'lataliye ama caawiye': Yooxanaa 14:16, 26; 15:26; 16:7. Tan macnaheeda looma tarjuman karo inuu yahay oo qudha lataliye , ama xoog ama awwod midna. Ciise Masiix waxa uu ballan qaaday in marka uu tago keddib, uu lataliyuhu u imanayo xertiisa oo uu u ahaanayo sidii uu iyaga u ahaa oo kale. **Marka waa wax cad in Ruuxa Qudduuska ahu uu shaqsi u yahay si la mid ah sida Ciise Masiix oo kale. Sidoo kale waa ay caddahay in Ciise iyo Ruuxa Qudduuska ah ay labo ahaansho oo shaqsiyadeed kala leeyihiin**.

**Ahaanta Ilaanimo**

Ciise waa Ilaah,  waana wax lala yaabo haddii aan Ruuxa ku tilmaanno in uu ka darajo yar yahay Isaga. Oo yaa booskii Ciise Masiix u geli lahaa xertiisa haddii uusan Ruuxa Qudduuska ah qudhiisu ahayn Ilaah? Tani sidaas ayey u ahaatay. Waxaa jira hal Ruux oo keliya (Efesos 4:4), oo Axdiga Cusub waxa uu ina siinayaa afar waddoo oo inoo caddayna in Ruuxa Qudduuska ahu yahay Ilaah. Kuwani waxa ay la mid yihiin sida kuwa inoo caddaynaya Ilaah ahaanshaha Ciise Masiix, balse sife ahaan ku kala gaar ah.

Tan koobaad waxaa weeye in magacyada Ilaah loo adeegsaday Ruuxa Qudduuska ah ama lagu magacaabay. Isaga waxaa loogu yeedhay in uu yahay Ilaah. Tusaale ahaan, Baxniintii 17:7 waxa aan ka akhrinaynaa in 'carruurta Israa'iil … ay Rabbiga tijaabiyeen' kan ah Yahweh. Sabuurrada 95:8. Dhacdadan ayey la xidhiidhaa, oo middan dhexdeeda Ilaah waxa uu odhanayaa, 'Qalbiyadiinna ha adkaynina, sidii wakhtigii dhirifka … markii awowayaashiin I tijaabiyeen.' Tan waa sida Sabuurrada looga soo qaatay ee ku jirta Cibraaniyada 3:7-11, hadalkuna waa kan ka hadlaya Ruuxa Qudduuska ah. Hadii aan si kale u dhahno, Ilaaha hadalkiisu yahay Sabuurrada ee ka dhex hadlaya—ee ah Yahweh, kan lamadegaanka lagu dhex tijaabiyey—mid kale ma aha ee waa Ruuxa Qudduuska ah.

Tan waxa aan sidoo kale ku dhex arkaynaa Ishacyaah 6:8-9. Halkan Ishacyaah waxa uu ku maqlay hadalkii Yahweh oo ku leh 'Yaan diraa …?' in yar dabadeedna Yahweh waxa uu isagii u doortay inuu nebi ahaado, oo uu farriintiisa u dhiibo: 'Tag, oo dadkan waxaad ku tidhaahdaa…' Markii Bawlos ereyadan soo qaatay sida ku sugan Falimaha Rasuullada 28:25-27, waxa uu sheegayaa in uu ahaa Ruuxa Qudduuska ah kan hadlayey: sidaas darteena Ruuxa Qudduuska ahu waa Yahweh. Isagu waa Ilaah. Casharkan oo kale waxa aan kaarki karnaa oo aan baran karnaa marka aan is barbar dhigno Yeremyaah 31:33 iyo Cibraaniyada 10:15-16.

Waa sababtan tan Butros uu u adkaynayo in Ruuxa Qudduuska ah oo beenlaga sheegay uu la mid yahay Ilaah oo been laga sheegay (Falimaha Rasuullada 5:3-4). Tan ayaa ah sababta Bawlos uu u adkaynayo in Ruuxa Qudduuska ah oo ee qofka ku jiraa uu qofka jidhkiisa uga dhigo macbadka Ilaah (1 Korintos 3:16-17; 6:19).

Qodobka labaad waxaa weeye in sifayaasha Ilaah ay ku cad yihiin Ruuxa Qudduuska ah. Wixii Ilaah ku sifoobo isna sifahaas oo kale ayuu yeelanayaa oo uu leeyahay. Tani sidaas maysan noqon lahayn haddii Ruuxa Qudduuska ahu uusan Ilaah ahaan lahayn. Dhowr tusaale ayaa looga qanci karaa. Ilaah mooyaane ma jirto cid kale oo daa'im noqon karta; oo Cibraaniyada 9:14 dhexdeeda sidaas ayaa Ruuxa Qudduuska ah loga dhex tilmaamay. Ruuxu waa Qudduus. Ruuxu meel walba ayuu hal mar wada joogaa (Sabuurrada 139:7-10). Ruuxa Qudduuska ahu wax walba ogaal ayuu u leeyahay (Ishacyaah 40:13-14); 1Korintos 2:10-11; Rooma 11:34). Ruuxu waxa uu sameeyaa wax walba oo uu ku farxo (1 Korintos12:11; Rooma 15:19). Ruuxa Qudduuska ahu waa Ilaah.

Qodobka saddexaad waa in sifayaasha shaqooyinka Ruuxa Qudduuska ah ay leeyihiin sifayaasha shaqooyinka Ilaah. Miyuusan Ilaah ahayn kan aadanaha abuuray? Eliihuu waxa uu sheegayaa ‘Waxaa i sameeyey Ruuxa Ilaah, Oo waxaa i noolaysa Ilaaha Qaadirka ah neeftiisa’ (Ayuub 33:4). Ilaah mooyee yaa kaloo waarin kara caalamka? Ilaah mooyee yaa kaloo yaabab samayn kara? Ilaah mooyee yaa kaloo dembiilaha siin kara dabeecad cusub oo nolol ruux ahaaneed siin kara? Ilaah mooyee yaa kaloo awooda oo awoodi doona inuu kuwa dhintay kiciyo? Haddaba ogoow waxan oo dhan waa sifooyinka uu Qorniinku ku sifaynayo Ruuxa Qudduuska ah ee uu leeyahay (Sabuurrada 104:30 iyo Ayuub 26:13; Matayos 12:28 iyo 1 Korintos 12:9-11; Yooxanaa 3:5-6 iyo Tiitos 3:5; Rooma 8:11). **Ilaah mooyee ma cid kalaa shaqada Ilaah qaban karta? Haddaba waa kuwan shaqooyinka uu Ruuxa Qudduuska ahu qabto!**

Sida ku jirta 2 Korintos 3:18 waxaa naloogu sheegayaa in Ruuxa Qudduuska hu uu dabeecadaha rumaystayaasha si is daba joog ah u beddelo. Ilaah ekaantiisa ayey si aad ah u helaan oo ugu beddelmaan. Ilaah mooyee ma cid kalaa middaa samayn karta? Taas weeye tan uu Bawlos noogu sheegayo in farriintiisu ay ku timid waxyi amarka Ilaah ku ahaaday (2 Timoteyos 3:16). Butros waxa uu sheegayaa in farriintooda uu Ruuxa Qudduuska ahu hagayey (2 Butros1:21). Xaqiiq Ruuxa Qudduuska ahu waa Ilaah!

Qodobka afraad waxaa weeye, in caabudaad iyo sharfidi ay Ilaah oo keliya u ahaatay, una tahay, Qorniinka dhexdiisana sidaas oo kale ayey Ruuxa Qudduuska ah ugu ahaatay. Dadka Masiixiyadda soo gala magaciisa ayaa lagu baabtiisaa (Matayos 28:19). Tani ma aha Isaga oo lagu gafay. Gefku waa sharafta iyo cisada Ilaah oo meel lagaga dhacay. Si taas la mid ahna qofkii Ruuxa Qudduuska ah u gefaa waxa uu ku gefay Ilaah. Gefkani waa mid aad iyo aad u daran wayna adag tahay in Ilaah si fahlan ku cafiyo (Matayos 12:31-32). Kitaabka Rooma 1:9 Bawlos waxa uu Ilaah ugu yeedhanayaa in uu marag uga furo runta waxa uu sheegayo; haddaba Rooma 9:1 waxaa ku jira qoraal isla sidaas oo kale ah, oo ku qeexayo in Ruuxa Qudduuska ah uu yahay kan u marqaati fura ereyada uu ku hadlayo. Kama uu cabsado inuu caawimaad weyddisto Ruuxa Qudduuska ah marka uu barakada Ilaah ugu ducaynayo kuwa uu wax u qorayo (2 Korintos 13:14).

Haddaba Ruuxa Qudduuska ahu waa Ilaah. Isagu sifooyinka Ilaah oo dhan ayuu leeyahay. Shaqooyinkii Ilaah ku sifoobay oo dhan ayuu qabtay, oo waa Ilaah caawimaad la

weyddiisto oo ciso leh. Waxa aan middan ku so oaf jari karnaa in uu yahay Ilaah, oo ah Ilaah si la mid ah sida Aabbaha iyo Wiilka.

**Shaqsiyadda Gaarka ah**

Waa in aan ka taxaddarnaa oo aan ogsoonaannaa in Ruuxa Qudduuska ah uu leeyahay shaqsiyad gaar ah. Isagu waa Ilaah sida Aabbuhu u yahay. Isagu waa Ilaah sida Wiilku u yahay. Balse Isagu ma aha Aabbaha. Isagu ma aha Wiilka.

Cutubkeenna soo socda ayaan middan si qoto dheer ugu falan qayn doonnaa. Balse waxaan u baahan nahay in aan dulucda wax ka sii taabanno. Labo qayb ayaan kitaabka ka soo qaadanaynaa. Tan ugu horraysa waa Matayos 12:31-32, tanoo ah mid aan soo aragnay. Ciise waxa uu noogu sheegayaa meeshan in gefka la cafiyi karo. Dadkii tan maqlayey waxa ay moodayeen in uu ka waday gef loo geysto Ilaaha Aabbaha ah. Oo haddana waxa uu u sheegay in gef laga galo Wiilkana la cafiyi karo. Balse gef laga galo Ruuxa Qudduuska ah aanan weligiis la cafinayn. Waa ay caddahay in caytan loo geysto Ruuxa Qudduuska ah aanu la mid ahayn mi loo gaysto Aabbaha ama Wiilka. Oo maaddaama ay sida tahay Ruuxa Qudduuska ahu waxa uu leeyahay shaqisyad ka duwan tan Aabbaha iyo tan Wiilka.

Qaybta xigta waa Yooxanaa 15:26, halkaas oo uu Ciise Masiix uga hadlayo lataliyaha ama caawiyaha ‘Gargaaraha oo aan xagga Aabbaha ka soo diri doono …’ Waa wax cad in Ruuxa Qudduuska ahu uusan ahayn Rabbi Ciise Masiix, in kasta oo uu Masiixu sheegay in uu soo dirayo. Waa wax cad in Ruuxa Qudduuska ah uusan ahayn ahayn Ciise inkasta oo uu xagga Aabbaha ka soo diri doonay. Mid waluba waa Ilaah, mid kastaana shaqsiyad gaar ah ayuu wataa. Sida Kaatakiiska gaaban ee Westminister ku qoran, ayaa runtiisu waxa ay tahay, ‘waxaa jira saddex ahaansho oo Ilaah ku sifoobay; Aabbaha, Wiilka, iyo Ruuxa Qudduuska ah; saddexduba waa hal Ilaah ooh al ahaansho ah, oo awood iyo ammaanba ka siman.’ Tani waa caqiidada Saddexmidnimada oo si fudud loo soo koobay.

## 6.
## Saddex Shaqsiyadood oo Kala Duwan

Ujeeddada cutubkani waxaa weeye mid adkayn u ah arrintii aan hadda soo falanqaynnay. Aabbuhu ma aha Wiilka. Wiilku ma aha Ruuxa Qudduuska ah. Ruuxa Qudduuska ahu ma aha Aabbaha. Mid waluba waa Ilaah. Balse midba kan kale waa uu ka duwan yahay. Runtani ma aha mid ay adag tahay in la sheego, balse waxaa aad u adag sii loo fahmi lahaa.

Dadka qaar, ayaa ku kadsooma in fahanka runtan. Oo waxaa timaadda in ay qaaba kala duwan u dafiraan. Aalaaba saddex siyaabood ayey arrintani u dhacdaa.

Dadka qaarkii waa ay ka war qabaan in Baybalku na barayo in Ilaah saddex sife leeyahay, oo waxa ay haddana dafiraan in Ilaah hal ama mid ayahay. Oo waxa ay ku dhacaan dabin ah in Ilaah saddex yahay. Haddii aan si kale u nidhaahno, waxa ay noqdaan kuwo aamminsan saddex Ilaah.

Qaar kale waxa ay si sax ah u og yihiin in Baybalku na barayo in Ilaah hal yahay, oo waxa ay meesha ka saaraan ahaanshihii Ilaahnimo ee Wiilka, iyo Ruuxa Qudduuska ah. Waxa ay dafiraan in ay saddexdan kale ee sifaha Ilaah ah ay diidaan. Tan ayey ku tagaan oo waxa ay qaataan hal shaqsiyad oo keliya. Kuwan iyaga ah waxaa lagu magacaabaa Uniterians, ama Arians. Ama kuwa raacay Arian.

Qaar kalena waa kuwa sida saxda ah Kitaabka wax bariddiisa u qaatayoo, waxa ay aamminsan yihiin in Ilaah hal yahay, haddana uu leeyahay saddex shaqsiyadood oo uu ku sifoobay oo ah Aabbaha, Wiilka iyo Ruuxa Qudduuska ah in ay hal yihiin. Ilaah kale ma jiro Ilaah keliya mooyaane, oo saddex siyaabood oo kala duwan saddex waqti ama xilli u kala muuqday. Magaca Aabbaha, Wiilka iyo Ruuxa Qudduuska ah waxa ay qeexayaan qaabka uu Ilaah saddex qaab oo kala duwan ugu shaqeeyo Isaga ooh al ah.

Haddaan aad u dhuuxnay oo aan rumaynay wax bariddii ku jirtay cutubkii hore, labadii labadii dafiraad een hadda soo sheegnay caqabad nagu noqon maayaan. Waxaan soo aragnay in Ilaah hal yahay. Waxaan soo arqagnay in saddexda shaqsiyadood ay hal Ilaah isku yihiin. Haddana innaga oo sidan u rumaysan ayaa waxaan u baahan nahay in aan ogsoonaanno in Abbaha, Wiilka iyo Ruuxa Qudduuska ah ay leeyihiin saddex shaqisyadood oo kala duwan. Tan waxa ay naga saaray fikradaha qaladkaa oo dhan.

Saddexdan magac ee **Aabbaha, Wiilka iyo Ruuxa Qudduuska ahu waxa ay waa saddex isla siman. Waa saddex shaqiyadood oo kalwa duwan**. Sida ku jirta Yooxanaa 12:28 Aabbuhu waxa oo udhanayaa 'Waan' 'I' oo an aniga; Yooxanaa 17:4 na Wiilku waxa uu odhanayaa oo ku jirta 'aniga' tani af soomaali ahaa erey ayey ku lifaaqan tahay oo sida sidii Ingiriisiga oo kale 'I' aniga uma noqonayso; oo Falimaha Rasuullada 13:2, Ruuxa Qudduuska ahuna waxa uu odhanyaa 'iigu' oo tilmaamaysa magac u yaal keli ahaansho. Waa saddexdan oo hal Ilaah isku ah, balse uu mid waliba odhanayo ama isku tilaamayo 'aniga.' Laakiin waxa ay wada leeyihiin garasho aan la gaadhi karin iyo awood isku mid ah. Marka aannu leenahay waxa ay leeyihiin saddex shaqsiyadoo oo kala duwan macnaheedu ma ahan oo ulama jeedno in ay u kala duwan yihiin si la mid ah sida aadanuhu uu midba kan kale ugaduwan yahay. Iyagu waa isku hal Ilaah. Annaga aadanaha ahaan sida ay sidan ku noqdeen waa wax aad layaab inoogu ah. Uma heli karno qaab aannu sidii aan rabno ugu sharrixi karno, {waayo waa wax ka baxsan caqliga aadanaha oo aanay gaadhi karin intii uu nooga

shegay mooyaane}. Waxa la inoo muujiyay ayaa ah in uu jiro 'hal Ruuxa… hal Rabbi… hal Aabbe…' oo ah Ilaah (Efesos 4:4-6); 'isla hal Ruuxa… isla hal Rabbi…isla hal Ilaah' (1 Korintos 12:4-6). Waa saddex sidaas u bayaansan. Balse waa in la xusuusnaadaa oo aynaan hilmaamin in ay yihiin saddex hal ah.

Tani mahan oo keliya in aan u aragno iimaanka Kaniisadda Masiixiyadda oo taariikh soo jireena ah. Imaan gacan labaad ahu ma aha iimaan. Waa in runtan aan ka dhex aragnaa Kitaabka Qudduuska ah.Miyeynaan u baahnayn in tixraaceennu ahaado Kitaabka oo aan ka soo qaadanno? Tan waxaan aad uga dhadhansanaynaa bogoggan soo socda oo aan ku soo qaadan doonno Injiilka Yooxanaa.

**Daliilaha Kitaabka Qudduuska ah**

Waxaannu cutubkii afraad ku soo aragnay in Masiixa, oo ah Wiilka, uu yahay Ilaah, oo uu yahay muujinta tooska ah ee Aabbaha (Yooxanaa 1:18). Haddana muujintu ay tahay in Ilaah soo diray Masiixa (Yooxanaa 5:23-24); oo uu Isaga ka yimid (16:28); oo uu Isaga u laaban doonay (14:12; 16:28); oo uu amarradiisa helay (Yooxanaa 10:18; 14:31); oo uu Isagu jecel yahay (Yooxanaa 3:35); oo salaaddiisa uu Isaga ku jaheeyo isaga oo isticmaalaya ereyada ah 'adiga' taasoo uu mar walba samaynayey (Yooxanaa 11:41; 17:3; 12:27-28), oo marka uu ka hadlayo yiraahda 'Isaga', ama 'naf ahaantiisa' (Yooxanaa 5:19-26). Waxaan sidoo kale arkaynaa Aabbaha oo Wiilka la hadlaya oo leh 'adiga' balse aan odhanayn 'aniga' (Markos 1:11; Luukos 3:22); iyo Isaga leh 'isaga' (Markos 9:7); oo baryadiisa dhegta u dhigaya oo leh si uu ugu soo jawaabo (Yooxanaa 12:27-28). Waa mid si waadax ah u cad in Aabbuhu uusan ahan Wiilka, oo uusan Wiilku ahayn Aabbaha. Magacyadooda ayaa middan inoo caddaynaya, laakiin wax kasta oo ay tahay runtu inama seegayso; oo mid kastaa waa Ilaah, sidii aan aragnay.

Arrintu halkan oo keliya kuma ay eka. Haddii aan akhrinno Yooxanaa 14:16, 26; 15:26; iyo 16:13-15, wax intaas ka sii badan ayaannu baranayaa. Waa 'lataliyaha' aha Ruuxa Qudduuska ah ee ka yimid xagga Wiilka, waa uu ka soocan yahay shaqsi ahaa Aabbaha, sidoo kalena waa uu ka soocan yahay Wiilka. Ciise ayuu Aabbaha weyddiistay inuu diro. Aabbbuhu magaca Wiilka ayuu ku soo diray. Isaga ayaa xagga Aabbaha ka soo diray. Ruuxa Qudduuska ahu waxa uu Wiilka ku ammaanaa oo qaataa wixii Aabbuhu Wiilka siiyey oo uu xertiisa u muujiyaa. Aayadahan oo dhan waxa aan mar kale ku eegi doonnaa cutubka 8aad. Intii aan hadda soo aragnay oo dhan waxa ay inoo caddaynayaan in Aabbah, Wiilka iyo Ruuxa Qudduuska ahu ay kala leeyihiin shaqsiyado kala duwan. Midi kan kale la mid ma aha.

Dabcan waxaa jira jumlado kale oo kitaabka ku jira oo aan ka arki karno in Ilaaha Aabbaha ah, Ilaaha Wiilka ah iyo Ilaaha Ruuxa Qudduuska ah ay kala duwan yihiin. qaybaha ug horreeya ee Injiilka matayos (3: 13-4:1) waxa aannu ku arkaynaa baabtiiskiii Sayidkeenna Ciise Masiix. Markii uu biyaha dhex galay, Ruuxii Ilaah ayaa ku soo degay, oo isla markii waxaa samada ka yeedhay codkii Aabbaha oo qiraya in uu yahay Wiilkiisa uu jecel yahay, oo kan barako ay u sugnaatay. Ma kala duwanaansho tan ka weyn oo la soo bandhgi karo ayaa ayaa jira oo ah—Aabbaha samada joogay, Wiilka oo dhulka joogay iyo Ruuxa Qudduska ah oo soo degay?

Ayadaha ugu dambeeya ee Injiilka Matayos waxa aan ky arkaynaa hawshii weynayd ee Masiixu u dhiibay rumaystayaasha oo ah in quruumaha oo dhan ay xer ka dhigaan, oo tawbad-keenaha ku baabtiisaan ‘magaca Aabbaha iyo Wiilka iyo Ruuxa Qudduuska ah’ (Matayos 28:19). Ereyga kumladdan ku jira ee ‘iyo’ waa inooga filan inuu noo qeexo in Aabbuhu uusan ahayn Wiilka, Wiilkuna uusan ahayn Ruuxa Qudduuska ah oo Ruuxa Qudduuska ahna uusan ahayn Aabbaha. Haddana Ilaah midnimadiisu ma aysan burburin: Tawbad-keenaha laguma baabtiisayo ‘magacyada’, balse waxaa lagu baabtiisayaa ‘magaca’.

Mid tan la mid ah waxa aan ku arkaynaa 2 Korintos 13:14, marka uu baryada Rabbiga sheegayo: ‘Nimcada Rabbi Ciise Masiix iyo jacaylka Ilaah iyo wehelnimada Ruuxa Quduuska ahu kulligiin ha idinla jireen. Amen.’ Haddana meeshan ereyga ‘iyo’ waxa uu na tusayaa sida saddexdoodu ay sife kala duwan u leeyihiin. Sidii aan soo aragnay, Bawlos waxa uu si cad u rumaysnaa waxdaaniyada Ilaah. Saddexdaba caawimaad ayuu baryadiisa ku weyddiisanayaa, isaga oo weliba adkaynaya in saddexduba Ilaah yihiin. waxa uu samaynayaa isaga oo weli muujinaya waxdaaniyada Ilaah. Waxaan u baahan nahay in aan si xusuusinno in kasta oo aan ereyga ‘saddexmidnimo’ aam laga helayn Baybalka in haddana saddexdan sife ee Ilaah ay ku jiraan Baybalka oo aan ka dhex arki karno.

**Ereyga ‘shaqsi’**

Waxaa jira etrey aan aad ugu sharraxnay buugan dhexdiisa oo aynaan toos uga dhex helin qoraalladii Kitaabka ee aan imminka soo tabaanay. Waa ereyga ‘shaqi ana qof’. Waxaan u baahan nahay in aannu imminka wax ka nidhaahno.

Caqiiqdada Saddexmidnimadu ma adka in wax la yidhaahdo, balse Masiixiyiinta waa ay ku adag tahay in ay aalaaba si xooggan u qeexaan. Ma aha wax in la muujiyo oo la sheego in Ilaah mooyaane uusan Ilaah kale jidhin. Ma adka in la sheego in ay jiraan saddex sife oo kala duwan oo ah Ilaah. Culaabtu waxaa weeye marka qofku keeno su’aal ah ‘*Saddex maxaaya?’* lama dhihi karo ‘*saddex ah saddex’* waayo daddexdu iyaga oo midba sifihiisa gaar ahaaneed leeyahay ayuu haddana Ilaah yahay, sida Aabbaha oo sifihiisa gaar ahaaneed leh; si la mid ah sida Wiilka iyo Ruuxa Qudduuska ah. Lama dhihi karo ‘*saddex ilaah*’, waayo haddii aad sidaa tidhaahdo waxa aad ku dhacaysaa in aad aamminsan tahay saddex ilaah, oo Ilaah waxdaaniyadiisii ayaa dafiraysaa. Haddaba maxaad saddexdan ku magacaabi kartaa sida Aabbaha, Wiilka iyo Ruuxa Qudduuska ah? Iyagu waa saddex … isku ah hal Ilaah. Taariikh kama hadli kartid adiga oo adiga oo siiqaddeeddeeda ka boodaya ama aan silsiladeedda raacayn. Waa ka soo hadashaa bilow illaa dhammaad, oo haddii ereyada qaar kugu adkaadan aad uga hadlaysid waa in aad u heshaa erey ku habboon.

Ereyo badan oo aad u adag ayaa la soo adeegsanayey qarniyo aad u fara badan, iyaga oo aan mararka qaar kaafinayn ama ku fillayn waxa la rabo in looga hadlo. Qoraayaashii Giriiggu waxa ay isticmaaleed ereyga *hopstasis* (‘hypostasis’) halka qoraayaasha Laatiinku ay adegsadeen ereya *persona oo ah* (‘u taagane’, ama wax hawl socota qayb ka ah), iyo *substentia* (‘walax’), iyo mararka qaar gaar ahaan xilligii waqtiyadii dhex oo la adeegsan jiray ereyga *subsistentia* oo ah (‘jiritaan, ama jirid’). Kulli hadalladi si bayaan ah inooma tusayaan waxa aan doonayno in aan ku muujinno. Ereyga *persona* ee luuqadda laatiinka ayaa waxa uu noqday midka sida ugu badan la adeegsaday oo xataa Luuqadda Ingiriisiga aad loogu istcmaalay.

Ereygu waxa uu u baahan yahay in aan si taxaddar leh u isticmaalno. Waa in aynaan u fiirn wixii uu luuqadda Laatinka ku ahaa balse waxa macne ahaan loola jeedo la rabo in uu tarjumaad ka bxiyo. Saddexa shaqsiyadeed ee Ilaah ku sifoobay ma aha jilayaal riwaayadeed oo midba uu meel kaga jiro, oo aan hal hawl wada wadin. Ama marka aan shaqsi dhahayn in aan ka si la mid sida ereyga aan dadka caadiga ah kula hadalno. Waxa aan ku muujinaynaa waa ahaanshaha shaqsi ahaaneed si shaqsi kastaa uu shaqsi gaar ah u yahay oo jiritaankii shaqsi ahaneed uu shaqsi u yahay.  Saddexdan sife ee Ilaah waa isku mid oo waa HAL Ilaah in kastoo ay haddana kala duwan yihiin. Tani ma ah in aynu dhahayno in ay jiraa saddex Ilaah. Balse waxaa weeye in saddxdan shaqsi uu mid kastaaba leeyahay shaqsiyaddiisa gaar ahaaneed oo mid walbaabi isticmaalayo ereyga 'aniga' ama sidoo kale magac u yaalka 'adiga' ama 'isaga'. Uma jeedno in ahaanshahooda halka ay yihiin in ay ku kala duwan yihiin. ama saddex qaybood oo la isku darayo si ay mid u noqdaan. Waxaan middan ku qeexi karnaa in mid uu ku jiro kan kale (Yooxanaa 17:21). Ilaah waa 'ahaansho aan la arki karin'. Ahaanshihiisu waa mid. Balse ahaanshihiisa daa'imka ah ayaa waxa uu u jiraa inuu yahay Aabbaha, Wiilka iyo Ruuxa Qudduuska ah. Ilaah saddex ayuu sife ahaan yahay ama muuqashadiisa. Ma aha mid bayaamis u baahan sida ay saddexdan ahaansho mi u ahaadeen, waayo Ilaah ayaa intaba isku muujiyey. Waxa uu Ilaah naga doonayo ayaa ah in aan rumaysanno, in kasta oo ayan jidhin cid si toos ah u abbaari karta, {waayo ma gaadhi karno cilmiga qarsoon ee Ilaah inta uu nooga bayaanshay mooyaane}, waana inta uu Ereygiisa inoogu dhex sheegay. Isagu waa:

Saddex aan la kala qaybin karin,
Oo hal yaab badan isku ah.

Haddii aan Isaga qaaba kale uga fikirno ama ku eegno, waxa aan samaysanaynaa qiyaaso kale oo ka duwan waxa uu Qorniinku inoo sheegayo. Ilaah kale ayaannu maankayaga ka samaysanaynaa. Tani waa sanam caabudid.

Waxaan u baahan nahay in aan garanno in Saddexmidnimadu ay tahay cajaa'ib fahankeenna aadane ka weyn. Amaanta Ilaah ma aha mid fahan lagu qiyaasi karo. Ciddii taa ku fakartaa waxa ay isku sifaynaysaa I ay yeelatay Ilaaha Qaaddirka ah garashadiisii oo dhan. Intii aan hadda soo sheegnay meelna iskama shabbahaan oo isagama eka.  Ma heli karno taswiir aan runtan iyada ah ku bixinno. Waxa aan tusaale ka yara dhigan sida saddex qof oo aadane ay aadane ahaan isku mid u yihiin balse shaqsiyad ahaan ay u kala duwan yihiin oo aanay mid u ahayn. Balse xagga adanaha ugu dambaynta waxa uun aad helaysaa saddexdii shaqsi ee aad ogayd. **Saddexda shaqsiyadood ee Ilaah waa isku hal, balse shaqsi ahaan kala duwan.  … (haddan) weli waxa ay yihiin hal Ilaah. Ilaahani marna kama dhex baxsana saddexdiisan shaqsiyadood.** Cajaa'ibtu waxa ay tahay in aad weli hal Ilaah leedahay. Ilaahani kama baxsana oo dibadda kama joogo ahaanshihiisa saddex shaqsi ahaaneed. Isaga ahaanshihiisu waa saddexdan shaqsi eek u jira Saddexmidnimadiisa. Wax kasta oo tilmaan ah oo aad midkood siisin kan kalena waa uu yeelanayaa maaddama ahaanshahoodu hal Ilaah yahay. Sidaas daraaddeed iyaga midna kan kale kamana sarreeyo kamana hooseeyo, oo wixii aad mid iyaga ka mid ah ka sheegtid kan kalena waad ka sheegtay.

Haddana iyada oo ay sidaas tahay, waxaa jira wax aan Aabbaha ka odhan karno oo aynaan ka odhan karin ama ka sheegi karin Wiilka ma Ruuxa Qudduuska ah. Haddana waxaa wax aan ka odhan karno Wiilka oo qudha, iyo wax aan ka odhan karno Ruuxa Qudduuska oo qudha. Sida ku jirta *Kaatakiiska weyn ee Westminister,* waxaa jirta saddex hal Ilaah isku ah, Aabbaha, Wiilka iyo Ruuxa Qudduuska ah, oo ahaansho hal isku ah, oo awood iyo amaanba ka siman; haddana ku kala duwan shaqsiyadda ruux ama qof ahaaneed.' Su'aasha aan imminka ku nimid ayaa waxa ay tahay lahaanshahooda.

## 7.
## Jiilka Weligood Jiraya ee Wiilka

Cinwaanka cutubkan waxaad mooddaa in ku dhawaaqiddiisu ay adag tahay, sidaas daraaddeed, waa in aan si bayaan ah u eegnaa falanqayntan iyada ah. Waxa aan tibaaxaynaa waxa sida qaaska uu mid walba saddexdan ahansho u leeyahay. Waxaa jira waxyaabo qaas ah oo midba gaar u leeyahay oo aan labada kale la wadaagin.

'Maxay yihiin waxyaabaha ay saddexdani shaqsi ahaan u kala leeyihiin oo ay ku sifoobeen waloow ay hal Ilaah isku yihiin?' ayaa ku jirta kaatakiisa aan hadda ku soo xigannay cutubkeennii hadda dhammadkiisa. Waa mid aad u qoto dheer. Waxaa weeye 'waxaa in Wiilku ka ahaaday xagga Aabbaha, oo Wiilku ku ahaaday Aabbaha, oo uu Ruuxa Qudduuska ahuna ku yimid Aabbaha iyo Wiilka awgood taaso daa'imis ah'.

Tani waxa ay inoo sheegaysaa in haddii aan labo kala saarno aannu si waafi u haqab tiri karno su'aasha ah 'lahaanshahoosa shaqsi ahaaneed. Waa in aan garanaa in Aabbaha ahaysiiyay Wiilka, oo Wiilku ka dhashay xagga Aabbaha. Middan imminka ayaannu ku samaynaynaa cutubkan dhexdiisa. Dabadeed waxa aannu ka macaamili doonnaa tan Ruuxa Qudduuska ah, oo cutubka kan xiga ayaannu ku arki doonnaa

### Wiilka

Tallaabdan midda furaha u ah waa ereyga 'wiil', waana mid caawimaad inoo leh marka aan aqoonsanno in Kitaabka Qudduuska ah uu siyaabo kala geddisan uga hadlayo ereyga ama magaca wiil. Wax kasta oo ay qaadataba waa in aan iska ilaalinaa diidmada ah in nidhaano Ciise waa Wiilka Ilaah, iyada oo ay dadku u qaadan karaan oo ay moodayaan in Ilaah dhalay ilmo.

Ereyga macnihiisu waxaa weeye 'wiil', waa haddii sida uu yahay loo sheego, tan oo loo istiicmaalo in wiilku ku yimaado farac ama tafiir uu salka ku hayo. Faraca reer binu Israa'iil waxaa loo yaqaan 'carruurta reer binu Israa'iil' ama ama sida ku jirta Afka Cibriga ee Axdiga Hore 'wiilasha Israa'iil'. Hase yeeshee ereygu had iyo goor ma xambaarsana fikirka ah 'ilmo dhalid' kulligii. Dadka Siyoon u dhshay waxaa lagu magacaabaa 'wiilasha Siyoon'. Wiilasha ama xerta nebiyada waxaa loogu yeedhaa 'wiilasha nebiyada' (1Boqorrada 20:35). Waa sababta dadka xunxun ee aan awaamiirka qaadan loogu magacaa 'ilmo balaayo' (Sharciga Ku Noqoshadiisa 13:13), halka kan dhimashada istaahila loogu yeedho 'wiilka dhimashada' (1 Samuu'eel 20:31). Tusaalayaashani waa kuwo ku jira Axdiga Hore, kuwa iyaga la mid ahna w axaa laga helayaa Axdiga Cusub.

Haddaba ma aha wax aan la yaabno marka aan aragno qoraalka ah 'wiilasha Ilaah', oo dabadeed aan hadalkeennii ku soo gunaanadno in Ilaah carruurta ama tafiir leeyahay. Xukuumadaha dhulka waxaa logu yeedhay 'laaha uga sarreeya wiilashiisii.' (Sabuurrada 82:6), waayo xooggaa iyo maammulkaa waxaa siiyay Ilaah, oo Isaga amarkiisa ayey ku sameeyaan, kuwiisii aan ku socon waa carruurta sharka. Macnaha 'wiilasha Ilaah' waxaa loo adeegsaday in lagu qeexo malaa'igaha (Ayuub 1:6), si la mid ah sida loogu qeeyo in raga iyo dumarka masiixiyiinta ah ee Ilaah ka cabsada ay u yihiin maaddo qaas u ah Ilaah jacaylkiisa, oo ay sidaas uga mid yihiin qoyska Ilaah (Matayos 5:9, 45; Galatiya 3:26). Balse marka magaca wiilal loo adeegsanayo bini aadanka ama malaa'igaha, si jamac ahaaneed ayaa loogu

magacaabaa.  Marka keliya ee uu keli yahay waa marka loogu Sayid Ciise Masiix oo ah shaqsiga labaad ee Saddexmidnimada, oo markan oo qudha ayuusa jamac ahayn.

Tan waxa ay inooga muuqanaysaa (Luukos 3:38), tan oo loo adeegsaday aadan, waayo aadane kuma iman tafiir ama farac, basle Ilaah awooddisa ayuu ku ahaaday, mana jidhin aadane dhalay isaga, oo isaga ayaa laga soo tafiirmay.

**Wiilka Ilaah**

Marka aan qeexaynno magaca 'Wiilka Ilaah' ee lagu magacaabay Rabbi Ciise Masiix sidak u jirta (Yooxanaa 19:7), waa in aan ogsoonaanaa in ereyga 'wiil' aan laga wadinsi la mid ah sidii aan ilaa iyo imminka soo sharraxnay. Ma ahan inuu Aabbihiis u yahay Wiil, sidii Isaga oo bilow leh. Ama weedhii uu magacu ku jiray ee sheegaysay ama tilmaamaysay xukuummadaha dhulka. Ama uu yahay aalad na xusuusinaysa in uu aadane noqday oo uusan farac ku iman—in kasta oo ay haddana xusuustu meesha taal (eeg Luukos 1:35). Ama in aan ka wadno hadal cajiib ah oo ah in uu wax walba Ilaah uga dhawo yahay. Adeegsigiisu wax walba waa uu ka duwan yahay. Shaqsiga ugu horreeya ee Saddexmidnimada waa 'Aabbaha' si uu inoogu muujiyo waxa uu yahay xidhiidhkiisa daa'imka ah ee uu la leeyahay Wiilka. Shaqsiga labaad ee Saddexmidnimada waxaa lagu magacaabaa 'Wiilka' si uu noo tusiyo xidhiidhka uu la la leeyahay shaqsiga koobaad ee Saddexmidnimada. 'Aabbaha' iyo 'Wiilku' waa magacyo maalin walba taagan. Waxa ay maskaxdeena daciifka ah tusinayaan xidhiidhka weyn ee ka dhexeeya labadooda iyo sida ay isku yihiin.

Hadalku waxa uu noo caddaynayaa in Wiilku waxa uu yahay uu ku yahay Aabbaha daraaddiis. Balse nama tusaalaynayso in Aabbuhu waxa uu yahay uu ku yahay Wiilka daraaddiis. Aragtidan waxa aan ka arkaynaa weedha ah 'kan keliya eek u ahaaday' taasoo uu Qorniinku aalaaba adeegaso oo yidhaahdo, 'Wiilka keliya ee Aabbaha' (Yooxanaa 1:14); 'Wiilka keliya oo laabta Aabbaha ku jira' (Yooxanaa 1:18; 3:16); iyo 'Wiilka Ilaah oo keliya oo dhashay' (Yooxanaa 3:18). Wiilku jiilkiisa ayuu carruurta Ilaah ku yahay, haddana tilmaantu ma aha in la mid yahay carruurta rumaysadka ku noqotay carruurta Ilaah.  Tan noo sheegaysa middan ayaa in uu yahay wiilka keliya ee curadka ah ee wax walba ka horreeyay (Kolosay 1:15; Cibraaniyada 1:6). Xidhiidhka ka dhexeeya Aabbaha iyo Wiilku waa mid aanay cidina la wadaagin. Waxa uu Qorniinku noogu sheegayo farac iyo dhalasho ah xagga Ciise Masiix waa sidii ay maskaxdeenna gaaban u qaadan lahayd oo u fahmi lahayd xidhiidhkooda. Sidoo kale waxaa naloo sheegay in Wiilku uu yahay caddaynta aragga Ilaaha Aabbaha ah, iyo iftiinkaama nuurka amaantiisa (Cibraaniyada 1:3). Isaga wax walba oo uu yahay waxa uu ku yahay Aabbaha, balse Aabbuhu wax walba oo uu yahay kuma aha Ilaah Wiilka ah. Tani ma aha in Ilaahuhu wax walba oo uu yahay kuma aha Ilaah Wiilka ah.

Tani ma aha in Ilaah abuuray Wiilka. Athanasian Creed ayaa si sax ah inoogu qeexaya middan in 'Wiilku uu ka yimid xagga Aabbaha oo qudha, lamina samayn, lamina abuurin, balse waa uu dhashay.' Rabbhi Ciise Masiix abuur ma aha. Cutubkii afraad ayaannu ku soo aragnay in Ciise yahay Ilaah, si la mid ah sida Aabbuhu Ilaah u yahay. Labaduba waa Ilaah; labaduba si usku mid ah ayey Ilaah u yihiin. oo ahaansho ahaan labaduba waa hal Ilaah. Ma dhahayno in Ilaaha Aabbaha ahu uu doortay in uu wax sameeyo ama ay waxani yihiin wax aan horay u ahaan in ay yimaadeen oo ay ahaadeen. Waxa aan ka hadlaynaa in waxani ahaadeen, oo hadda ahaantooda yihiin nolosha dambe ee weligeed ahna ay

ahaantoodaas ahaan doonaan.haddii aysan sidan ahayn waxa ay noqonaysa wax aan macquul ahayn oo sifaha Ilaah ka baxsan. Haddii aynaan sidan u qaadan waxa aan ka baxaynaa xadkeenne oo waxaa buraya wax bariddii Kitaabka Qudduuska ah ee Ciise oo leh 'kaasoo bixitinkiisu ahaa waa hore, iyo tan iyo weligiis.' (Miikaah 5:2; eeg Matayos 2:6 iyo Yooxanaa 7:42).

**Ilaaha Aabbaha ahu ma samayn Ilaaha Wiilka ah inuu Ilaah noqdo. Isagu sidaa ayuu Ilaah ku yahay. Oo Aabbaha la'aantiis ma lahaanayo shaqsiyadiisa ah Ilaah oo uu ku yahay Ilaaha ah Wiilka**. Wiilku waxa uu yahay waxa uu ku yahay Aabbaha awgiis. Iyagu wax walba waa isaga mid fikir ahaan iyo hadal ahaan. Wiilki waa caddaynta Aabbaha. Waa sababtan awgeed tan loogu tilmaamay in uu yahay 'ereyga', Ilaah la jira, oo uu yahay Ilaah, ka jiray bilowgii (Yooxanaa 1:1-2). Tan ayaa ah waxa uu yahay Wiilku. Sidan muusan ahaan lahayn Ilaaha Aabbaha ah la'aantii. Aabbuhu muusan heli lahayn caddayn, Ilaaha ah Wiilka la'aantiis. Waa kan xidhiidhka ka dhexeeya labada shaqsi ee eugu horreeya Saddexmidnimada.

Si middan aannu erey bixin ugu sii helno aannu soo qaadanno caalimka magaciisa la yiraahdo Luouis Perkhof: waxa uu yidh, 'sharraxaadd soo socotaa waxa na siinaysaa facii ama jiilkii wiilka: waa falimo daa'im ah oo aan laga maarmin shaqsiga ugu horreeya ee Saddexmidnimadu, kaasoo isaga oo ahaantiisa ku dhex jidha aan iska soo shaqsiga labaad, oo ahaantoodu ayan kala qaybsanayn oo aan isbeddel iyo kala tag lahayn, ahna aasaas ' (*Systematic Theology,* p. 94).

**Baybalku Waa uu Hadlaa**

Qorniinba Qorniinka ayuu uga sii hadlaa runtan cajaa'ibka leh ee aan soo falanqaynay. Sayid Ciise Masiix sida uu yahay ayuu Ilaah ku yahay; waxaa in laga fakaro oo laga taxaddaro u baahan sida qaabka lagu tilmaamay uu yahay. Isagu ma ahan Ereyga Ilaah oo qura (Yooxanaa 1:1), ama uu uu dabiicigiisa inoo soo bandhigayo (Cibraaniyada 1:3), Balse Isagu waa buuxnaanta Ilaah (Filiboy 2:6), 'Isagu waa suuraddii Ilaaha aan la arki karin' (Kolosay 1:15; 2 Korintos 4:4). Tani waa mid si is daba joog ah timaan culus inoo siinaysa. Wiilka muusan ahaadeen waxa uu yahay, Ilaaha Aabbaha ah la'aantiis. Waxa uu yahay waxa uu ku yahay Ilaaha Aabbaha ah aawadiis.

Muhiimadda loo baahan yahay in la ogaado ayaa waxa ay tahay in xidhiidhka ka dhexeeya Wiilka iyo Aabbaha in uusan lahayn wax bilow ah. Sida ayuu weligiis ahaa. Waa in aynaa ku fikirin in Ciise loogu yeedhay 'Wiilka' markii uu dhashay kaddib si la mid ah sida aadanaha adduunkan. Yooxanaa 1:14-18 ayaa si toosa inoogu caddaynaya in jidhka uu soo qaatay awgii ay aadanaha u sahashay in ay arkaan xan xagga Aabbaha ka yihid, uuna ahaa mid abid jiray. Waxa uu ahaa Wiilka qaaliga ah ee Ilaah markii uu koomka uumay (Kolosay 1:14-20). Isagu ma uusan ahayn abuuris kol dambe iska timid. Isku si ayey labadan kitaabba uga hadlayaan. Rooma 1:13 iyo Galatiya 4:4 in uu ahaa wiilka Ilaah xitaa intii aan la dhalin ka hor. Waxa uu Wiilka ahaa ka hor intii uusan ekaanta jidhka dembiga (Rooma 8:3). Waxa uu ahaa Wiilka Ilaah ka hor intii aan Ilaah dunida u soo dirin (Yooxanaa 3:16; 1 Yooxanaa 4:9).

Cibraaniyada 1:5-8 waa qayb aad iyo aad muhiim u ah. Isaga oo ah Wiilka ayaa Rabbi Ciise Masiix lagu sheegay in uu yahay Ilaah, oo uu yeelan doono boqortooyada ama carshiga

weligiis ah.  Waa isaga oo ah ‘kii la dhalay’ yimid adduunka. Wiilnimadiisu waa daa’im ama mid weligeed ah. Waana mid ka fog in aan ku fahanno aqoonteenna gaaban; ‘oo ninna Wiilka garan maayo Aabbaha maahee, oo ninna Aabbaha garan maayo Wiilka maahee iyo kii Wiilku doonayo inuu u muujiyo’ (Yooxanaa 11:27).

Yooxanaa 5:16-47 Ciise waxa uu uga hadlayaa baaxadda uu leeyahay xidhiidhka uu la leeyahay Ilaaha Aabbaha ah. Waxaa aad muhiim u ah in aayadahan soo socda aan u dhabba galo daqiiqadaha ugu horreeya. Luuqadda Giriigga ee asal ahaan lagu qoray Axdiga Cusub waxaa aayadda 18aad dhexdeeda ku suga Ciise oo Ilaah ku magacaabay in uu yahay ‘Aabbihiis’, haddoo aan si kale u nidhaanana, Ilaah waxa uu Aabbe ugu ahaa qaab iisan weligii cid kale ugu noqon. Tan waxaa si toos ah u arkay Yuhuuddii Isaga dhegaysanaysay, oo waa ay ka caroodeen sidii uu Ilaah iskula masiyey ama isula simay (aayadaha. 17-18). Ciise ogaalkiisa ah inuu ka mid yahay carruurka daa’im noqonaysa ama weligood jiray kama naaqusinayso ogaalkiisa ah la mid ahaanshaha labada ahaansho ee kale. Weli waxa uu sii waday inuu tusiyo in inkastoo uu sameeyay isla shuqulladii Aabbuhu  sameeyay, haddana awood uma uusan yeelan uu Aabbaha la’aantiis xorriyad wax ugu sameeyo (aayadaha. 19-24). wax xukumis shaqsi ahaaneed ayuu leeyahay maxaa yeelay Aabbaha qudhiisa ayaa Isaga xukunkii aadanaha dusha ka saarway (aayadda. 22). Laakiin tan macnaheedu ma aha in uu Aabbaha ka hooseeyo. Sina tani uma dhacayso! Xaqiiqdii waxa uu leeyahay xurmo la mid ah tan Aabbaha la siiyo oo kale (aayadda. 23)! Haddaan Wiilka loo qaddarin sidaas oo kale, waxa ay la mid iyada oo sidoo kale Ilaaha Aabbaha ah la rurmayn waayey. Sidaas daraaddeed, waa uu ogaa Wiil-ahaanshihiisa, oo uu Aabbuhu soo diray Isaga. Illoowse, maankayagu ma ma xambaadhi karo in uu ogaa la mid ahaanshaha iyo midowga uu Aabbaha la lahaa!

Sida uu qoraalku ku sii socdo, waxa aan ka arkaynaa Ciise oo qudhiisu sheegaya in uu ahaansho u leeyahay si la mid ah sida Aabbuhu ahaansho u leeyahay. Balse middani ma ah sida middeenna oo kale. Waxa uu leeyahay shaqsiyad ahaansho oo uu kula siman yahay Aabbaha (aayadda. 26)! Martabad uu kuwa dhintay ku sare kiciyo ayuu Wiilka Ilaah leeyahay (aayadda. 25); haddana Isagu waxba arrimintiisa kuma sameeyo. Awoodda uu adeegsanayey oo dhan waxa ay ahayd tanAabbihiisa Isaga adduunka u soo diray, oo doonistiisaas ayuu rabay inuu raaco (aayadaha. 30, 36). Waxa uu u yimid in uu fuliyo awoodda rabbaaniga ah (aayadda. 40); oo uu Qorniinka maaddo u ahaado ama tusniin u noqdo (aayadaha. 39, 46), oo iyada oo ay sidaas tahay kuma uusan iman magaciisa, balse kan Aabbihiis (aayadda. 43). Qaybtani waxa ay muujinaysaa in Ciise Ilaah yahay, ku jiro, oo uu xaggiisa ka yimid. **Isagu sidaas ayuu Ilaah ku yahay. Waxaa sidoo kale caddaan ah in Wiilku keli ahaantiis waxba u ahaan lahayn, hadduusan xagga Ilaaha Aabbaha ah ka helin.**

Qaybtan mid la mid ah waxa aan ka helaynaa Yooxanaa 10:22-42. Mar iyo ka badan ayaa Ciise ka hadlayaa in uu magaca Aabbiis ku yimd, oo badbaadada oo wax badbaadinta uu u yimid ay tiisa tahay oo uu Aabbuhu siiyay Isaga (aayadaha. 25, 29). Sababta uu dunida u yimid ayaa ah in aabbaha soo diray awgiis (aayadda. 36). Tani waa qaabka is gacansiinta loo yaqaan si uu shaqada Aabbaha iyada oo la arko u fuliyo. Waa wax muuqada in masiixu uusan marna ka tsanaasulin Ahaanshihiisa Ilaahnimo isla qaybtan dhexdeeda, waana tan ay Yuhuuda marar badan isugu dayeen in ay dilaan (aayadda. 31). Waxa ay ku eedeeyeen in uu ku andacoonayo in uu yahay Ilaah (aayadda. 33), tanna xaggooda kuma aysan qaldanayn.

Tani waxa ay ahayd wixii uu Ciise afkiisa ka qiray! Waxa uu qiray in uu samaynayo wax walba oo ah wax Ilaah oo qurhi samayn karo—taasoo ah, bixinta nolosha weligee ah (aayadda. 28). Waxa uu qiray sheegay in kuwa uu badbaadiyey ay sidas weligood u haysan doonaan, si la mid sida Ilaah uu dadkiisa u badnaadiyey (aayadha. 28, 29). Waxa uu qiray in uu yahay Wiilka Ilaah, haddana uusan dhaanna uga hoosayn Aabbaha (aayadaha. 36, 30). Tan ulama uusan jeedin in Aabbaha ula jiray si la mid sida aadanaha adduunka jooga oo kale oo ay sidas wiil iyo aabbe isugu yihiin. Dhan kasta oo loo qaado, sidaas ayuu Wiilka gaarka ah ee Ilaah ku yahay. Oo Isagu shaqsi ahaan waa ka soocan yahay Aabbaha;  oo sidaas ayuu wiilka Ilaah ku yahay—waa sida aan ereyga 'shaqsi ama qof' buuggan ugu dhex isticmaalayno e. Shaqsiyaddan dhexedeeda, ma uusan dhihi lahayn 'Aabbaha ayaa igu jira, anna Isaga ayaau ku jiraa' (aayadda. 38). Haddana sidaas oo ay tahay Wiilku waa uu ka duwan yahay Aabbaha, oo Isaga shaqooyinkiisa ayuu fuliyaa, maaddaama uu Isagu dunida usoo diray. Sidaas ayuu Wiilku ku yahay kii Aabbaha la jiray, oo waa Ilaah, sida Isaguba u yahay. Taa oo keliyana ma aha—ee midba kan kale ayuu ku jiraa. Tani cajaa'ibta jiilka ama faca weligiis ah ee Wiilka. Waa mucjisada 'wiilka Ilaah, oo xagga aabbaha ka ahaaday, intii aan dunida la abuurin ka hor, Ilaah la jira Ilaah, Iftiin la jira Iftiin, Ilaah weyn oo Ilaa hweyn la jira,  la ahaysiiyay balse aan la abuurin, oo mid la ah Aabbaha' (*The Nicene Creed*).

**Arrimaha Xalka u Baahan.**

Markan waxaan filayaa in wax bariddan ay masalooyin badan maskaxdeenna gelisay, waxaana u baahan nahay in annaga oo daacan ka aan sheegno qaarka aynaan jawaabaha u heli kar in. aan sii wadno dhuuxidda dulucda ku jirta Qorniinka iyo ay waxyaabahi u ahaanayaan ama u dhacayaan. Side ayaa Wiilku uga yeelan karaa wax walba oo uu leeyahay xagga aabbaha, oo haddana Ilaah ugu jiri kara oo kiisa u noqon kara?  Sidee ayaa Wiilku wax walba xagga Aabbaha uga heli karaa haddana uu uga duwanaan kara? Maskaxda aadanuhu marnaba arrimaha ma soo saari karto. Culaabahani waa tan kuwa aan rumaysadka lahayn ee gaalada ah ku keenta in ay kajan ama ilaaq ka dhigtaan. Waxa ay runtan ka dhigaan mid waaqiciga ka fog, oo ay sidaas daraaddeed tahay wax lagu qoslo. Iyaga waxa ay la tahay wax aan la rumaysan karin, oo saas ayey ku diidaan. Rumaystayaashu waxa ay rumaysan yihiin in miidani aysan ahayn wax sabab loo raadiyo, oo sabab oo dhan ay ka fog tahay aanan sabab loo nisbayn karin.

Halkan waxaa ah mushkilooyin aan u baahan nahay in aan wax ka nidhaahno, oo ah in ay dhowr aayadood soo qaataan iyaga oo daliil ka dhiganaya. Tusaale ahaan, Cibraaniyada 1:5 waxa ay na baraysaa in ereyada oo ka yimid Sabuurrada 2:7 oo u taagan Sayidkeenna Ciise Masiix: 'Amarkii ayaan wax ka sheegi doonaa, Rabbigu wuxuu igu yidhi, "Adigu waxaad tahay wiilkayga, Maantaan ku dhalay."' Tani waxa auy u muuqataa soo jeedin  ah in Sayid Ciise Masiix xusuusinayo markii uu noqday Wiilka Ilaah. Oo haddii ay sidaas tahay Arrintu waxa ay noqonaysaa in aynaan rumaysan ahaashadiisa daa'imka ah. Balse haddii Masiixu tan ka wado wax horay u jiray oo aan bilow iyo dhammaad lahayn welina socda, arrintu waxa ay tahay, muxuu sidan u yidh? Waa middan waxa Qorniinka intiisa kale uu na barayo, waxaana u baahan nahay in aan aad uga taxaddarno aayaddan tarjujaaddeeda ama

tafsiirkeeda annaga oo eegayna dulucda iyo waxa uu Qorniinku ka hadlayo, si uusan qofku Ereyga Ilaah shaqsi ahaan ugu tarjuman.

Sidaas oo kale Rooma 1:4 iyo Falimaha Rasuullada 13:32-33 waxa ay noo sheegayaan in Ciise Masiix sare kicidiisii lagu aqbalay inuu yahay Wiilka Ilaah. Middan mid la mid ah waxa ay ku xusan tahay Rooma Rooma 1:4, iyo Rooma 8:3 oo inoo sheegayo in Wiilku jiray intuu uusan jidka soo qaadan ka hor. Sidoo kale waxa aan u baahan nahay in aan xusuusnaanno Rooma 1:3. Halkan waxaa Bawlos ku caddaynayaa in Ciise yahay Wiilka, intii uusan sheegin dhalashadiisa ka hor. Aayadda 4aad waxa uu ku sheegayaa in sare kiciddu cadddayn u tahay aqoonsigii daa'imiska ama in lagu ogaado in uu weligiis jiray.

Falimaha Rasuullada 13:33, rasuulku waxa uu deegsanayaa weedha ah 'hor loo qaaday' oo uu la xidhiidhinayo in Isaga sare loo qaaday xilligii dhalashadiisii. Marka se loo adeegsanayo sare kicicdda, waxaa la socoda ereyga 'dhimashada', tanna waxa aad ka dhex arki kartaa ayaadda 14aad. Bawlos waxa uu halka dadka ku wacdiyayaa in shaqsigan dhashay uu yahay kii la sheegay in uu xagga Ilaah ka ahaaday. Rasuulku kama uusan cabsan inuu taabto ama wax ka yiraahdo caqiidada ah faca Wiilka eel eh nolosha weligeed ah markii uu Injiilka dadka ku wacdiyaya!

## 8.
## Hab Wax-qabadka Daa'imiska ah ee RuuxaQudduuska ah

Waxaan soo aragnay in Wiilka Ilaah uu waxa uu yahay ama uu ku sifoobay uu Aabbaha daraaddiis ku ahaaday. Sidoo kalena Ruuxa Qudduuska ah waxa uu sida uu yahay ku yahay, Aabbaha iyo Wiilka daraaddood. Arrintan guud ahaanteed waxaa lagu qeexay, *Westminister Cinfenssion*, oo leh 'shaqsiyadaha Ilaah ku sifoobay waa saddex hal ahaansho isku ah oo ah awood iyo daa'imnimo; Ilaaha Aabbaha, Ilaaha Wiilka ah, iyo Ilaaha Ruuxa Qudduuska ah. Aabbaha labadoodba ma aha, lama dhalin lamina soo dirin; Wiilkana waa daa'im xagaa Ilaah ka ahaaday.  Oo Ruuxa Qudduuska ah waxaa laga soo diray xagga Aabbaha iyo Wiilka.' Haddaba waxaa arkaynaa in Rabbi Ciise Masiix uu ka ahaaday xagga Aabbaha, waana waxa aan uga hadlayno midda ah faca daa'imiska ah ee Wiilka, marka aan ka hadlayno halka uu ka ahaaday, dhanka Ruuxa Qudduuska ahna waxaa 'soo diray' Wiilka (Yooxanaa 15:26), oo ereyda lagu tilmaamay ee laga u ah waxaa weeye 'hab wax-qabadka daa'imiska ah ee RuuxaQudduuska ah'. Hannaanka wax qabadka ee ruuxa Qudduuska ah waxaa la sidoo kale lagu magacaabaa 'kaabe', waana tan uu shaqsi ahaanta u leeyahay. waa mid uu Isaga oo qudhihi ku sifoobay oo aysan Aabbaha iyo Wiilku midkoodna lahayn.

Markan waxa aan rabno in aan ka hadalno ayaa ah, 'falimaha daa'imka ah ee aan laga maarmin ee Saddexmidnimada shaqsigeeda koobaad iyo kan labaad, ee laga hadlayo ahaanshaha Ilaahnimada iyo sida uu Ruuxa Qudduuska ahu u yeeshay booska saddexaad, iyaga oo dhan walbana hal ku ah, oo aan is beddel iyo kala qaybsanaan midna lahayn'(Louis Berkhf, *Systematic Theology,*P. 97).

Waxaa jira wax badan oo aan middan ka qaadan karo!  Waxa ayna la sidan yihiin wixii aannu imminka ka soo hadlaynay ee cutubkeennii ugu dambeeyay. Aad ayey isugu dhow yihiin balse isku mid aha, o si ahaan waa ay u kala duwan yihiin. faca aan ka soo hadalnay waa mid Aabbaha oo qudha uu ku hawl leeyahay halka 'soo diriddu' ay ka tahay hawsha Aabbaha iyo Wiilka. Markii uu Wiilku samada aaday waxaa qushuhu ahaa inuu ka qayb qaato hawsha soo dirista Ruuxa Qudduuska ah. Waxani ma ahan hawl is dabo socotay balse balse mid walaaba waqtigeeda ayey dhacaysay, maaddaama aan Ilaah loo xadayn karin saacad iyo waqti toona. **Midina kan kale kama hooseeyo, iyadoo Wiilku xagga Aabbaha ka ahaaday, ayuusan haddana Isaga ka hoosayan, Ruuxa Qudduuska ahna sidoo kale, Isaga oo laga soo diray xagga Wiilka iyo Aabbaha, ayyusan haddana iyaga waxna uga duwanayn.** Waxa uu yahay waxa uu ku yahay iyaga daraaddood. Isagu ma ahan Ilaah darajpo hoosaysa leh loomana nisbayn karo.

Tani waa caqiidada hab wax-qabadka daa'imiska ah ee Ruuxa Qudduuska ah. Balse side ayey Kaniisadii ugu horraysay ay ku gaadhay go'aanka ugu dambeeyay? Tani ma go'aan ay culimo uun iska gaadhay baa? Hubaal, maya!  Waa run uu noo muujinayo Qorniinka Qudduuska ah.

### Ruuxa Qudduska ah

Cutubkii 5aad waxa aan ku soo aragnay in Ruuxa Qudduuska ahu yahay shaqsi isaga qudhiisu Ilaah ah, oo aan Aabbaha iyo Wiilka midna ahayn. In kastoo aysan munaasib ahayn inaan dib ugu laabanno wixii aan soo sheegnay oo dhan haddana waxaa lagama maarmaan ah

in aah xusuunaanno ilaah aan ka gaadhno dhammaadka buuggan. Innaga oo soo aragnay in Ilaah Ruux yahay (Yooxanaa 4:24), oo wax walba oo Ilaah lagu tilmaamo ay saddexdaba tilmaan u noqonayaan, maxay tahay sababta shaqsiga saddeexaad ee Saddexmidnimada oo keliya loogu magacaabay 'Ruuxa'? Waxaa meesha ku jirta sabab ka dabaysa oo Isaga oo keliya 'Ruuxa' loogu magacaabay, oo aan loogu magacaabin Aabbaha ama Wiilka. Aabbuhu waa Ilaah, Ilaahna waa Ruuxa. Wiilku waa Ilaah, Ilaahna waa Ruuxa. Balse waa shaqsiyadda saddexaad ee Ilaah tan wadata magaca 'Ruuxa Qudduska ah'.

Ereyga Af Ingiriisiga ah ee *Spirit* ama 'Ruux' waxa uu asal ahaan ka yimid *spiritus* Luuqadda Laatiinka oo macnihiisu yahay 'neef', 'dabayl', 'hawo', 'nolol' ama 'naf'. Ereyga fal sameeyihiisa ahu waa *spiro* oo macnihiisu yahay 'neefsi'. Ereygan tarjumaaddiisa afka Cibraaniyiinta iyo Giriiggu waxa ay tilaamayaan in macnuhu uu isku mid yahay. Ahaanshaha saddexdaad ee Ilaah waxaa lagu magacaabaa 'Ruuxa' maxaa yeelay Isagu waa midkii xagga Aabbaha iyo Wiika ka yimid. Magaciisa aan lala wadaagin ayaa waxa uu muujinayaa xidhiidhka uu la leeyahay labada ahaansho ee kale ee ku jirta caqiidada Saddexmidnimada. Waxa uu caddaynaa. Waxa uu toos u caddaynayaa shuqulkiisa u gaarka ah ee uu ku sifoobay. Labada sife ee Ilaah ee ugu horreeya si ayey xidhiidh u leeyihiin. Haddana sidoo kale ayaa labadooda iyo Ruuxu haddana xidhiidh kale uga dheexeeyaa, tanina waxa ay ku tusinaysaa in saddexdan sife ee Ilaah ay hal qudha isku yihiin. Isga waxaa lagu magacaabaa 'Ruuxa Qudduuska ah' waayo waa kii caalamka oo dhan u muujiyey quruxda, weynaanta, iyo qorinta warka wanaagsan ee Ilaah—tanoo aynaan hadda buuggeennan aynan ku soo qaadan balse ah maaddo kale oo u abaahan in sideeda looga hadlo.

**Ruuxa Aabbaha iyo Wiilka**

Sida ku jirta Yooxanaa 15:26 waxa ay inoo sheegayaan in Ciise Masiix sheegay in Ruuxa Qudduuska ahuu uu ka minayo xagga Aabbaha—tasoo xaqiiqo horay ugu siisheegay Yooxanaa14:16-17. Sidoo kale waxa uu sii waday in uu sii sharraxo in 'Ruuxa Qudduuska ahu uu yahay kan runta ah ee ka imanayey xagga Aabbaha'. Tani waa xaqiiqada tixraac ee muujinaysa xidhiidhka tooska ah ee sifaha Ilaah ee saddexaad ee Ruuxa iyo Aabbahaha. Annaga oo tixraacayna magaca Yahweh ayaa Qoraha Sabuurku waxa uu leeyahay, 'Waxaad soo dirtaa ruuxaaga' (Sabuurrada 104:30). Waa sidaas maxaa yeelay waxa uu xidhiidh la leeyahay Ilaaha Aabbaha ah, waana san loogu magacaabay inuu yahay 'Ruuxa Ilaah' (1 Korintos 2:11), iyo 'Ruuxa Ilaaha nool' (2 Korintos 3:3), iyo 'Ruuxa Rabbiga' (2 Korintos 3:17), iyo 'Ruuxa ammaanta ee ah Ruuxa Ilaah' (1 Butros 4:14)

Haddii aan eegno Yooxanaa 15:26 waxaa Ciise noogu ballan qaadayaa oona leeyahay 'Gargaaraha oo aan xagga Aabbaha ka soo diri doono'. Sida uu Qorniinku uga hadlo xidhiidhka ay leeyihiin Aabbaha iyo Ruuxa Qudduuska ah, ayuu sidoo kale sidaas si la mid ah uga hadlaa xidhiidhka ka dhexeeya Ruuxa Qudduuska ah iyo Wiilka. Sida ku jirta Falimaha Rasuullada 16:6-7 , waxa ay tarjumaaduhu u caddaynayaa ils didii luuqadda Giriigga ku qornayd, taasoo ah RuuxaQudduuska ahu in uu yahay Ruuxa Ciise Masiixi sidii aan aayaddii hadda ku soo dhex aragnay. Meel kalena sidaas ayaa Qorniinku ugu sheegayaa 'Ruuxa Ciise Masiix' (Filiboy 1:19, iyo 'Ruuxa Masiixa' (1Butros 1:11).

Sidaas ayey aayaddani inoogu xaqiijinayssa in Ruuxa qudduuska ahu uu ka yimid xagga Aabbaha iyo Wiilka, oo uu markan labadoodaba u taagan yahay. Marka aan ka

hadlayno ‘Ruuxa’ looga dhex hadlay Rooma 8:9, Bawlos waxa uu ku muujinayaa weedha ah ‘Ruuxa Ilaah’ oo ah weedha la siman ‘Ruuxa Masiixa’. Galatiya 4:6 wuxuu aad u xoojinayaa in ‘Ilaah soo diray Ruuxa…’, oo Ruuxaas uu ka hadlayo waa ‘Ruuxa Wiilkiisa’.

Laakiin ma jiro meel kale oo aan daliil uga doonayno, waxaase noogu filan wixii uu Ciise Masiix xertiisa kula ballamay intii aan Iskutallaabta lagu qodbin. Waa wax run ah in Ruuxa Qudduuska ahu uu xagga Aabbaha ka imanayey, waana xaqiiq in Wiilku ka dalbaday (Yooxanaa 14:16). Markii uu Aabbuhu soo dirayey waxa uu ku soo diray Wiilka magaciisa (Yooxanaa 14:26). Haddana waxaa run aan laha leexan akdhin ah in Wiilku soo diray Ruuxa Qudduuska ah (Yooxanaa 16:7), inkasta oo uu xagga Aabbaha ka soo diray (Yooxanaa 15:26). Marka laga reebo aayadda inteeda dambe ee ah ‘xagga Aabbaha ka soo baxa’ Qorniinku waxa uu intiisa kale noo sheegayaa in Ruuxa Qudduuska iyo Ruuxa Masiixa, iyo Ruuxa Aabbhuhu ay isku mid yihiin, kaasoo haddana xagga Aabbaha laga soo diray. Ruuxu isga qudhiisu isma soo dirin. Isagu waa Ruuxii la ballan qaaday in la soo dirayo, oo sidaas daraaddeed wax kasta oo uu qabo waxa ay muujin u yihiin Shaqada Aabbaha iyo Wiilka, si uu xooggooda u fuliyo ama wax ugu qabto (Yooxanaa 16:14-15; 15:26; 14:9).

**Doodihii Hore**

Mid ka mid ah shrarkii ugu caansanaa ee bilowgii taariikhdii kaniisadda ayaa waxa uu ahaa Shirkii loo yiqiin Niciaea ee 3325 Ciise kaddib. Shirkan waxaa looga hadnayey Ilaahnimada Ciise Masiix, oo markaas waxaa dadka qaar ku adkaatay sidii ay u sifayn lahaayeen Ruuxa Qudduuska ah. Oo waxa ay caddyntii culimadu noqotay in la ogaado boosta uu Saddexmidnimada kaga jiro oo la rumaysto ahaashihiisa ‘Ruuxa Qudduska ah’. Haddna wax yar dabadeed waxaa kacday xiisad wax barid oo been ah oo uu keenay nin la odhan jiray macedonius, oo dafiray in awoodda ahaanshaha Ilaahnimo ee Ruuxa Qudduuska ah. Si tan looga hor tago oo bidcannimadan loo hor joogsado waxaa la qabtay Shirlkii Contantnople ee 381 Ciise kaddib kaasoo lagu fidiyey qoraalkii *Necence Creed*, o ah ‘Waxaan rumaysanahay Ruuxa Qudduska ah, Rabbiga iyo bixiyaha nolosha, oo ah kan ka yimid xagga Aabbaha…’

Rriintu si kastaba ha ahaatee, dad badan ayaa diiday. Kaniisaddii afka Laatiinka ku hadli jirtay ee (loo yiqiin Kaniisadda Galbeedka) waxa ay ku dhaceen bohol ah in Ruuxa Qudduuska ahu uusan la mid ahayn Ruuxa Aabbaha iyo Ruuxa Wiilka, sida ku jirta Qorniinka ee uu na farayo. Halkan waxaa aad saamayn u yeelatay wax bariddii caalimkii weyna ee la odhan jiray Augustine kii reer Hippo, oo asaga iyo culimadii kale ee la joogtay waxa ay in Ruuxa Qudduuska si run ah ula mid yahay Aabbaha iyo Wiilka. Haddana Shirkii Toledo ee 569, waxaa lagu xoojiyey sida kitaabka ku jirta in dadka loo caddeeyo ee ereyga Laatiinka ah ee *felique* oo ku jirta Creed-ka Constantnople. Haddii aan halkan ku soo xigannana waxa ay jumladdu odhanaynaa, ‘waxa aan rwaxa aan rmaysanahay Ruuxa Qudduuska ah, Rabbiga ah bixiya nolosha, oo ka yimid xagga Aabbaha iyo *Wiilka*.’

Kaniisaddii luuqadda Giriigga ku hadli jirtay ee (loo yiqiin Kaniisadd Bariga), si rabshad wadata ayey uga soo hor jeesteen ereyga lagu koedhiyey. Markii koowaad waxa ay aqbaleen in ay tanaasul samaynayaan, balse la yidhaahdo ‘ka yimid xagga Aabbaha, oo Wiilka la soo mariyey’, balse tan labadii dhinacba waa ay isku diideen. Haddaba *Nicence Creed*-ka ay maanta kaniisaddu adeegsato waa kii Constantnople oo ah kii la isku raacay shirkii Toledo dhexdiisa. Waxa aad uga bogan kartaa dhammaadka buuggan. Waxa uu aha

mid ay Kaniisadd Roomanku si ballaadha u wada qaadatay, si la mid ah sida ay Kaniisadaha Borotestan-ku u wada qaateen. Balse waxaa miidda aad uga soo hor jeestay kaniisaddii Orthodox-ka  oo diiday ereygii *Felique*. Khilaafku waa uu sii socday.

Sababtee ayey Kaniisaddii Barigu uga soo hor jeesatay waxa sida tooska ah ugu cad wax baridda ku jirta Kitaabka Qudduuska ah? Tani waxa ay u fkareen in Wiilk uu noqonayo Ilaah goonnidiis u taagan sida sida ay dad badani maantadanba u qaataan amaba ku doodaan. Iyaga waxaa ka maqan muuqashada sifooyinka Ilaah oo ah in Aabbhuhu isku muujiyey Wiilka (middan oo aan aadu gu falanqayn doonnoo labadeenna cutub ee soo socda). Cullaabtu waxa ay ka timid fahanka sifooyinka saddexda sife ama shaqsiyadood ee ku jirta saddexmidnimada iyo runta sida Ereyga Ilaah uga hadlayo, taasoo ah mid aadane ahaan aynaan maskaxdeenna ku soo koobi karin. Tani waa mid had iyo gooraale laga arki akro caqiidada Saddexmidnimada. Maaddaama ay maskaxdeenna fahankeedu xad yar oo gaaban leedahay, ma ahan mid ku filan ama naga kaafiyeysa diidmada wixii Ilaah muujiyey. Sidaaan ka heli karno Yooxanaa 14-16 marna kuma arkaysid wax qalad oo uu masiixu kaga dhex hadlay ama qallooc ah wax ka leexsan wixii aannu imminka ka soo hadalnay. Aabbaha ayaasoo diray Ruuxa. Wiilka ayaa soo diray Ruuxa. Aabbuhu waxa uu Ruuxa ku soo diray dalabkii Wiilka, oo Wiilka magaciisa ayuu ku soo diray. Wiilku waxa uu Ruuxa ka soo diray xagga Aabbaha. Tani luuqad in la dhuuxo u baahan. Ma aha wax ah is-shabbihid ama isu ekaan toona. Ruuxu waa mid ahaanshaha ahaanta Ilaah, waana Ruuxa ka yimid xagga Aabbaha iyo Wiilka, oo ah Ruuxa Masiixa iyo Ruuxa Aabbaha.

**Saddexmidnimada Barakadaysan**

Annaga tixraacceennu mar walba yahay Qorniinka, ayaan waxa aan sii wadaynaa ka hadalkeenii caqiidada Saddexmidnimada: Waxaa jira hal Ilaah oo dudha;  waxaa jirta saddex hal Ilaah usku ah oo ah—Aabbaha, wiilka iyo Ruuxa Qudduuska ah; saddexdan midiba sife u gaar ahyuu leeyahay oo saddexdooda shaqsiyadood kala saaraysa iyo shuqulladooda. Ka imaanshuhu waxa uu u sugnaaday Aabbaha. Oo Wiilka oo qudha ayaa leh sifa ah in uu dhashay. Hawl dirista waxaa yeeshay Ruuxa Qudduuska ah oo keliya. Dabcan wu sugnaaday Aabbaha. Oo Wiilka oo qudha ayaa leh sifa ah in uu dhashay. Hawl dirista waxaa yeeshay Ruuxa Qudduuska ah oo keliya. Dabcan sidan ayaa ha qaabka aan ku osidan ayaa ha qaabka aan ku ogaan karno caqiidada Saddexmidnimada.  Waxaan weli u baahan nahay sharraxaad ay tahay in aan imminka wax ka ogaanno.

**Eegista Xaqiiqada Saddexmidnimada**

Waxa jira buugaan badan oo kan ka sii adag oo ka hadlan ‘eegista xaqiiqada Saddexmidnimada’ oo marama qaar lagu tilaamaamo,sida . Tani waxaa weeye in sifayaasha Ilaah ay qaaba kale leeyihiin. Tan Koobaad waa Aabbaha, Wiilku waa kan labaad, Ruuxa Qudduska ahuna waa kan saddexaad. Tani macnaheedu ma ahan in midi uu kana kale ka hor jiray, maxaa yeelay iyaga oo dhan waa hal Ilaah oo daa’imid ah. Midda kalena ma ahan in midi uu sarreeyo, kan kalena ka hooseeyo, midka saddexaadna uguu wada hooseeyo—balse midkastaaba waa mid gooni ah, haddana hal Ilaah oo aan la kala saari karin ah. Saddexdan

xidhiidhkoodu waa saddex shaqsiyad oo Ilaah leeyahay, oo midba Ilaah si gaar ah isugu muujiyey.

Aabbaha cidina ma dhalinm meel kalena lagama soo dirin. Isagu waa Aabbaha Wiilka, oo ka ahaaday xagga jirsta weligeed ah. Ruuxa xaggiisa ayaa laga soo diray, oo waa Ruuxiisa. Isagu waxa uu ku dex shaqay labadaba, Wiilka iyo Ruuxa Qudduuska ah, mana ah wax la kala rogrogayo.

Wiilku waa kan ka ahaaday xagga Aabbaha ee nolosha weligeed, isaga ayaa soo diray oo uu ahaantiisa muujiyaa.  Waxaa kaloo uu soo diray oo uu ku dhex shaqeeyaa Ruuxa Qudduuska ah, oo ah Ruuxiisa, taanisa ma aha wax la kala rogrogayo.

Ruuxa Qudduuska ahu waxa uu ka yimid xagga Aabbaha iyo Wiilka, oo iyaga ahaantooda ayuu muujiyaa.

Iyagu dhamaan waa hal Ilaah, oo waa isaga mid xurmada, xoogga iyo ammaanta. Midna goonni ahantrogayo.

Ruuxa Qudduuska ahu waxa uu ka yimid xagga Aabbaha iyo Wiilka, oo iyaga ahaantooda ayuu muujiyaa.

Iyagu dhamaan waa hal Ilaah, oo waa isaga mid xurmada, xoogga iyo ammaanta. Midna goonni ahantiisa Ilaah uma aha. Midna kam kale kama hooseeyo—haddan si kale o dhahnana, midna kan kale kama darajo duwana. Balse tan meesha ku jirta ayaa waxa ay tahay sida midba uu shaqo iyo sife gaar ah u leeyahay oo ahaanshahoodu waa sidaa oo aan la kala qaadi karin. Midba tilaamaan ayuu leeyahay mase laha kala sarrayn. Waa qaab is raacsan oo uu Ilaah leeyahay, oo isku darajo ah. Marka aannu ka hadlayno 'eegista xaqiiqada Saddexmidnimada', waxaa la inaga rabaa in aannu xaqiiqadan runta ah maanka ku hayno. Tani waa sida uu yahay ahaanshaha qaabka saddexda sife ee Saddexmidnimada.

**Hawl qabadka Saddexmidnimada**

Xiriirrada Ilaah waa kuwo caddaynaya sida Ilaah wax u sameeyo ama falimihiisu yihiin. taa middan waxa loola jeedo ereyada 'hawl qabad Saddexmidnimada'. Wax walba oo uu Ilaah qabto waxa ay ka ahaadaan Aabbahay. Isagu waa kam koobaad. Oo waxa ay soo maraan Wiilka. Isagu waa kan labaad. Waxaa kaamila Ruuxa. Waa kan saddexaad. Shaqada Ilaah waa shaqada saddexdan shaqsiyadoo ooh al isku ah. Waa jiraan aayado si gaar u sheegaya in bilowgii abuurita uu lahaa Aabbaha, oo madaxfurasho ahayd shaqada Wiilka, barakaduna xagga Ruuxa, laakiin marka aan eegno Qorniinka oo dhan uu sheegayo **waxa aan arkayna in dhacdo kasta ku ahaanayso sabatoodu Aabbaha, Wiilka oo ah dhexdhexaadiyaya, iyo Ruuxa Qudduuska ah oo kam kaamil yeela ama ebya oo dhammaystira.** Waxaan weli u sii baahan nahay in aan xoogga saarno ogaashaha in shaqsiyada Saddexmidnimadu ay hal yihiin. ma jiro mid sare iyo mid hooseeya toona. Haddana waa qaabka Ilaah wax u sameeyee, falimihiisu saddexdan hannaan ayey maraan. Waa sida Ilaah shaqasiisu tahay.

Tan waxaan si aad ah u arkaynaa marka aan tixraac ku samayno Ilaah shaqadii abuurista. 'Bilowgii Ilaah samada iyo dhulkuu abuuray' (Bilowgii 1:1).  Haddana waa Wiilkiisa 'kan uu wax walba ku abuuray' (Cibraaniyada 1:2). Balse waa in aan ogaanna in wadista shaqadu ahayd Ruuxa Qudduuska ah (Bilowgii 1:2), kaasoo lagu tilmaamo in uu yahay wakiilka abuurista , kaasoo lagu tilmaamo in uu yahay wakiilka abuurista (Sabuurrada

104:30). Ilaaha Aabbaha ah ayaa sameeyay, Wiilka ayuu sooo mariiiyay, oo Ruuxa Qudduuska ah ayaa ebiyd u ahaa.

Waxaan arki karnaa shaqadii Ilaah ee badbaadada. Waa Aabbaha kan dadkiisa u soo diray Wiilkiisa, oo u soo diray si uu dunida u badbaadiyo (Yooxanaa 6:37-40). Waxaa uu ahaa Ilaaha Wiilka ah kii dhimashada u qaatay, oo haddana dhimashada uga sare kacay iyaga xaq-ka-dhigiddooda (Rooma 4:24-25). Waa Ilaaha ah Ruuxa Qudduska ah kan u keenay ama siiya farxadda iyo faa'idooyinka wixii uu Masiixu uga tegay inuu u kaamil yeelo oo uu hage ugu noqdo (1 Korintos 2:1-5; 1 Tesaloniika 1:5-10). Shaqada Ruuxa Qudduuska ahu waxa la dhidhiidhaa shaqada Wiilka, si la mid sida shaqada Wiilki ay u raacdo tan Aabbaha. Ilaahshaqsiyadiisu marna ma kala duwana shuqulladiisuna waa sidoo kale in kastoo isga oo shaqsiyad kala duwan ah sameeyo. Tan ayaa ah meesha laga garan karo sida Ilaah u shaqeeyo. Marka aan adeegsanayno weedha 'hawl qabadka Saddexmidnimada' waa in aan had iyo goor aan maanka ku haynaa runtan aannu hadda ka soo hadalnay.

**Kala Duwanaasho La'aan**

Marna soona af jari karno kala qaadis la'aanta cajaa'ibta Sadexmidnimada, balse waxaan imminka uun aan guudmar ku soo samaynay wixii uu Qorniinku ka yidhi iyada. Waxa loo baahan yahay in la fahmo ayaa ah sid mid kasta oo saddexdan ka mid ah uu Ilaah u yahay, oo haddana xidhiidhkooda iyo ahaantoodu mid u yihiin. Culayskani waa mid had iyo goor jira mana aha mid la dhaqaajin karo. Waa mid ka xoog weyn maskaxda aadanaha in ay fahmaan. Arrintu si kastaba ha ahaate, laga soo bilaabo qarnigii koobaad illaa iyo maantada, waxaa jiray dad fara badan oo istcmaalay qaabab kala duwan iyo tilmaamo bal si ay u muujiyaan sidii Saddexmidnimada loo fahmi lahaa (tusaale ahaan—qaar waxa ay yidhaahdeen, waa sida caleenta saddexda nooc ah ee geedka loo yaqaan Shamrock; oo waa maan, darreenno iyo doonis hal nin ku wada jirta; ama sida qodrraxa, ilyaskeeda, iyo kulkeeda; iwm.). Kuwani mid walbaaba cillad ama nusqaan ayuu leeyahay marka loo dhabba galo. Waa wax ka hooseeya ama ka duwan waxa uu Baybalku ka hadlayo. Waxa aannu ka hadlayno waxaa weeyaan in caqiidada Saddexmidnimadu aysan kala duwaansho lahayn. Mana jiraan waddooyin ku kala duwi karno. Ma ay jiraan wax la mid ah oo aan ka hadli karno. cajaa'ib ka weyn laga hadlaa ma ay jirto. Ilaah wax lagu nisbeeyo ama lagu tilmaamaa ma jiraan. Isagu waa ka weyn yahay wax caddyn lagu garto oo keliya, xadkiisuna wa ka weyn yahay fahankeenna aadane ahaaneed.

**Qaabka ugu Fiican ee Sharrax ku Bixin karno**

Waa wax aan caqli gal ahayn in aan fahanno runta ku saabsan Ilaah annaga oo aan baran Eregiisa. Waa ay adag tahay in aan dadka ka caawino in ay rumeeyaan cajaa'ibtan haddii aysan iyagu doonis u lahaan miba, "in ay maqlaan oo loo sharraxo Kitaaabka iyo iyaga qudhoodu daraasad ku sameeyaan oo bartaan". Haddiiba aad fursad u heshay saaxiib wax ku weyddiiya ama ku maqla, maxaa kuu diiday inaad Kitaabka la kala baxdid, oo aar raacdid qaabkan aad imminka arkaysid?

Haddii ay duruufto noo saamixi weydo oo aan waqti u weynno, waxaan dabadeed u baahan nahay in saaxiibbadeen siinno Qorniinka ku jira cutubka 6aad een soo aragnay. Ugu

yaraan middani waxa ay ka caawinaysaa fursaddii ay maaddadan uga hadli lahaayeen. Aayadda aan siinayno aya waxa ay tahay Matayos 28:19, taasoo Ciise masiix inagu amrayo in aan tagno oo aan quruumaha oo dhan xer ka dhex samayno oo aan ku baabtiisno 'magaca Aabbaha iyo Wiilka iyo Ruuxa Quduuskaa'. Isagu ma uusan odhan 'magacyada' balse 'magaca'. Tani waxa ay na tusinaysaa in uu ka hadlayo hal Ahaansh. Waxaa jira hal Ilaah oo qudha. Waxa uu u tilmaamay iyaga oo isku mid ah haddana shaqsiyad kala mid ah in ay sitaan. Ciise waxa uu u kala caddeeyay sida ay iyagu kala ahaayeen. Haddaba waxaa jirah ha Ilaah oo keliya. Waxaa jirta saddex sife oo ahl Ilaah ah. Iyagu waa mid, hal ahaansho oo ahanshooyin kala mid ah ku ahaaday mid. Kan koobaad waa Aabbaha, waxaa ku xiga wiilka, kan saddexaadna waa Ruuxa Qudduuska ah. Waxaa jira wax badan oo sharraxaad oo aan sii bixin karno sidii aan aan sheegnay. Si kasta oo ay ahaataba ahaanta Ilaah waxaa koobsaday Saddexmidnimada.

## 10.
## Qalaadaadka Loo Baahan yahay in la iska Ilaaliyo

Waxaannu soo ka soo hadalnay in taariikhdii kaniisadda dhexdde ay dad badani isku dayeen in aeexaan caqiidada saddexmidnimada iyaga oo raadinaya qaab si fudud loogu fahmo. Mararka qaar waxa ay isku dayayeen in ay u sharraxaan hab fudud oo aad u jilicsan oo wax la rumaysto aan ahayn ahayn. Ha yeeshee caqabaduu waxa ay ahayd iyaga oo aan ka hadlin waxa Qorniinka Qudduuska ahu na barayo. Waxa ay ku dhaceen waddo kale oo ay saddexan ugu magacaabeen oo aan ahan caqiidada Saddexmidnimada ee Byabalka. Haddii aan caqiidada Saddexmidnimada u raacno sida ay ku socoto dunidan maanta ee casriga ah, qatartaas oo kale ah ayaa na soo food saaraysa. Sidaas daraaddeed xikmaddu waxaa weeyaan ogaanshaha qodobbada aan ka digtoonaanayno. Waxaa weeyaan in aan qaadanno tallaabooyinka lagama maarmaanka ah si aynaan dabinkan oo kale ugu dhicin. Dabinkan waxaa ku dhacay saddex kooxood oo qolaba dhan ay ka ay rabto ka abaartay caqiidada Saddexmidnimada, oo waxaa qasbanaatay runtii laga tanasulay, oo la maanaco ama laba dafiro.

### Saddex Ilaah Caabudid

Kooxdani waxa ay noqotay kooxdii ku guul darraysatay in ay qiraan in Ilaah hal yahay. Yuhuuddu waxa ay ku adkaysteen in uu jiro Ilaah keliya, tanna waxaa horay u sii. Aad ayey u yarayd in dadka Masiixiyiinta ah ay runtan ka tanaasulaan. Balse kuwii Saddexmidnimadan sida qaldan u fahmay waddo kale ayey iska qaadeen. Labo ka mid ah waxa ay ahaayeen John Ascusnages oo ahaa reer Constantnople iyo Philiponeus oo ahaa reer Laxsandeia, kuwaasoo noolaa dhammaadkii qarnigii lixaad. Waxa ay ku kadsoomeen in ay jiraan saddex Ilaah oo kulligoo hal nooc ah oo shaqooyin kala nooc ah kala leh balse aan hal wada ahayn. Kuwan qaladkooda waxaa ka sii weynaa kan ay la yimaaddeen firqada waqtigan casriga ah timid ee loo yaqaan Mormon, kuwaasoo rumaysan in ay jiraan ilaahyo aad u fara badan oo aan la soo koobi karin. Rumayta ilaahyo badan waxaa Af Ingiriisi ahaan lagu magacaabaa ‘poythiest’.

Haddii aan xusuusanno oo aan xajisanno runta ku jirta cutubkii 2aad, markan ku dhici mayno labadan kooxood dabinka ay ku dhaceen. Waa wax hubaal in Masiixiyiin badan ay qalbiyadooda Ilaah ku haystaan kagana fakaraan in inkasta oo uu saddex sife leeyahay haddana uu mid qudha yahay. Waxaa qalbigooda ku weyn in Ilaah saddex sife isku muujiyey balse uu hal, oo haddana uu hal yahay balse uu saddex sife leeyahay oo weliba kala duwan. Dadka rumaysadka noocan ah lahu marna Ilaah ku turunturroona maayaan oo saddex Ilaah u caabudi maayaan. Waxaa la rabaa in ay ducadooda iyo baryadooa ay Ilaah u jeediyaan balse ayan wax turxaan ah qalbiyadooda kaga fakirin iyaga oo aan wax shaki ahi ku jirin, maxaa yeelay shakigu waa kan turxaanta abuuray.

### Monachiansm

Kooxdani waa kooxda ku guul darraysatay in ay qaataay saddexda ahaansho ee Ilaah ee halka Ilaah isku ah. Waa qalad ay ilaa markii ay bilowdeen ku soo dhaqmayeen, maantana waa kuwo aad u soo badanaya oo shaqsiyaan iyo kooxoba leh oo lagu magacaabo morarchaian.

Iyagu waa ay ka hadlayaa oo soo hadal qaadayaan Wiilka iyo Ruuxa Qdduuska ah oo waxa ay ku tilmaamayaa in ay ka darajo hooseeyaan Aabbaha. Oo waxa ay had iyo gooraare carrabka ku hayaa in Wiilka iyo Ruuxa Qudduuska ahu ayan Ilaah ahayn! Arrintan xarbigeedu dhammaan mayo! **Waa in aan aad u adkaynaa in Rabbi Ciise Masiix yahay Ilaah si la mid ah sida Aabbuhu u yahay, oo ay isku mid yihiin. oo waa in aan si taas la mid ah Ruuxa Qudduuska ah u aqoonsannaa in ay isku hal yihiin.**

Waxaan arkaynaa qaladaadkani ay biloween horraantii qarnigii labaad. Waqtigaas waxaa kacay qolo loo yaqaan Gnostics oo bidco ah, oo ku doodayey in uu jiro hal Ilaah oo keliya, ooh al shaqsi yahay, oo ay isaga xaggiisa ka yimaadeen shaanshooyin ah ilaahyo isaga k a darajo hooseeya, oo uu ugu talo galay in uu adduunka kula xidhiidho. Waxa ay ku magacaabeen ‘aeons’ masiixana waxa ay ku tilmaameen in uu ahaa mid ka mid ah kuwa ugu sarreeya. Sidoo kale waxaa jiray qolo kale oo bidco ah oo la yiraahdo Ebiontes, kuwaasoo iyaguna in Masiixu uu ahaa qof aadane ah, Ruuxa Qudduuska ahna uu yahay awood aan bini aadan ahayn balse saamaym leh. Waxaa kaloo jirtay qolo kale oo iyagana lagu magacaabo Socinians oo qarnigii lix iyo tobnaad ka kacday Yurub kuwaaso la so baxay caqiido ay uhu magac dareen Unitarian, kuwaasoo illaa maantadan jira. Intii lagu guda jiray qarnigii la soo dhaafay, oo ahaa waqti aad loo weereray Baybalka, mucjisooyinkiisii oo dhanna la dafiray, waxaa soo baxay caqiido taas oo kale oo jahwareer badan dadkii caammada aha gelisay. Oo waxaa illaa hadda jira dad Magaca Masiixiyadda sheeganaya oo middaa aaminsan.

Dhibaatada ugu weyni waxa ay kacday qarnigii afraad waxa ayna ka kacday nin Arius la odhan jiray, oo ka mid ahaa odayaasha Kaniisadda Alexsandria. Waxa uu ku dhawaaqay in Ilaah yahay hal shaqsi uu weligiis jiray, kaasoo, wax walba ka hor abuurmay, abuurtan abuur walba ka sarraysa araggiisa ka abuuray. Kaasuna uu yahay Wiilkiisa keliya ee xaggiisa ka dhashay. Arius waxa uu sheegay in Wiilku leeyahay sifaha Ilaahnimo balse uu darajo hoose leeyahay. balse uusan xagga nolosha daa’imiska ah uusan u ahayn Wiilka Ilaah, oo uusan Ilaah u ahayn si la mid ah sida Aabbaha oo kale. Waa wiilka kan wax walba lagu abuuray, oo waa isaga, kan markii dambe noqday aadanaha kuna sifoobay Ciisaha reer Naasareed. Waxa sheegay in abuurtii ugu weynayd ee uu Wiilka Ilaah abuuray ay ahayd Ruuxa Qudduuska ah. Kaasuna waxaa weeye ayuu yidhi mid sidiisa oo kale leh darajo hoose.

Waxa ay dadku u haystaan in shaydaanku uu bidconimadan kaga guulaysan karo kaniisadda caalamiga ah ee Ilaah. Waqtiga waxaa ninkan bidcanimadiisa aad uga soo hor jeestay Athanasius keliya, isaga oo labadan kaga dooday waxa uu Ereyga Ilaah ka leeeyahay ee uu ku sifaynayo iyo wixii rumaystayaashii ugu horreeyay ay qabeen. Runtii naxariiseed ee Ilaah ayaa maalintaa guulaysatay. Balse qolodii Arius raacday ee loo yaqaanno Arianism halakaas kuma aysan dhiman, oo hadba mar ayey taariikhda ka dhex muuqanayaan. Qolodan loo yaqaanno ‘Jehova’s Witnesses’ waa tafiirta casrigan ee Arian, in kasta oo ayan aad isku mid ahayn, oo ma aamminsana in Ruuxa Qudduuska ah uu sinnaba Ilaah u yahay. Haddaba waxa aan u baahan nahay in aan ka feejignaanno qaladaadkan ay kuwan iyo kuwo kaleba aad maanta caalamka ugu faafinayaan.

Arius marna wax saamayn ah ma yeelan lahayn haddii Origen saacidi lahayn (185-255. Ciise Kaddib). Kani waxa uu ahaa kii sii waday fikirkii Arianism-ka ee aasaaska u noqday oo mid ka mid fikirkiisii aad loo qaata. Waxa uu sheegay in Wiilku ammaan leeyahay rabbanina yahay, balse uusan Ilaah u ahayn si la mid ah sida Aabbaha. Waxa uu sheegay in Ruuxa Qudduuska ahu yahay Ilaah darajo hoose leh. Waxa uu dadka ku helay dhagartan ah

darajada Ilaah, in kastoo uu darjadii kala sare maryay, oo taas ayaa fikirkii Arius ku soo yare socday. Fikirkani waxa uu noqday nid markii dambe loo bixiyey Semi-Arianism, oo waxaa Shirkii Niceaea soo hor dhigay nimankii la kala odhan jiray Eusebius oo reer Kaysariya ahaa iyo Eusebius kale oo isna reer Nikodemiya. Qaar waxa ay qaateen aragtida ah in Ruuxa Qudduuska ah yahay abuurtii ugu horraysa ee uu Wiilku abuuro oo waxa ay raaceen Arius, intii badnaydse waxa ay qaateen in uu yahay ahaansho rabbani ah oo saamayn leh.

Origen waxaa aad u saamaysay wax bariddii Tertullian oo joogay (160-240 qiyaas ahaan. Ciise Kaddib). Inkastoo uu soo qaaday ereyga 'Saddexmidnimada', wax bariiddiisii maysan haleelin in uu iska dhawro ama iska ilaaliyo tan ah in Wiilku yahay Ilaah leh darajo ka hoosaysa tan Aabbaha. Isaga qaladkiisu waa uu yaraa si ahaan marka kuwa kale loo eego. Ha yeeshee, waxa ay na tusinayaan muhiimadda ay leedahay in aan ka taxadarno maaddadan ku saabsan Saddexmidnimada. Qaladkiisa iyo qaladaadka kuwa kaleba een qaybtan uga soo hadalnay, waxaan iskaga ilaalin karnaa haddii aan maanka ku haysanno oo aan xusuusnaanno cutubyada 3 illaa 5, iyo 7 iyo 8 ee buugeennan ku jira. Sidoo kale maannu dusha xafidno Kolosay 2-9 iyo Falimaha Rasuullada 5:2-4?

**Moldelism (Aannimaadda Isu-ekaysiinta)**

Kuwani waa kuwii ku guul darraystay in ay rumeeyaan saddexda shaqisyadood ee Ilaah ee uu ugu sifoobay saddex qaab oo kala duwan. Weli ogoow Arians-ku waxa ay qabeen in ay jiraan saddex sife oo Ilaah leeyahay in kasta oo ay qaab kale u fasiranayaan. Haddaba waxaa kuwo iyagu naftooda oo dhan siiyay aragtidan. Iyaga oo rumaynaya in uu jiro hal Ilaah oo keliya ayaa haddana waxa ay galeen dabin in ay dafireen saddexdiis shaqsiyadood ee Ilaah. Haddii aan aragtidooda trixraac ku samayno, waxa ay sheegayaan in Ilaah yahay hal shaqsi oo ah, sidii jilaa oo kale. Waxa uu si guul leh ugu muuqday sidii Aabbaha, Wiilk iyo Ruuxa Qudduuska ah. Qaybta koowaad markii uu jilayey, kuwa kale maysan jidhin. Iyagu waxa ay u maleeyeen oo keliya in Ilaah qaabab kala duwan u muuqanayo, oo aragtidan waxaa lagu magacaabaa 'modelism'.

Qolodan modelism-ku noocyo waaay kala duwanayaayeen waxaana koow fikirkan lahaa Praxeas nin la odhan jray oo dadka Aasiyada Hoore ahaa bilowgii qarnigii saddexaad. Laakiin ninka aadka loogu aqoosaday waxa uu ahaa Sabellius, oo ahaa oday kaniisadeed ee meel lagu magacaabi jiray Ptolemais, oo noolaa ill qarnigii saddexaad dhexdiisii. Sidaas intii qaladkan raacday waxa ay ugu magac dareen 'Sabellianism'. Waxa soo saaray caqiido ah in Ilaaha Aabbaha ee weligiis jiray uu yahay fuliyaha wax walba. Markii uu caalamka abuuray, kaddin ayuu na dhex yimid isga oo aadane ah, oo wata magaca Ilaaha Wiilka ah. Markanna isaga oo ka dhex shaqaynaya nafta rag iyo dumarba ayuu na dhex joogaa isaga oo wata magaca Ilaaha Ruuxa Qudduuska ah. Tan macnaheedu wan macnaheedu waxa uu noqonaya in Ilaaha Aabbaha ahu uu ku dul silcay Iskutallaabta dusheeda. Oo sidaas daraaddeed Sebellians-ka waxaa kaloo loogu yeedhaa 'Patripasians' oo manaheedu yahay (kuwa dadka bara in Aabbuhu silcay).

Qaladkani marar badan ayuu soo laalaabtay dhawrkii qarni ee la soo dhaafay, gaar ahaan saamayn ay yeesheen qoraallo ay sameeyeen filasuufyo reer Yurub ah kuwaaa oo waayo aragnimo ka helay saamayn ay Masiixiyiintu leeyihiin. Maanta aad uma sii shaacsana. Laakiin weli waa ay jiraan. Haddaba dadka qaar waxa ay isku dayaan in ay saddexmidnimada

u sharraxan dadka kale, kuwaasoo soo qaata tusaalaha sida curriyaha $H_2O$ oo ah isku jir maaddada kiimikada ah. Oo mar ahan kara baraf, biyo ama hawo. Tani runta ayey dabin u noqonaysaa oo ay maanacaysaa. Waxa ay tani ka hor imanaysaa saddex sife eek ala duwan ee Ilaah leeyahay. waxaan horay u soo sheegnay in Saddexmidnimadu ayan lahayn isu ekaan, oo aynaan marnaba isku dayin inaan sidaas u nidhaahno.

Mararka qaar waxa aan middan ka dhex arki karnaa sida ay Masiixiyiinta qaar u ducaystaan iyaga oo aan ka fiirsanayn qaab duco ee laga rabo. Mid ayaa waxa uu ducadiisa ku bilaabayaa Ilaaha Aabbaha, in yar dabadeed, waxa uu uga mahad celinayaa inuu Iskutallaabta ugu dhintay, oo waxa uu ku dhacayaa qalad ah in uu Aabbaha ku tilmaamayo tilmaantii uu Wiilka keliyihi yeelan lahaa. Haddana waa uu sii wadayaa isaga oo sheegaya sida fiican ee uu ugu dhex nool yahay ee uu u hagayo—oo ah tilmaantii uu Ruuxa Qudduuska ah oo keliyihi yeelan lahaa. Waxaase nasiib wanaag ah, in Ilaah uusan ereyadeenna oo qudha dhegaysan balse uu qalbiyadeenna daalacdo, oo uu dhexdhexaadinta Masiixu inoo ballamisay in baryadeenna samada laga maqlayo. Had iyo goor waa wax aad Qatar u ah in Ilaah laga qaato fikrado qalad ah, waxaana fiican in aad looga taxaddaro baryada marka qofku uu dadka dhexdooda ka ducaynayo waayo dhib ayey u keeni kartaa kuwa maqlaya ducadaas. Waqddada aan kula dagaali karno ayaa waxa ay tahay in aan xusuusanno cutubka 6aad iyo kan tobnaad ee buuggan; oo aan maanka ku haysanno qisadii baabtiiskii Sayidka eek u jirta Matayos 3:13-17 halkaasoo ay saddexdii sife ee Ilaah hal mar lagu arkay.

## 11.
## Runta ay Tahay in Lagu Noolaado

Markan waxaan qalbiga ku haysanaa caqiidadii Saddexmidnimada, haddaba maxay tahay in aan samaynno? Ma halkaas ayaan ku ilaashannaa oo aan ku haysana, oo waxa aan qalbiga u sheegnaa in qaab fikirkeennii uu in yar kala baxay ama kala fiday? Mise waxaa weeyeen in aan si ficil ahaneed uga fuslinno ama uga dhaan gelinno nafsaddeenna dhexdeeda? Xaqiiqadii waa haa. Caqiido kasta oo Ereyga Ilaah laga dhex heli karo waxa ay leedahay dhaqan gelin ficil ahaaneed. Waa in sida ay u ahatay loogu dhaqan geliyo.

### Xaqiiqada la Rumaynayo

Marka ugu horraysa waxaa loo baahan yahay in la ogaado in faa'idada ku jirta rumaynta caqiidada. Ilaaha runta ah ee kiligii ah ayaa inoogu muujiyey Qorniinka dhexdiisa, oo waa wixii la muujiyey. Haddii aannu wax kale rumaynno waxa ay ka dhigan tahay in aynaan rumayn Ilaaha runta ah. Waxa ay ka dhigan tahay in aynnu nahay cawaan ama sanam caabudayaan. Waxa aynnu aamminsan nahay ayey ka dhigan tahay ilaah aan qiyaasteenn ka cabbiranay. Tritheists, Arians, iyo Modelists waxa ay uun ka yara duwan yihiin Muslim-ka iyo animists-ka. Ma ay caabudaan Ilaah is buujiyey. Waxa ay ku tilaamaan ilaah aan jiritaan dhab ah lahayn. Weli waxa ay ku dhex qasan yihiin Masiixiyiintii balse waa baadi lunsan, oo dembigooda ayey ku dhmanayaan.

Rumaysadka Saddexmidnimadu waxa uu lagama maarmaan u yahay badbaadada. Tan macnaheedu ma ahan in qofku ogaado wixii aan hadda taariikha ahaan u soo sheegnay oo dhan. Balse waxa loo baahan yahay ayaa ah in la ogaado in Ilaah yahay, kan Qorniinkiisa dhexdiisa isagu keen muujiyey, oo uu yahay hal Ilaah oo saddex shaqsi ah. Qorniinku waxa uu noo bayaaminayaa in nolosha weligeed ahi ay tahay Ilaaha runta ah oo la garto, iyo Ciise Masiix oo ah kii uu soo diray (Yooxanaa17:3). Qorniinku waxa uu na faraya in haddii aynaan u Maamuusin si la mid ah sida aan Aabbaha u maamuusno, ay taasi ka dhigan tahay Ilaah ammaantiisii oo meel looga dhacay (Yooxanaa 5:23). Kuwa Ilaah rumaysan waxaa waajib ku ah in ay sidoo kale Wiilkiisa u rumaystaan (1 Yooxanaa 2:22-23; 5:20).

Haddaba, waa sababtaas tan kuwa Masiixiyadda qaata eek u soo biira loogu baabtiiso magaca Aabbaha, iyo Wiilka iyo Ruuxa Qudduuska ah (Matayos 28:19). Ma jiro rumaysad Saddexmidnimo oo aah xer lahayn. Halka ay xer dhab ihi ka jirtana waxaa la jirta u taagnaan caqiido Saddexmidnimo.

### Runta oo La Jeclaad

Caqiiqadada Saddexmidnimadu waa aasaaska ama rukunka uu Injiilka warka wanaagsanu ku fadhiyo. Marka aasaasku sugan yahay Injiilkuna waa noo dhawrsan yahay oo sugan yahay. Taariikhdu waxa ay muujinaysaa in goor kasta oo aasaasku daciifo ama burburo, in Injiilka dhulka lagu juurayo oo uu meesha ka baxayo. Hadalka Ilaah ma lumo balse waxa weeye ku dhaqankii. Sidaas daraaddeed, **mid kasta oo jecel Injiilka warka wanaagsan, oo garanaya xooggiisa, jecel caqiidada Saddexmidnimada, waa in ay qiiro u yeeshaan sidii ay xoog ugu qabsan lahaayeen.** Waa ay garanayaan in Injiilka ay haystaan uu yahay Injiilka ama warka qanaagsan ee Ilaah. Haddii la hilmaamo Injiilka waxa ay la mid tahay Ilaah oo la

hilmaamay. Injiilku waxa loo bayaaminayaa in Ilaha Aabbaha ahu wax badbaadiyo, Ilaaha Wiilka ahu wax badbaadiyo, oo Ilaah Ruuxa Qudduuska ahu wax badbaadiyo. Ilaaha Aabbaha ahu wax buu badbaadiyaa, maxaa yeelay Isaga ayaa horau u sii doortay kuwii uu doonayey in uu badbaadiyo oo ku badbaadiya Ciise Masiix (Yooxanaa 10:28-30), oo Wiilkiisa dunida ugu soo diray sidii uu ku badbaadin lahaa (Yooxanaa 3:16; 1 Yooxanaa 4:14). Ilaaha Wiilka ahu wax buu badbaadiyaa, waayo waa isaga kii ciqaabtii dadkiisa ku dul shubay Iskutallaabta dusheeda (1 Butros 2:24), oo waxa uu u taagan yahay sidii uu iyaga jannada ugu soo dhawayn lahaa (Cibraaniyada 7:25). Ilaaha Ruuxa Qudduuska ahu wax buu badbaadiyaa, maxaa yeelay qofna nolol ruuxi ah ma heli karo oo ma rumayn karo Masiixa ilaa uu ka dhex shaqeeo maankooda iyo doonistooda (1 Korintos 12:3; 2:14; Yooxanaa 3:5-8). Qorniinku waxa uu noo sheegayaa in badbaadadu ay ka timaaddo Ilaaha saddex sife ahaantiisu tahay (1 Butros 1:2). Markii caqiidada Saddexmidnimadu la lumiyo ama daah la saaro waxa ay ka dhigan tahay iyada oo iimaankii badbaadadu lumay.

Bal ka fikir runta ah xaq-ka-dhigidda iyo carruur ka dhigashada. Ilaah waxa uu noogu caruudaa waa dembiyadeennaa awgood. Waxa uu soo diray Wiilka, oo Ruuxii Qudduuska ahaa ayuu noo soo diray, annaga oo aadane dembiilayaala ah ayuu booskii dembiyadeenna geliyay Wiilkiisii oo uu galay beeshii carada dembigeenna oo ay ahayd in aan la kulanno xukunka Ilaaha caadilka ah. Ruuxa Qudduuska ahu waxa uu nagu canaantaa dembiyadeenna si aan uga soo laabanno. Waxa uu nala doonayaa sidii aan ugu nasan lahayn. Waxa uu noo keenaa sidii aan Masiixa midoow ula yeelan lahayn, dabeecaddeena iyo dhaqankeennu u ahaadaan kuwo ay ka muuqato wixii loo sameeyay iyo u marag furka cullaabtii dembiga ee dhimashadii Masiixa looga dul qaaday. Ilaaha Aabbaha ah waxa uu markan naga dhigtay carruurtiisii, oo Aabbe ayuu inoo yahay. Sayid Ciise Masiix waxa uu noo yahay sidii Walaal naga weyn oo sidaas ayaannu qoyskii Ilaah ku nahay. Ruuxii Qudduuska ahaa ayaa inala jira oo waxa uu na siiyaa hubantida ah in aan carruurtii Ilaah nahay.

Halkan waxaa xaqiiqo inoogu ah **in qorshaha badbaadadu aanu jirayn caqiidada Saddexmidnimada la'aanteed**. Caqiidooyinka madaxfurashada iyo ilmo ka dhigashadu micne yeelan maayaan. Oo sidaas oo kale ayey noqonnayaan caqiido kasta oo uu Injiilku ka hadlo. Waannu jecel nahay caqiidada Saddexmidnimada, maxaa yeelay waa dhagax adag oo ay badbaadadeennu ku taagan tahay. Ilaaha saddexda ahaansho ahaaday waa kan ina badbaadiyay. . Ilaaha saddexda ahaansho ahaaday waa kan an jecel nahay ee sarraysiinno. Waa mid aan kacquul ahayn in aan jeclaanno haddii aynaan jeclaan runta ku saabsan isaga.

**Runta ay tahay in lagu noolaado**

Maaddama aan ku soo dhawaanay dhammaadka buuggeenna, ma idiin soo ban dhigaa ereyo shaqsi ahaantayda ah oo dardaaran ah? Wax badbaado la yiraahdo ma jirayso haddii aan qofku lahayn iimaan rumaysad oo Saddexmidnimada ah. Haddana tan macnaheedu in meeshii uu rumaysadka Saddexmidnimadu ka waxaa ka jiraysa badbaadada. Taana waxaa marag inooga ah waxyaabihii aan soo aragna. Runta Ilaah ku saabsan oo la rumaysto ayaa inagu filan. Xataa inguna filna in Saddexmidnimada oo la runaysan waayaa ay tahay Injiilka oo la rumaysan waayey. Waa in aan u nimaanna Ilaaha daddexda ahaansho ahaaday. Dembiyadeenna waxaa lagu furtay madaxfurasho weligeed ah. Ilaah waxa uu nagu amray inaan sidaas ugu soconno ilaa dhammaaadka (Falimaha Rasuullada 17:30). Wa in aynan isku

dayin in aan ku fakarno in aan camalladeenna Ilaah ugu dhawaan karno oo aan sidaas hortiisa aan xaq ku noqon karno (Rooma 3:20). Sidee baan Ilaah hortiisa xaq iskaga dhigi karnaa? Ilaah Isaga ayaa usoo diray in uu noqday Badbaadfiyaha adduunka (1 Yooxanaa 4:14). Waa dembiilayasha kuwa uu badbaadinayo (1 Timoteyos 1:15). Isaga ayaa si furan u casumay (Matayos 11:28-30). Kuwa tawbadkeenka runta ah leh ee ku qayliya 'Ilaahow ii naxariiso anoo dembiile ah,' ayaa la qaatay oo cullaabtii ka rogantay (Luukos 18:9-14), oo waxa ay galayaan nolosha weligeed ah iyo wax kasta oo jannada dhex ahaaday (1 Yooxanaa 5:11-12; Efeoso 1:3). Midna lagama fogayn doono (Yooxanaa 6:37) xaqiiqada ad ugu timid ayaa caddayn u ah in aad tahay kuwii Ilaaha Aabbaha ahu sii Wiilkiisa (Yooxanaa 6:37). Sidii aad u aqbashay, ee aadan u diidin Badbaadiyaha, ayaa daliil u ah sida uu Ruuxa Qudduuska ahu uga dhex shaqaynayo noloshaada (1 Korintos 2:14). Markam caqiidada Sadedexmidnimadu adiga meelna kaama jirto waxa ay noqotay run adiga kaa mid ah oo aad la nooshahay!

Runta saddexmidnimadu waxa ay Masiixiga u hoggaamisaa caabudaadda. Ilaah waxa aan u caabudnaa wixii uu noo sameeyay awgood. Waxaan Ilaah Ilaah u caabudnaa wixii uu noo sameeyay awgood. Balse waxa uu sameeyay waxa uu u sameeyay, maxaa yeelay waxa uu yahay kan uu yahay. Haddii aan din wax yga soo qaadanno cutubkii 9aad. Ilaah waa Ilaah hodan ah oo aynaan sifihiisa iyo awooddiis aynaan ku soo koobi karin maankeenan yare e daciifka ah. Wixii uu noo sheegay waa wax cajiib ah oo weliba fahankoodu nagu adag yahay. Waa wax aad uga fog in aan sabab u yeelno oo aan shaqsi ahaanteenna u fahanno. Marnaba ma soo saari karno mana gaadhi karno gunta, sharraxaadna iska daa. Waa wax aynaan gaadhi karin. Yaababkiisa ma cabbiri karno. waxaan aragnaa oo keliya in aan abuurtii naha, Isaguna Ilaah yahay. wax kale ma jiraan oo aan ka ahayn in aan isaga hortiisa ku nimaanno is hoosaysiin, rumaysi iyo sarraysiin. Qaab ayey ahaanshooyinka Ilaah leeyihiin, laakiin lahan darajooyin. Haddaba waxaannu sarraysiinaynaa Aabbaha; waxaannu sarraysiinaynaa Wiilka; waxaannu sarraysiinaynaa Ruuxa Qudduuska ah. Sidii Kerubiin hortiisa joogta ayaa waxaannu saddex jeer odhanaynaa 'Qudduus, waayo Isugy waa saddex,' oo haddan waxa aynnu odhanaynaa 'Quduus, quduus, quduus waxaa ah Rabbiga ciidammada', maaddaama uu Isagu mid yahay (Ishacyaah 6:3). 'weligiis iyo weligiisba Ilaahan ayaa Ilaah inoo ah, Oo isagaa hoggaamiye inoo ahaan doona xataa tan iyo dhimashada' (Sabuurrada 48:14).

Runta Saddexmidnimada waxa laga dhex arkaa ducada ama baryada Masiixiga. Aabbaha ayaa ugu horreeya, oo isaga ayey baryadu toos ugu tagtaa. Waa mniddan wixii Rabbigeenna Ciise Masiix nagu amray markii uu yidh, 'Goortaad tukanaysaan dhaha, "Aabbahayaga"' (Luukos 11:2). Sidan ayey rasuulladii u tukan jireen. Bawlos oo ducaysanaya ayaa waxa uu yidhi, 'Waxaan u jilba joogsadaa Aabbaha Sayidkeenna Ciise Masiix…' (Efeoso 3:14); oo markii ay Ilaah ammaanayeen Bawlos iyo Butros waxa ay ku bilaabeen, 'Ammaanu ha u ahaato Ilaaha ah Aabbaha Rabbigeenna Ciise Masiix…' Efesos 1:3; 1 Butors1:3) Axdiga Cusub waa ay ku caddahay in Ciise Masiix lagu ducaysto, macnana masamaynayso in lagu celceliyo, 'Ciisow, Ciisow' tan oo imminka meelo badan can ka noqotay in lagu celceliyo.

Wiilka ayaa ku xiga, oo waa Muujinta Aabbaha (Yooxanaa 1:18). Ninna Aabbaha toos uma abbaari karo, in uu Sayid Ciise Masiix u soo maro mooyaane (1 Timoteyos 2:5). Tan macnaheedu ma ahan in aynaan baryadeenna Aabbaha ku hagaajinayn, waayo tan hadda ayaa soo baranay oo aan soo aragnay. Balse macnaheedu waxaa weeye, in aynaan lahayn mansab aan Ilaah si toos ah ugu abbaarno waayo uma qalanno. Tan ayaa ah waxa uu Wiilk

ayahay iyo sidii wixii uu noo sameeyay ay ahaayeen, oo isaga aawadiis oo keliya ayaa Aabbuhu inagu maqli karaa (Cibraaniyada 10:19-22). Qatinka ducadeenna ayaa daliil u ah in magaca Ciise Masiix oo aan salaadda ku soo afjarnaa ay atahay midda aan Aabbaha ugu iman karo oo ducadayadu ku aqbalmayso. Kalsoonideenna oo dhan waxa ay dusha la fuulaysaa Wiilka Ilaah.

Ruuxa Qudduska ah ayaa ah kan saddexaad. Isaga la'aantii ma ducaysan karno, laakiin ducada waan sheegi karnaa. Waxaa Ilaah ku abaarnaa qalbi kaaraya oo ay ku jiraa nwaxyaabo aynaa caddayn karin. Ma garanayno wixii aah dhihi lahayn iyo sidii aan u dhihi lahayn, welise ducadu qalbigeenna ayey ku jirtaa. Waa shaqada RuuxaQudduuska ah kan inoo muujinaya (Rooma 8:26-27). Mar kasta oo aan Masiixa ku qunnaanno, waa Ruuxa Qudduuska ah kan ina caawinaya (Yooxanaa 15:26-27; 16:14). Salaadda qalbiga ah ee Masiixu tiirka u yahay. waa tan uu Ruuxa Qudduuska ahu inagu hoggaamiyo oo ah 'Tukasho Ruuxa Qudduuska ah' (Yuudas 20). Haddii aynaan sida u ducaysan, waxaan u baahan nahay in aan ku ducaysanno in aan helno hagidda Ruuxa Qudduuska ah (Luukos 11:13).

Ugu dambayntiii, runta ku jirta Saddexmidnimadu waxa ay ina siinaysaa tixraac cusub oo aan u yeelayno Qorniinka. Tan iftiinkeeda lama arki lahayn oo lama ogaan in Ilaah yahay mid ku sifoobay saddex ahaansho. Ma jirtaa meel kale oo laga arki karo ama fahan cajaa'ibtan laga heli? Waa Qorniika oo qura! Muxuu qoraalka ama qorista Qorniinka Qudduuska ahu ku ahaaday?  'ad Ruuxa Quduuska ahu waday ayaa xagga Ilaah kaga hadlay' (2 Butros 1:21). Waa maxay dulucda ku jirta Qorniinka? 'waana iyaga kuwa ii marag furayaa' ayaa Wiilka Ilaah yidhi (Yooxanaa 5:39). Sidee ayaa Qorniinadda loo caddayn karaa ? Waa 'ray walba oo afka Ilaah ka soo baxa' (Matayos 4:4). Cajaa'ibta ugu weyn wax walba waa Kitaabka, kaasoo uu Ruuxu hagayey, Masiixu udub dhexaad u yahay, oo ah mid Ilaah bixyey!  Wax kasta oo aan Ilaah ku rumaysan karno ayaa kitaabku ina barayaa. Waxa uu na barayaa runkniyada uu Ilaah naga doonayo.  Waa Ereyga Ilaah ee runta ah.

Aan la soo baxno waxa uu yahay, waayo ma ahan erey beni aadan, balse Ereyga Ilaah. Aan aad iyo aad u akhrinno ma walba. Annaga oo ka tacaddarayna, oo ducaysanayna. Oo aan isaga ku noolaanno. Ma waxaa jirta waddo kale oo aan uga farxin karno kii ay ereyadiisa ahaayeen in aan akhrinno oo qudha mooyaane

Ammaani ha u ahaat Aabbaha, iyo Wiilka iyo Ruuxa Qudduuska ah;
Sidii uu weligii aha,
Imminka uu yahay,
Oo uu wiligiis ahaan doono:
Adduun aan dhammaad lahayn.

Amen!

## Lifaaqa I
## Nicene Creed (Baqii Niseen)

Tiirka iimaanka ee la isku wada raacsan yahay ee caqiidada Saddexmidnimada waa Nicene Creed. Kan waxaa la isku waafaqay Shirkii Nicacea ee 325 Ciise Kaddib. Oo tusmooyinka ku saabsan shaqsiyadda Ruuxa Qudduuska ah iyo calaamadiisa waxaa loagu daray Shirkii Constantanople ee 381 Ciise Kaddib. Weedha (*Filique*) waxaa ku dartay Kaniisadda galbeedka ee Toledo ee Spain 569 Ciise Kaddib, marka laga reebo weedha ama jumladda aan soo sheegnay ee 'iyo Wiilka' oo Masiixiyiinta caalamka oo dhan isku wada raacsan yihiin marka laga reebo Kaniisadda Barigu ay diidday. Qoraalkan *Nicene Creed* ee la isku wada raacsan yahay waxa uu u qoran yahay sidatan:

Waxaan rumaysanahay hal Ilaah, oo ah Aabbaha Qaaddirka ah, abuuraha samada iyo dhulka, iyo waxa la arki karo iyo waxa aan la arki karin: iyo Hal Sayid oo ah Ciise Masiix, oo ah Wiilka xagga Ilaah ka dhashay, oo dhashay intaan dunida la abuuurin ka hor, Ilaah ku ahaaday Ilaah, Iftiin ku ahaaday Iftiin, Ilaah ahaatiisa ku yimid, dhashay, balse aan la samayn, oo mid la ah Aabbaha; kaasoo wax walba Isaga lagu abuuray; oo annaga oo aadane ah, badbaadadeenna awgeed samada uga yimid, oo Ruuxa Qudduuska ah kaga uuraystay Maryan oo bikro ah, oo yeeshay ekaanta aadane, oo annaga daraaddeen Bootiyas Bilaatos amarkiisa lagu qodbay, silcay oo la aasay, oo maalintii saddexaad dhimashadii ka sare kacay, sidii Oqrniinku u sheegay, oo samada aaday, oo fadhiya midinga Aabbaha. Oo mar labaad ku iman doona ammaantiisa, oo xukumi doona kuwa nool iyo kuwa dhintay; oo aanay boqortooyadiisu idlaan doonin/ oo waxaan rumaysanahay Ruuxa Qudduuska ah, Rabbiga ah bixiyaha nolosha, oo ka yimid xagga Aabbaha iyo Wiilka (*Filique*); kaasoo isaga daraaddiid Aabbaha iyo Wiilka lagu caabudo, oo lagu ammaano; oo ay nebiyadii ka soo hadleen. Waxaan rumaysanahay hal kaniisad oo caalami ah; waxaan qirsanahay hal baabtiis oo qirashada dembiyada ah; waxaan qirsanahay sarekicidda kuwa dhintay, iyo nolosha dunida iman doonta.

## Lifaaqa II
## Nicene Creed
## Sideen u Horumarin Karaa Aqoontayda Caqiidada Masiixiyadeed

Marka ugu horraysa waa tusaale ahaane, ka bilow lafaha. Dabadeed hilib iyo muqo u yeel, deetana naaxi. Oo dabadeed illeen adigu naf ma geklin martide, Ilaah ka bari in uu wax noo la dhigo! Xusuusnow in qalfoof taagani aanau waxba tarayn, tan oo macnaheedu yahay rumaysad sheegasho ah.

Petter Jeffery Buuggiisa lagu magacaabo *Bitesize Theology* waa aad muhiim uga xagga barashada 'Iimaanka Masiixiyadda', oo waxa uu ku siinayaa caqiidooyinka Furaha u ah caqiidooyinka ku jira kitaabka. Waa mid qoraalkiisu dufud yahay oo aad loo fahmi karo oo ay sahlan tahay in horay laga bilaabo. G.I. Williamson sidoo kale, gaar ahaan majalladiisa ku saabsan *Kaatakiiska* ee ay daabacday (Presbyterian & Publishing Compaly). Sidoo kale waxa aan soo jeedinayaa Derek Prime su'aalihiisa ku saabsan *The Christian Faith Answered from the Bible* (Kingways Buplishing), kaasoo aniga ahaan mar walba miikayga ii saran, oo aan aad wax uga diyaariyao. Booggaas marna igama baxo,

Si lafaha aannu jiidh ugu yeelno waxaan soo jeedin lahaa in sidoo kale ad akhrisato buugga lagu magacaabo *Westminister Confession of Faith* oo isna uu qoray G. I. Williamson oo ay daabacday (Persbyterian & Reformed), oo ah bug si kooban loogu ururiyay iimaana Masiixiyadda, iyo buugga kale ee la yiraahdo in Understanding be Men. Oo uu qoray T.C. Hammond oo ay daabacday (Inter-Varsity Press). Ilaah ayaan uga mahad celiyaa in buuggani uu gacatayda soo galay intii aan yaraa, iyo bilowgii iimaankayga Masiixiyadda.

Intii aann hadda adiga uun baa kala dooran kara oo akhrisan kara kan ku anfaca. Aniguse waxaa kuu soo jeedin lahaa buugaagta la kala yiraahdo *The Confession of Faith* and *Outline of Theology* oo uu leeyahay A. A. Hodge; iyo *Systematic Theology* oo uu leeyahay Louis Berkhof labadaba waxaa daabacday The Banner of Truth Trust, aniga qudhaydu waqti dheer ayaan isticmaalayey, xataa markii aan buuggan diyaariyey. Aad ayaan wax badan uga faa'iday.

Talada ugu muhiimsan ee aan bixinayo waxa ay tahay, in aad ku xidhanto kaniisad kitaabka lagu tafsiiro toddobaad walba oo aad ka mid noqoto taas oo ah mid u furan in ay dadka ka caawiso barashada sifooyinka Ilaah, si aad Adigun dad kale uga caawiso caawisid.

Nimcada Rabbiga ha kula jirto!